


# SAMATAALIS



**CALI DIIRIYE CIGAAL  
(CALI GAAB)**

AMIN  
AMIN

# SAAHATALIS

**Maskaxdii**

ALI DIRIYE IGAL  
(CALI GAAB)

Min guuriye

IBRAAHIN MUUSE WACAYS

Isu dubbaride

CABDI MIIGGANE GUULEED

# TUSMADA

## QORMADA

## Bogga

1	Tusmada		i
2	Mahadnaq		v
3	Cali Gaab waa kuma?		vii
4	Hordhac		1
5	Arar		5
6	<b>6) <u>Qaybta koobaad IGAD</u></b>		8
6-1	Hooya naga guddooma	hees	9
6-2	Weerar	tix	11
6-3	Adduun waa dhaxdin	tix	15
6-4	Afrikay lagaa dhereg	hees	19
6-5	Guubaabo Abwaan	tix	22
6-6	Maxaad u habranaysaa	hees	26
6-7	Bi'iwaa Afrikay	hees	27
6-8	Afrikay gobbaad tahay	hees	28
6-9	Geesiga cartamayaa	hees	30
7	<b>7) <u>Qaybta labaad Samatalis I</u></b>		36
7-1	Arar		37
7-2	Soo dhaweyn	hees	38
7-3	Garabweyne libaax	tix	39
7-4	Dhaliil	gabay	43
7-5	Afrikada sadkeedii	tix	46
7-6	Hunguri wad ma arko	tix	47
7-7	Soomaali baa tidhi	hees	52
7-8	Tirtirsiin	tix	54
7-9	Xujo	hees	57
7-10	Gol daloolo	gabay	85
7-11	Soomaaliyey maqal	hees	61

7-12	Xaal adduun	tix	63
7-13	Raganimo	hees	69
7-14	Soomaaliyey ha heshiin	geeraar	71
7-15	Hidde	tix	72
7-16	Samo goob	tix	76
7-17	Wax sheeg	hees	84
7-18	Soomaaliyey daa	hees	86

8 **8) Qaybta Saddexaad Samatalis II** 89

8-1	Door roonayaal	hees	90
8-2	Guubaabo	tix	91
8-3	Hanbalyo	hees	96
8-4	Caloolyow	tix	98
8-5	Geeddiga horuuwada	hees	104
8-6	Bogaadin	gabay	106
8-7	Sokeeyahayagow	hees	108
8-8	Gobonimo	tix	109
8-9	Yididdilo nabadeed	hees	114

9 **9) Qaybta Afraad Samatalis III** 116

9-1	Ku salaannay calanyow	hees	117
9-2	Bal dharaara ku heesa	tix	119
9-3	Caawa waa habeenkii	hees	122
9-4	Been dariiq ha u furin	tix	123
9-5	Xuma duug	tix	125
9-6	Dardaaran	tix	127
9-7	Dable dhaarsan	hees	130
9-8	Walaal inuu macaan yahay	hees	132
9-9	Murgiyey	tix	137
9-10	Colaad ha ku degdegin	hees	140

10 **10) Qaybtay Shanaad Samatalis IV** 143

10-1	Noo malee	hees	144
10-2	Badda qaad	tix	146
10-3	Darka nabadda	hees	148
10-4	Bahardaad	geeraar	149
10-5	Taran colaadeed	hees	150
10-6	Dantaada ka raac	geeraar	151
10-7	Dood	geeraar	153
10-8	Maydhaan	gabay	156
10-9	Gocasho	gabay	160
10-10	Midnimada u soo baydh	hees	162
10-11	Akaa madoobe	tix	164
10-12	Deexasho	geeraar	169
10-13	Sahay	hees	171
10-14	Sarbeeb	guux	173
10-15	gar dhig	hees	177
10-16	Ha dabbaaline daa	geeraar	178
10-17	Waajib	tix	183
10-18	Yididdiilo	hees	189
10-19	Hayb aadami	gabay	191
10-20	Duco ma lagu, eegay	geeraar	193
10-21	Godob yareey	hees	197
10-22	Jacbur	tix	198
10-23	Dugsi nabadeed	hees	206
10-24	Ishaaro	hees	207

11 **11) Qaybta lixaad Maanso qobona ah** 212

11-1	1 Askariyow	hees	213
11-2	2 Maamuus	hees	215
11-3	3 Ka marag noqo	hees	216
11-4	4 Wallee dheehay	hees	218
11-5	5 Hidda raac	hees	219
11-6	6 Israa'iil	hees	220
11-7	7 Kaalaya bal daawada	hees	222

12	12) <u>Qaybta Toddobaad Heshiisiin</u>	232
12-1	1 Heeshiiskii Dawladda Djibouti iyo Frud	233
12-2	2 Dib u heshiisiintii Ururrada Soomaaliya	242

Fiiro Gaar ah

"Tix", inta badan waa "Jiifto".

## MAHADNAQ

Labada nin ee qoraalkan ifka u soo saray ka sokow, oon u arko in aannu hawshan saddexan ku nahay Ibrahim Xaagi Muuse Wacays iyo Cabdi Miiggane Guuleed, waxaan mahad ballaadhan uu jeedinayaa mudane Ismaaciil Cumar Gueelleh oo si hawshani ay u hirgasho aan af iyo addin midna kala hadhin. Amiin Maxamed Roobleh oo si hagar la'aan ah iigu dhiirriyey, gacan weynna, qaban qaabadii ku lahaa.

Sarreeye Guuto Sakariye Sheekh Ibraahim oo ii sura galiyay, gacan hagar la'aaneedna igu siiyey in aan curiyo maansadan Samatalis, soona bandhigo. Gaashaanleh Sare Xuseen Xaaji Jaamac oo qaban qaabada in la qoro igu dhiirri geliyey, gacanna ku lahaa.

Maxamed Cabdullahi Riiraash oo xaal xaalkii iyo is hanba raacintii hawsha gacan ka geystay iyo Amiin Caamir oo sawirka sameeyey, iyagana mahad baan u celinayaa.

Mahad aan la soo koobi kareyn aan u celiyo kooxda Xarbi, raggooda iyo dumarkooba oo soo Samatalis.

Ugu dambayn, xoghayaha Guud ee War Faafinta, mudane Ismaaciil Xuseen Taani iyo Maareeyaha Madbacadda Qaranka, iyagana mahad baan u celinayaa.

Cali Diiriye (Cali Gaab)



## CALI GAAB, WAA KUMA? TAARIKH NOLOLEEDKII

Cali Diiriye Cigaal (Cali gaab) waa hal-abuure weyn oo Soomaali dhexdeeda kaga soo caan-baxay Erey shaxnimada habka falkinta Maansada iyo abwaan heesaa gabyaa geeraar iyo guux tiriya intaba isugu jira oo ay weliba u dheer tahay codaynta heesaha iyo laxan samayntu . Waa maanso yahaan aan dabuubta murti tixiddeeda abwaan barbar-dhiganayaa Djabouti uuna jirin isla mar ahaanna, marka laga eego xagga tirada maansooyinka magaciisa ku isman ka mid ah abwaannada Soomaaliyeed kuwa ugu horreeya marka guud ahaantood laysku qaado.

Wuxuu ku barbaaray magaalada Djabouti oo yaraan lagu keenay malcaamaddii ugu horreyseyna uu ka galay dugsi ku yaalley xaafadda Gaad, kuna sugnaa ilaa 1957kii, markaasoo uu u wareegay Woqooyiga Soomaaliya oo markaa ahayd mustacmaraddii ingiriiska. Isla sannadkaasuu ku biiray ciidammadii loo yaqaanney Somaliland Scouts oo uu iska qoray Saylac. Tababbar millitarinimo oo 6 bilood Gorayo-Cawl buu ku qaatay kaddibna lagu wareejiyey ciidammadii ilaaladaha gobolkii loo yaqaanney "Reserved Area" ee wareegi jirey inta ka dhaxaysa Awaare iyo Harawo ilaa 6 bilood markii ay ka hadhsanayd calan-sarkii gobannimadii badhtamihii 1960kii. Muddadaasi bay is-barteen Abwaanka caanka ah Cali Sugulle, oo isla xilligaa jiidahaasi ka ahaa hawl-wadeen xannaanada xoolaha ee maamulkii Ingiriiska, halkaasna ay saaxiibtinnimo uga bilaabantay. Halkan bay ka bilaabantay nolosha fannaannimo ee Abwaanku.

Iyadoo guuxa hal-abuurka laydhiisu ruxayso eense weli aan doob dilaacsan isla mar ahaanna aanay hawadiisa ku beerrayn hindise iyo qorshe fannaannimo, buu ahaa awgeed, khasabka kaga ummulisay guuxii ku duugnaa duunka hoose ee Cali-Gaab, cagaarkii soo tuuray. Markii Ciidammadii uu ka tirsanaa laga soo hooyey Jiidahaas, oo dhaxdin loo dejiyey Magaalada Arabsiyo, wuxuu kula kulmay fannaanka Faysal Cumar Mushteg, oo maamule ka ahaa dugsiga Arabsiyo, oo isna ka ladaabiyey webiga fanka mawjaddiisu awelba sidatey.

1960kii gobanimadii Soomaaliya ka dib wuxuu ka mid noqday ciidammadii lagu wareejiyey ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed. 1962kii midayntii ciidammadii Woqooyiga iyo Koonfurta Soomaaliya guutooyinkii koonfurta loo qaaday buu ka mid noqday isagoo qorshihii ciidan ku galay guutadii komaandawska oo tababar 2 sano ku dhammaystey xaruuntii Hiil-weyne ee duleedka muqdisho. Markuu dhammaystey ka-dibna isla xeradii loogu reebay inuu macalin tababare ah ka ahaado.

Iyadoo aanay hal-abuurnimadiisu weli u gudbin heer ay dibadda ugu soo baxdo, uuse socod-baradkeedu tallaabada xejiyey ayaa oo qiimaynteedu gaadhay inuu Cali-Gaab kaga qayb galo tartanka fanka Soomaaliyeed ee marxaladda, aqoonsigeedina u soo jiido inuu ka mid noqdo Bahda hal-abuurka Soomaaliyeed. 1964kii wuxuu ka mid noqday aasaaseyaashii kooxdii fannaaniinta Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo ay ku weheliyeen fannaaniinta ay ka midka Maxamed Cali Kaariye, Cisman Aadan Xuseen (Cismaan Askari), Maxamed Cabdillahi (Sangub), Miicaad Miiggane, Saynab Xaaji Cali (Baxsan) oo uu horjooqe ka noqday.

Hal-curinta Cali wuxuu muddo ku ekaa maansooyin iyo riwaayado ay wadaagi jireen isaga iyo fannaaniinta ay isku kooxda ahaayeen, kuna bixi jirey magaca kooxda Xoogga Dalka Soomaaliyeed, oo aanu u gudbin hal-abuure maanso isu-dhan gaarkiisa u curiya. Maansadii ugu horreysey ee uu curiyey sannadku markuu ahaa 1967 kii, waxay ahayd heesta magaceeda la yidhaa "AWR DABAR LA'AAN DHACAY" oo Idaacadaha laga baahiyey .

Ka-dib markii, ciidammada qalabka sida xukunkii Soomaaliya ay la wareegeen 1969kii, ee kooxdii Xoogga Dalkana lagu daray kooxihii rayadka ahaa oo isku noqday kooxdii Waabberi ee Wasaaradda Warfaafinta laga xukumi jirey Cali wuxuu noqday kan keliya ee taliskii guud ee ciidammadu kala hadheen iyagoo u arkayey in aanay ka maarmi karin shaqadiisa rajo ay ka qabeen lagama maarmaanimada jiritaan koox faneed ciidan awgeed. 1971kii baa Cali Gaab oggolaansho u helay inuu dhiso kooxdii fanka ee ciidammada oo ay ka soo dhalatay kooxdii fanka ee ciidammada oo ay ka soo dhalatay kooxdii HORSEED uu kana mid aha ilaa 1977kii, markii uu yiqiin saday isagoo derejadiisu tahay xiddigle. Rajadii mustaqbal ee ummadda awgeed hawshan uu ugu jirey adeeggeeda inaanay gafaynnin inay ku khaatumaysato cawaaqib xumo aan ka-soo-kabasho lahayn isla markiiba go'aansaday inuu shaqada ka fadhiisto dalkana dibadda uga baxo, sidii ay yeeleen tirooyin badan oo dhiggiisa ahi ha iskaga aragti ahaadaan ama ha ku kala aragti duwanaadaan arrimaha socdaye, isagoo u soo kicitimay dhinaca Jabbuuti.

Isla sannadkaasi wuxuu ku beegmay dhalashadii xorriyadda Djabouti oo ahayd magaaladii ugu horreeysey ee uu ku indho dillaacsaday, ku barbaaray eese ay duruufo awooddiisa ka weyni ku qasbeen inuu ka haajiro labataan sano ka hor oo aan habeenna boholyawgeedu dareenkiisa ka bixin. Isla markiiba baahidii dhismaha jamhuriyadda cusubi u qabtay xirfad yaqaanno waaya aragnimo u leh hawlaha waaxaha kala duduwan oo xilligaa taagnayd yagleeshoodu awgeed ayaa Cali Gaab fursad u siisay in uu ka mid noqdo ciidammadii ugu horreeyey ee jamhuuriyadda cusub.



# HOR-DHAC

## SAMATALIS

Adduunyadu sideedaba samaan uun bay wax ku leedahay  
SAMO LA WAA YAABA waa SAYMO OODAN.

Waxa ay Soomaalidu ku maahmaahdaa "Balaayo madax la  
qabtay leedahaye mijo la qabto ma laha"

Siyaasadda Dawladda Djabuuti baa aheyd in balaayadaa  
Soomaaliya ku dhacday inta ayna madaxa la kicin ee ayna  
muruxsan in wax laga qabto, maxaa yeelay dabka halkaa ka  
holcaa, Djabuutina, gaar ahaan buu u saameynayey.

Madaxweynaha Djabuuti, Mudane **AL Xaaj XASSAN  
GUULEED ABTIDOOON** in balaayada madaxeega la is  
taago oo la baajiyo buu aad ugu hawl galay. Taa marag cad  
waxa u ah dhexdhexaadintii uu ka galay colaaddii u  
dhaxeysay, Soomaliya iyo Itoobiya. Kii oo madaxdii markaa  
labada dal ka talinaysay, meel isugu keenay shirkii IGAD  
lagu aasaasay 1986, heshiisna halkaa lagu gadhay si labada  
dal ay nabad ugu wada noolaadaan.

Isla arrintaa nabadda, shirkii labaad ee **IGAD**, 1988 kii baa  
haddana madaxdii labada dal mar labaad Djabuuti ay ku  
kulmeen iyada oo . Madaxweyne **GUULEED** uu  
dhexdhexaadiye ka yahay, laguna dhaqaaqay in heshiiskaa  
hore la hirgaliyo, haddii la hirgaliyana wax badan baa la  
badbaadin lahaa.

Markii dagaalladii sokeeye ay sida xun uga qarxeen Waqooyiga, taana Madaxweynaha Djabuuti kama gaabsan. Xamar buu u kicitimay, bal haddii in uun waanwaan dhibaataada lagu dhammeyn karo. Waana la wada ogsoonaa in dhibaataadii Waqooyiga ka dhacday, ay qof kaste oo Reer Djabuuti ah si gaar ah u taabatay, maxaa yeelay dad badan oo Reer Djabuuti ah bay eheladoodii dhibaataadu gaadhay, halkanna ilaa maanta qaxooti ku ah.

Haddii qaraxaa hore ee Gobollada Waqooyi ka dhacay nabadi ka iman lahayd, Soomaaliya inteeda kalana waa laga baajin lahaa, qarannimadii Soomaliyeedna sida ay maanta ku danbeysay ma ahaateen.

Isku soo ururiyoo, markii balaayadu ay dhacday ee Soomaaliya sida daran u burburtay laba shir oo kale danbeeyey, oo illeyn, waa tii la yidhi "caano daatayba dabadood la qabaye" sannadkii 1991, oo Madaxweynuhu, AL XAAJI XASSAN GUULEED ABTIDOOON, uu guddomiye sharafeed ka ahaa, Djabuuti lagu qabtay. Heshiiskii halkaa lagu gaadhey haddii uu hirgaliyo, dhiilladii markii danbe, 1992, 1993 ka dhacday kama dhacdeen Gobollada Koonfureed oo ay boqollaal kun oo qof ku dhinteen, intii xabbaddu ka baydhayna gaajo iyo cudur ay u le'deen.

Haddaba, Samatalis, I & II oo sida ay u kala horreyaan qaab-riwaayadeed loogu soo bandhigay ka qeyb-galayaashaa labadaa shir ee dib-u-heshiisiinta ahaa ee Djabuuti lagu qabtay waxa ay si wanaagsan u muujinayaan dareenka reer Djabuuti dad iyo dawladba. Abwaanka weyn ee Cali Diiriye Cigaal(Cali Gaab) isaga oo dareenkaa ka dab qaadanaya buu arrinta dhan walba wax ka tusaaleeyey.

Waxayna noqotay riwaayaddaasi codkii ugu dheeraa ee muujinaya welwelka iyo walaaca dhiillada Soomaalida haysata ay ku beertay dadka Reer Djabuuti.

La garay, oo dal maamul wuu ka xumaadaa, haddii nabadgelyo wax lagaga qaban kerri waayo, waa ay suurowdaa in lagu kaco oo la iska rido. Waxase dhacda in halkii laga saaray la buuxiyo si noloshu halkeedii uga socoto, taasi oo ilaa maanta Soomaaliya ka suurageli weyday.

Soo aragnay in Samatalis I & II ku aaddanaayeen arrimihii dhiillada lahaa ee ka dhacay Soomaaliya. Waana la ogyahay in dhibtii weli in kaste oo uu dadaal badani jiro dawladda Djibouti iyo dawladaha IGADba ay xil weyn iska saareen in dhibtii ay taagan tahay.

Haddaba Samatalis III & IV iyaguna waa weji kale oo ka hadlaya dagaalladii ka qarxay gobollo ka mid ah Jamhuuriyadda Djibouti.

Dunida guud ahaan, Geeska Afrika gaar ahaan dhibta ka dhacdaa waa tu aan sinaba innoo seegeyn.

Dadaalkii weynaa ee dawladda Djibouti ay u gashay, in la sameeyo IGAD, iyo in ay nabadi ka dhacdo dalka Soomaaliya, baa ku salaysnaa fikradda ah, nabadda Geeska Afrika waa nabadda Djabuuti. Nasiib darro se, dagaaladii inta badan ka oognaa Geeska Afrika, markii labadii dawladood ee Soomaliya iyo Itoobiya ay burbureen, hub farabadan baa dad badan gacantooda ku dhacay.

Markaa, ururka FRUD oo dacwaddiisa u weyni ay aheyd sidii loo heli lahaa fufurnaansiyasadeed iyo dimuqradiyad,

baa dagaal hubeysan la galay dawladda Djibouti. Ciidamada Qaranka iyo Booliiskuna waa ay ka hortageen colkaas.

Isla makaana furfurtaantii siyaasadeed baa lagu dheqaaqay, lana hirgeliyey.

In kasta oo dalkii oo dhan faraha dawladda ay ku soo celiyeen Ciidamada qalabka sidaa, haddana lagama maarmaan bay aheyd in heshiis qaran yimaaddo.

Wada hadalladii Abca ka bilaabmay baa ku keenay heshiikii nabadeed ee ay ku kala saxeedeen, dawladda Djibouti iyo ururka FRUD 26kii bishii labiyo tobnaad, 1994 magaalada Djabouti.

Nabadaasi oo ku saleysneyd hab-dhaqankii nabad ku wada noolaashaha walaalaha Reer Djibouti taasoo aheyd tiirkii lagu aasaasay Jamhuuriyadda Djibouti, 1977kii.

Haddaba Samatalis III & IV, waxa uu si wanaagsan u cabbisayaa dareenka dadka iyo dawladda Djibouti ee ka saabsanaa sii nabad iyo walaalnimo waarta loo helo, wayna hirgashay.

Qaybta lixaad ee qoraalkani waa heesihii iyo maansooyinkii caan baxay abweenka Cali Gaabna ku soo caanbaxay uu tiriyeyna milayo kala duwan meela kala duwanna uu ka tiriyey ideylkooduna waa wada Samatalis la halmaala Afarta Samatalis, iyo qeybta koobaad ee IGAD ka oo intuba nabad ku saleysan.

# ARAR

## IGAD

---

Innagoo guud ahaanba maansooyinka ku urursan diiwaankan aanu hor-dhaca guud, buugga xaggiisa hore kaga soo sheekaynnay duruufihii ay ka soo hoos dhasheen, waxa haddana lagama maarmaan noqotay, inaan qayb walba is ahaanteed Arar kooban u samaynno, si akhristuhu fursad ugu helo fahamkeeda..

## QAYBTA 1aad IGAD

Silsilad maanseedka aan ugu magac daray SAMATALIS ee diiwaankan ku urursan, waxay tii ugu horreysey ahayd riwaayadda KOOXDA XARBI, ee ciidanka qaranku ay ku soo bandhigeen, shirkii ugu horreeyey ee hay'adda IGADD\* ee ka dhacay magaalo madaxda Jabbuuti, oo noqday fursaddii gogol-xaadhka u noqotay heshiiskii dhexmaray madaxweyneyaashii labada dal ee deriskeenna, Soomaaliya iyo Itoobiya, Maxamed Siyaad Barre iyo Mengistu Xayle Maryam, laguna soo af-jarayey colaaddii u dhaxaysey.

Maansooyinka riwaayaddaasi waxay guud ahaan cabbirayaan dhibaatooyinkii dhaqan iyo dhaqaaleed ee Afriki ka dhaxashay gumeysigii oo ku keenay miisaan culayskiisa aan la dhaqaaqi karin iyo jaho-wareer dhabbo gurracan inay gobannimadii u raadqaaddo keenay. Khilaafka markan isu

rogay dagaalka hubaysanna uu salka ku hayo arrintaas. Isla mar ahaanna yahay aqoon-yari iyo wacyi gaabnida ay ku sugan yihiin tan ku haysa dabarka xakamaynaya horusocodkeedii, halistoodana ka digayso maansada riwaayaddani. Sidaa Awgeedna si taasi ay uga gudbaan in waddada qudhee u furani tahay, maansadan baaqeedu yahay, fahamka waxay dantu ku jir to oo ah inay garwaaqsadaan mid ahaanshaha isku-xidhnaanta kalama maarmaanka ah ee nolosha.

Tilmaanta in rajada nololeed ee mustaqbal furaheedu yahay xasillooni iyo wada noolaansho nabadeed, iskaashi iyo wax is-dhaafsiga waddammada gobol kastaana yahay sallaanka ay u marayaan bah-weyntooda aadame ee dunida inteeda kale ku dhaqan.

Si halkaa loo gaadhaana inaanay suurtoagal ahayn ilaa nabad salka ka negi oo dhab ihi gunta kasoo unkanto, oo dadaalka, Jamhuuriyadda Jabuuti yahay mid mabaadi'daa asaasiga ah ka dhaqaaqaysa, buu faallada maansada riwaayaddan sawirkaan kaga bixinayey ee cabbiraya dareenkayga fikriga ah u ahaa.

# QAYBTA KOWBAAD

# IGAD

# *HOOYA NAGA GUDDOOMA*

Gacal baa xishood Geed loo  
hadheeyaa

*Gacal = xidid  
xishood = xurmo.*

Geesibaa ammaan Gole laga  
tilmaamaa

*Gole = madal*

Waxaan uga gol-leeyahay,  
Garaadkaygu leeyahay

*Gol-leeyahay = Uga-jeedaa*

Marka hore salaan guudoo  
Gobannimo la maamuusoo  
Garashiyo aqoon mudan  
Guddigiinna sharafta-li  
Gacan-qaad walaalnimo

*Maamuus = xushmo*

*Gacan qaad = Salaan gacanta  
la isa saaro*

Hooya naga guddooma  
Ubax guniyo baar baxay  
Hooya naga guddooma  
Farxad aan gaboobayn  
Hooya naga guddooma  
Waxaan Guulle mooyee  
Bili aadmi garanayn  
Hooya naga guddooma  
Hooya naga guddooma

*Guulle = Eebbe, Ilaahay*

Mar labaad geddaan waday  
Guubaabadaydii  
Ma gudbine anoo wada  
Hilbo kala go'aynnoo  
Isu-gocasho reemoo

*Geddaan = sidaan, habkaan*

*Guubaabo = baaq, boorrin*

*Gocasho = hibasho, xusuus  
hore*

Geed iyo caleentii

Gesha laabta inan nahay  
Gebagebadu immikana  
Waa waraysi gacalnimo  
Gayigii ma nabad qabey  
Goobtaad timaaddeen  
Gogol saxar lahayniyo  
Gurigiinni weeyaan.

*Laabta = Niyadda*  
*Gebagebo = dhammaad ugu*  
*dambaynta*  
*Gacalnimo = walaalnimo*  
*Gayigii = waddankii, dalkii*



TIX  
*WEERAR*

Lixdankii shar-la-luudee  
Shiishka aad u taqaannaayee

*Shiishkan = dhugtan  
liishaanka  
shakaalo = jeediyo,  
jiheeyo*

Halka aan ku shakaalo

Shaagba uu rogmanayn iyo  
ligu yeedh shanba cayn

*Shanba-cayn = laba  
wejiile, jirjirroole*

Bahdii Reer Wankalaadee  
Warrisaysey adduunka ee

*Warrisaysey =  
Dhaxlaysey*

Hadba qaarad wanaagsanoo  
Weelka caano ku maali

Walba-haar gelinaysayee  
Weerar ay ku dhergaaniyo

*Walbahaar = caloolyow*

Wanan aanay lahaynooy

*Wanan(wan) = idaha  
lab*

Waaxyahooda cunaan

Waalidku ugu dardaarmee

Walanteerka ahaydeey

*Walanteer(latin) = is-  
dire*

Waayeel baan ahay raagoo

Anigaa war-galeenee

Waanadayda dhegeysta

Waayaduu Afrikaanku

Adhi weylo la moodiyo

*Adhi = ido iyo riyo  
Weylo = maqasha lo'da*

Weynoow geela lahaayuu

Wadanaayey dameerkaan

Anoo wiil ka yar-weyn

Ragna hoos uga waabsan

*Waabsan = ka yar*

Telefoonka walaada  
Ku waraystay afkeeda  
Afrikaan weli toosin oo

*walaada = dhawaaqa*

*Toosin = hurdada ka  
baraarugin*

Weylihii iyo lo'dii iyo  
Walwaalaysa gadhoodhe

*Walwaalaysa = wax  
culus xambaarsan  
Gadhoodh = caanaha  
dhanaan inta aan  
subagga laga bixinnin*

Orod weelka biyeyso oo  
La wadaag nimcadaasaa  
Warkii laygu dhammeeyey  
Markii aan ku dhex waasheen  
Wax i raaca ka waayey  
Anna waan ka wareegoo  
Illamaa waqtigaaba  
Waxbarashaan ku jiraayaye  
Inaan meel wacan gaadhayna  
Waa markhaati ma waydo  
Hadduu Weyne idin keenay  
Maantay wii-du is-gaadhiyoo  
Afrikaan waran weynuu  
Wiishkii maanta dul-yaalle  
Weelal shaah laga buuxshiyo  
Sonkortii aan walwaalloo  
Marka aan u wadneey  
Wada leefto macaankay  
Sidii Waarsiyo\* Naato\*  
Illeyn wayraxayaanoo  
Waddankaa nala siinnoo  
Macdantooda wanaagsan baan

*la wadaag = la qaybso*

*Markhaati = marag*

*Weyne = Ilaahay*

Ka soo waaridi boorka oo  
Innagaa weli khaasiyo  
Wargeyskooda ahaanne  
Intaan waagu dillaacin  
Weerarkeen ha ahaado

*I*

Qabayaalad baan ahay nool  
Qaaraddaa Afrikaanka  
Inta aan kala qaadoo  
Qoqobeyaal u sameeyaan  
Dhammaantood kala qaybin

*Qoqobe = deyrka laba qol  
kala xidha, xad*

*II*

Gaajaa ani lay yidhaa  
Gayiga Afrikaan socdaal  
Ku gaadh an is-leeyahoo  
Waxaan ballanqaad ku galay  
Kaan gaadhaa inu gotaa

*Socdaal = sahan, dhoof*

*Gotaa (godan) = golon-  
golaa*

*III*

Waxa lay yidhaa Cudur  
Waxaan ahay cadawga dila  
Ninkii qaba Caafimaad  
Calooshaan ka soo ridaa

*Cudur = xanuun, jirro*

#### *IV*

Garaadka wax seexiyiyo  
Dareenka wax guuriyiyo

Waxan ahay la-garan-waa  
Giddigeed quruun idil  
Ka naafeeya garashoo

Geesinimada dhaawaca

*Seexiyaa = dham'iya*  
*Guuriya = suuriya,*  
*kexeeya*

*Qurruun = ummado*  
*Naafeeya = Wiiqa,*  
*tamarta ka qaada*  
*Dhaawaca = qooma, wax*  
*yeela*

#### *V*

Hedda waalidku tuuriyo  
Waxan ahay habaar  
Hanadkii kiciyo  
Hablihii dhashaba  
Ka halleeya ee

Haadaan ka rida  
Intaad haliso aragtaan  
Hoodaha u waaweyn  
Boqollaal ku hoos jira  
Hiddahood la garanayn  
Ayay ugu horreeyaan

*Hanad = halyey, warac*

*Halleeya = lumiya,*  
*xumeeya*

*Haadaan = jar, gabi*

*Hidde = isir, tafiir*

TIX  
*ADDUUN WAA DHAXDIN*

Adduunku waa dhaxdinoo  
Dharaaraa la joogayaa  
Dadkuna wuu dhimanayaa  
Dharaartii loo qorona  
Naflaha lama dhaafiye  
Sidaa saw uma dhadhamin  
Taa dhaafoo waan dhigee  
Mid kaloo aniga igu dheer  
Wixii, dhoofkani i wada.

*Dhaxdin = ku meel-gaadh*

Dhigaalkiisuna ahaa

*Dhoofkan = safarkan,  
socdaalkan  
Dhigaalkiisu = qorshe,  
ku talo-galkiisu*

Dhegeysoo iga guddoon  
Waxaan nahay dawlad dhaba  
Dhul hodanaan leenahoo  
Barwaaqadu dhabar-jab tahay  
Dhegtaa maqalka u war-dheere  
Adduunkaan dhegeysannaa  
Dhibaato halkay jirtaba  
Dhaqaasan uga daafacnaa

*Hodan = barwaaqo ah*

Midhaha laga dhuunyadiyo  
Cilmiga laysku dhaafsanyaan  
Dhammaan soo waaridnaa  
Ninkii dhacayaan kabnaa  
Warkiinnoo nagu dhammaa  
Ayaan isku soo dhibnoo  
Dhaqaale habaysan iyo

*Daafac = Caabbi,  
badbaadi*

*Habaysan = nidaamsan,*

Dhar iyo cunto waan sidnaa  
Dhakhtariyii cudurradiyo  
Dhul-beerena waan wadaa  
Haddaad dhiig leedihiin  
Annaga na dhoweysataan  
Dhaqaalaha waa la badin  
Tacliintana waa la dhigi  
Dhulkiinna saboolka ahna  
Dheef uu dadku quuto iyo

*la dhigi = la bari*  
*Sabool = caydh, faqiir*  
*Dheef = cunto, gasab,*  
*gasiin*  
*quuto = cuno, dheefsado*

Dhir iyo midho waan ka bixin  
Dhaqsana ubadkaan u korin

*Ubadka = dhallaanka,*  
*carruurta*

I dhiga meel aan dhistoo  
Lacag aan weligeed dhammaan  
Waxay idinka dhiman qabsada  
Dhuunigan waan idiin sidaa

*Qabsada = sheegta*  
*Dhuuni = cunto, dheef,*  
*raashin*

Bal hooyoo wada dhadhami

Dhaayuhu meeshii sokiyo

*Dhaayaha = indhaha,*  
*carceeraha*

Wixii dhow bay arkaan  
Dhawaaqiyo meesha dheer  
Dhegtiyo maqalkaa dhoweyn  
Abuurkii dhalashadeenna  
Cammuud iyo dhoobo iyo  
Inaa dhulka laga alkumay  
Dhashii Nebi Aadan iyo  
Dhallaankii Xaawa nahay  
Dhammaantiin baa ogsoon

*Cammuud = ciidda*  
*Alkumay = abuuray*

Haddaan dhoof kala jirnoon  
Adduunka ku kala dhaqnayn  
Dhambaal noo kala socdiyo  
Aqoon lays dhaafsadaa  
Dhexdeenna inay timaad  
Dhabtii waa lama huraan  
Dharaartii barashadiyo  
Dhabbaha waydiin furree,

*Dhabbaha = waddada,  
dawga = jidka*

Halbaansé u dhaafayaa  
Waxaad dhayal moodda baa

*dhayal = cayaayir,  
dheeldheel*

Hadhaw dhaka-faar noqdee

*Dhaka-faar = madax  
wareer*

Belaayo intaanay dhicin  
Afeef baa laga dhigtaa

*Afeef = dardaaran, ka  
hor-deg*

Dhismaha diintayda iyo  
Inaad dhidibkiyo sharciga

*Dhidibka = udub, seeska*

Dhibaato hadhaw u geysan  
Markhaatiga loo dhan yahay  
Diinwaankaad iigu dhigi  
Inaad dhaqankiyo hiddaha  
Wixii dhaxalkaygu yahay  
Dhibaato hadhaw u geysan  
Markhaatiga loo dhan yahay  
Diiwaankaad iigu dhigi  
"Dhulkayga markaan u baahdo  
Inuu calan dhaba heliyo  
Xornimo lagu dhaadan karo  
Dhibaato inay ka iman

*Hadhaw = marka damb*

*Diiwaanka = xusuusqorka*

*Dhaxal = duug-reeb*

*baahdo = doono*

*dhaadan = faano*

Markhaatiga loo dhan yahay  
Diiwaankaad iigu dhigi  
"Inaad dhoof iigu timid  
Dhulkana anu sii lahaa  
Markhaatiga loo dhan yahay  
Diiwaankaad iigu dhigi

Afrikaay ha hadlin  
Horay idiinku ekeyde  
Halkiinnaa ku ekaada  
Anna waan idin hayaa  
Ha waraysan horuumar  
Waanad heeran tihiin

*Ekeyd = habboonayd*

*Ekaada = jooga, ha  
dhaafina*

*Idin hayaa = idin soo  
gaadhi*

*Heeran = dhaawacan*



(Hees)

## *AFRIKAY LAGAA DHEREG*

Afrikaay lagaa dhereg

Dhaxalkaagi lala guur

Dhoomaha gumeysiga

Maxaa dhabarka kuu sudhay

Dhirta iyo adoo

Dhagaxaa ka tiro badan

Adduunyada dhammaanteed

Kumanyaal adoo dheer

Dhererkiyo lixaadkiyo

Dhumucdani ad leedahay

Wax ku dhaansan mayside

Ma dheegaa lagaa raran

Xornimada ad dhalisaan

Wax ku dheefsan meyside

Waxa dheriga kuu karin

Dhidar kugu lammaanoo

Isku kaa dhejinayoo

Dadka kaad u dhowdahay

Inaad dhuunta goysiyo

Kugu dhidhin walaalkaa

Dheg-xumada sokeeyaha

Kama dhiidhiyeyside

Dhoobada waxaa gubay

*lala guur = lala teg,  
la qaadey*

*Dhoomaha = Haamaha*

*Dhiilaha waaweyn*

*Adoo dheer = adiga oo  
ka badan tiro*

*Lixaad = xoog, taman*

*Dhumuc = qaro, awood*

*Dheegaa = dhinaca*

*Dheefsan = taran-san*

*Dhidar = caal-madoobe,  
halab-caws, bahal,  
waraabe*

*Dhuunta = hunguriga*

*Kugu dhidhin = kugu  
diri*

*sokeeyaha = walaal*

*Dhiidhi = ficil dirir*

Dheecaanki gaadhoo  
Dhulku wuxu ka ooyaa  
Dhiiggii ku daatee  
Afrikada dhammaateed  
Dhirbaaxada gumeysigu  
Sumadduu ku dhigay baa  
Dhalan-dhoolka geeddiga

Lagu kala dhaqaaqoo  
Dharaar noolba qayliyo  
Dhiillaa ka joogtoo

Afrikiyo dhiggeeduba  
Isma dhaanto weeyaan  
Dabaylaha is-dhaafiyo  
Dhab-darraanta lagu jiro

Sida dhuuggu geela  
Dhiig uga kexeeyee

Mabda'iinnu dhigayaa  
Isku soo dhowaanshiyo  
Inaad guusha dhalisaan

Geesiyada u dhaartoow  
Danta idinka dhaxaysiyo  
Shirka maanta dhacayaa  
Dhalliil midan lahayn iyo

Ha ahaado dhabar-jira

Wixii dhacay, wuxu dhigay  
Dhibaataada gumeysigu

*Sumad = calaamad*

*dhalan-dhoolka =  
dalanbaabi*

*Kala dhaqaaq = kala tag*

*dhiillo = qaylo-dhaan  
dhibaato leh*

*Dhab-darraan = talo-  
murug*

*Dhiig uga kexeeyee = u  
dhiig tiro*

*Dhigayaa = qorayaa*

*Guusha- (guul) Dhalisaan  
= libinta gaadhaan*

*Dhacaya = socda*

*Dhalliil = canaan  
tilmaan sheeg ah*

*Dhabar-jira = wax loo  
aayo*

Kaga tegey dhexdeenna  
Intood dhagaxa saartaan

Dhabbo toosan jeexoo  
Dhallinyarada maantiyo  
uwa dhalani dooniyo  
Afrikada dhammaanteed  
Dhaxal ay u aayaan  
Dhankiinnay ka sugayaan  
Ina aan dhammaanniyo  
Inaad guusha dhalisaan  
Waxba kama dhexeeyaan

*Dhagaxa saar = dabool,  
aas, illaw  
Jeex = qaad, mar, fur*

*Aayaan = waxtar u noqda  
Dhankiinna = xaggiinna*

TIX  
*GUUBAABO ABWAAN*

I

Abwaan goor iyo ayaan

*Abwaan = Erey shaxan,  
hal-abuure, maanso yahan*

Taluu goobaabiyaa

Siyaasad ma guda galee

Sidaa iyo garashadaa

Gumeysi muxuu ku seexday?

Gumeysi wuxuu ku seexday

Nabaddaan geed saarayaa

*Geed-saar = cirka ku laal*

Adduunkana waan gilgili

Afriikana gaar ahaan

Iyada waan soo geddiyi

*Geddi = qallib, gembi*

Gabaahiiir oomman iyo

*Gabaahiiir = cidla*

*ciirsila*

Gelgelin boodhlaan ka dhigi

*Oomman = meel aan biyo*

*lahayn*

Col iyo guluf baan ku furi

Dhexdoodaan godob ka ridi

*Godob = naxli, cadaawad,  
nactooyo*

Dabeed gumuc iyo rasaas

*Gumuc = sulubka rasaasta*

*Afkeeda hore*

Gantaal layskala hortago

*Gantaal = Leeb, gamuun*

Sawaariikhdaan ka gadi

Markuu gawracu ku fido

Gondaha lays wada qabsado

*Gondaha = cagaha,*

*boqnaha laga socdo*

Dagaal foodda is-geshaan

Goob doogliyo gole dugsoon

Inay geeddiga u rarin

Innana guudka an ka joogo

Ragbaa taladaa gorfeeyey

*Gorfeeyey = gorgortan*

Haddaan taariikhda guud  
Gadaal ugu soo noqdana  
Gumaadka halbawlihiyo

Gujadu meeshay ka timid  
Shirkii "Baarliin" la galay  
Gayigan lagu qaybtamee

Guddoonkii lagu dhigtiyo

Warkii lagu gaadhay iyo  
Go'aankii baa ahaa :  
Ayey danahooda garan  
Gadh-qaadhkiyo heeryadiyo

Ayay gibisha iska rogin  
Hadday weligeed guddido  
Gartaba yaan lagu heshiin

Muxuu geesigu ku toosay "  
Garaadkeennoon adkaan  
Gumeysiga noo tashaday  
Go'aankiisii ahaa  
Sidii ad u garan lahayd  
Markay guuli uga timid  
Gedduu rabay noo qabsaday  
Halyeeyada godob la'aan

Markuu gawraca dul-dhigay

*Gadaal = dib*

*Gumaad = xasuuq*

*Hal-bawle = halka ugu  
mudan*

*Gayigan = dhulkan,*

*Qayb-tan = saanyad*

*Dhigtay = Lagu heshiiyey  
gaadhey*

*Gadh-qaad = hoggaamin,*

*Heeryo = rarka*

*Gibisha = hagoogta*

*Guddido = shirto*

## *II.*

*Gedduu = siduu, habkuu*

*Halyey. = geesi, hor-  
mood*

*Godob la'aan = cabsi  
la'aan*

Ee uu gorgorkiyo tukaha

*Gorgor, tuke = noocyo  
haadda ka mid ah*

Intuu gegida ugu wadhay  
Gadoobba mar qaado yidhi  
Agoontii golon-goshiyo

*Agoon = ubadkaan  
aabbaha lahayn*

Galaa-yuuskaa haweenka  
Ayuu geesigu ku toosay  
Gefkii buu qaadan waayey  
Guntiga maradu adkaystay

*Gef = qalad  
Adkaystay = xejistay,  
giijistay  
Dhab-siiyay = gacanta  
ku qabsaday, qaatay*

Aqoontiisiyo garaadka  
Ilaahay gaar u siiyey  
Inuu geerida horteed  
Afriikada uga gurmado  
Ayuu geesigu ku dhaartay  
Ma gaabinne wuu dhaqaaqay  
Afriikada kala go'doontay  
Gumeysigu kala halleeyey  
Mid iyo gees lagu xayiray  
Inuu isku geeyo uu  
Midnimo ku gardaadiyana  
Go'aankiisaa ahaa  
Ma gaabinnee wuu ku dhaartay  
Afriikadan lagu galgalan  
Inuu geesigu xoreeyo  
Ilaahay baa gargaaray  
Gumeysiga weerarkiisa  
Gaashaan adag buu hordhigay

Walaalii laysku gubey  
Dhammaantoodba igu gee  
Gantaalii buu ka guray  
Wixii godob kala dhex-taalley  
Gar iyo xeer buu ku naqay  
Guddoomoo lagu heshii  
Inay is-gargaarsadaan  
Go'aankaygiyo warkii  
Anoo soo goynayoo  
Murtida soo gororinaaya  
Waxay tahay gogol-dhiggii  
Xaqii goostee la waayey  
IGADD iyo guurtidii  
Gardaadshee soo heloow  
Gabaahiirtiyo abaarta  
Sidii looga guuri-laa  
Hayaankiyo geeddiguna  
U degi-laa goob barwaaqo  
Go'aankoodaa ahaa

Hees

## *MAXAAD U HABRANAYSAA*

Namiibiya halaaggiyo  
Holoc baa ka taagane  
Sawd afriika waa halis  
Haddaan dhiigga loo hurin  
Hiyigooda waxa galay  
Xornimada hadhkeedii  
Waa kuwaa halgamayee  
Hilbahooda nacabbaa  
Ku haleela-quutee  
Huulaha dul-joogaa  
Hambo kama tegaayee  
Haddii aan halyeeyiyo  
Heegan gobannimaw kicin

Afrikaay dagaal holli  
Maxaa kuu hadhood  
U habranaysaa

Hayaay, Afrikaay hayaay  
Hubka qaata maantoo  
Ka hareer u leexdana  
Hoos wax ugu sheegoo  
Hadal lagu dagiigiyo  
Afna hiillimaad ma leh  
Hayaay, Afrikaay, hayaay



(Hees)

## *BI'I WAA AFRIKAY*

Bi'i-waa Afrikaay  
Kama baydho halistee  
Booraan loo qodaayoo  
Buste loo dul-saaray  
Badhtanka u fadhiisteen  
Bawdyaha ka wada jabe  
Bi'i-waa Afriikaay  
Badhaadhaha dhulkeediyo  
Khayraadka buuxsamay  
Ka-il-dedan barwaaqada  
Baahi iyo sabool bay  
Buuraha la jiiftaa  
Bi'i-waa Afriikaay  
Boogaha qabiilkiyo  
Biilida walaalaha  
Isku baashanaayiyo  
Dhiigaysku wada baxay  
Goormaa la baajini  
Bi'i-waa Afriikaay  
Baylahdaada kii raba  
Xume-buufiyaashiyo  
Bunduqa isu siiyaha  
Goormaa la beenayn  
Bilicdiyo aqoontana  
Hadmaa loo baraarugi  
Afrikaay lagaa badi

(Hees)

# AFRIKAY GOBBAAD TAHAY

Adduunyadan galgaladkee,  
kala go'dee

Xaqa laga gudbaayee

Gardarradu af-dheer tahay

Nabaddu geed saaran tahay  
Gumeysigu ka taliyee,  
kala go'dee

Gaadmadiyo xeeshiyo

Gujada iyo tuuryada

Laysla goobayaa

Inta gacan-ku-dhiigluhu

Dadka kala gadaayana

Guul lama sugaayee

Gebagebada "Beyruut"

Goob lagu dagaaliyo

Sawta noqotay gole-baas

Gardarrooyin "Falastiin"

Sawtan lagu gubaayee

Lagu goynayee maa...

Sawtan Carabtii gama'dee

Lagu guud ciyaareen

Lays garwaaqsanayn maa

Dibiga labadiisa gees

Dadbaa gudin ula tegaayee

Hadallada god-dhaafka ah

*Galgaladka = rafaadka*

*Gudbaayo =laga  
tallaabsanayo*

*Af-dheer tahay =  
horrays*

*gaadmada = dagidda*

*Gujada = hoos ka feedh*

*Goobayo = raadinayo*

*Gacan ku dhiigle =  
dhagar qabe*

*Gadaayo =kala iibinayo*

*Gebagebada = guluf  
weerar*

*Gardarro = daandaansi*

*Gama' = hurdo dheer*

*God-dhaafka =kiil bood*

Geeraarrada is-daba yaal  
Godol-reenka heesaha  
Gobo'dii hor-socotaa  
Ninka garanayoow maqal  
Kaan garannimoow arag...!  
Waqtiga labada garab saarani  
Inta u gilgilashada  
Hadba gebi-dhacaayee  
Afrikada gurracanee  
La goofaadhiyaayee  
Maskaxdeed la gororsaday  
Nafta gadawga saarane  
Kolley guumin mayside  
Guuguulaa sidiisii  
Gawraca ku nooloow  
Dayaxaa la guud tegey  
Samadaa lagu gooli-baadhaa  
Afrikaay gobbaad tahay  
Waana lagu gumeystaa  
Faca meeshu gaadhana  
Adigu waad ka gudantee  
Guuguulaa sidiisii  
Gawraca ku nooloow

*is-daba-yaal =  
xidhiidhsan  
Reen = dunuunuc*

(Hees)

"\*GEESIGA CARTAMAYAA"

Caloolxumida raagtiyo

Cudurkii Afriikada

Cawo-seejiyee dilay

*Cawo seejiyey = qayrkeed  
ka reebay*

Geesiga cartamayaa

Maskaxdiisa culus iyo

Cilmi kaga daweeyee

Ciiradii dhexaalliyo

Coorigii bakhtiiyee

Ciir-ciirki noloshiyo

Cudurkiyo abaarti

Afrikada cuskadayee

Coobbaha u saarnaa

Geesiga cartamayaa

Halka ay ka curatiyo

Cadawga isku dirayee

Caydhiyo fakhriga baday

Cashar adag ka siiyoo

Cuurkii is-dili jirey

*Ciir = siigo, madmadow  
Cooriga = colaaddii  
Ciir-ciir = daalaa-dhac*

*Cuskaday = haleelay  
Coobbada = tunga, degta*

*Caydha = saboolnimo  
Cashar = dersii, tilmaan  
Cuurkii = dadkii wada  
dhashay*

Inay maanta caanaha

Cadho li'i wadaagaan

Ciiddaa ka maragee

Cidkastiba ha baantee

Ciil-tire waxaad tahay

Cadce'iddii Jabbuutiyo

Curad aan u aynoo

Ummaddaad culayskiyo

*Wadaag = qaybtan, guul  
Marag = markhaati  
Baantee = gar-hadashee  
Ciil-tire = aar-gude*

*u Aynay = mahadinnay*

Cidhiidhiga ka saartiyo

Carradaadii baa ku leh

Caynaanshihiyoow

Cawadaan ku waarniyo

Calankaad u sababtoo

Cosob iyo tigaad buu

Cuudku noogu soofee

*Cidhiidhi = kiil, diiqad*

*Cawada = nasiibka,  
ayaanka*

*Cosob = daaqa cusub,  
Tigaad = doog, daaq  
Cuudka = xoolaha nool  
Soofee = foofee, daaq  
tagee*

Caynaashihiiyoow

Ifka caafimaad iyo

Cimri dherer ku nooloo

Aakhirana ciil-tire

Jannadii cuddoonayd

Kuwa lagu casuumee

Cadaab aan arkaynnee

Camalkooda mahadshee

Caaddilkeen ha kaa dhigo

Geesiga cartamayaa

Cadawgiisu badan yahay

Cawo iyo nasiibba leh

Waxay caadadii tahay

Ragannimo caddanoo

Cabsi aan lahayn iyo

Ciiddii dhulkiisiyo

Calanka u shaqeeyaa

Intuu curadku nool yahay

Cimrigiisu taliyaa,

Maxaa ciil ku gudhay nacab

Cadadkii dadweynuhu

*Cuddoonayd = wanaagsanayd*

*Casuumee = marti-qaadee*

*Mahadshay = u aayey  
Caaddilkeen = Ilaaheen*

*Cawo = hoodo*

*Cabsi = baqdin*

*Curadka = duqa, mudanaha*

*Gudhay = baaba'ay  
Cadadkii = dhammaantii*

Ilaaheenna caaddila	
Waxay ka codsanaayaan	
Carrabkoodu leeyahay	
Curadkii midnimadoow	
Cisi iyo wanaag iyo	<i>Cisi = karaamo</i>
Cimri dherer ku nooloow	
Inta ay cir-jiidhiyo	<i>Cir-jiidh = xiddigaha</i>
Xiddiggii cilaan yahay	<i>Cilaan = naafo</i>
Inta uu carruurtiyo	
Caammo yahay dadkeennii	<i>Caammo = wax ma garato, indhoole</i>
Cilmigoodu liitaa	<i>Liita = yar yahay, koobar</i>
Inta ay cumaaddigu	<i>Cumaaddi (coomaadde) = haad, horor</i>
Na cawaansanaayaan	<i>Cawaansanaya = tun-jilicsanayaan, na addoonsanayaan</i>
Afrikaanka cunayaan	
Inta cudurku nagu jireen	
La carraabin gaajada	<i>Carraabin = laga adkaan</i>
Geesiga cartamayaa	
Caynaanka yuu furi	<i>Caynaanka = hoggaanka</i>
Cutubyada is-weeraray	<i>Cutubyada = guutooyinka</i>
Cidhib-gooyihii dhacay	<i>Cidhib-gooye = dabar-gooye, gumaade</i>
Ciil joogti qaylada	
Ku calaacalaysiyo	
Nabaad-guurkii ciiddiyo	<i>nabaad-guur = abaaroobid</i>
Colaaddii la kala baxay	
Calool-xumadi raagtee	<i>Calool-xumo = uur-ku-taallo</i>

Cudhka layska gawracay

*Cudhka = surka, qoorta,  
hunguriga*

Waxa kuu caddayn kara

Geesiga cartamayaa

Afrikadi colka ahayd

Nabadduu ka curiyee

*Curiyey = dhaliyey, unkay*

Cirkoo aad u da'ay oo

inta cuudku wada dhalo

Laga maalin caanaha

Markaan curuqyadeenniyo

*Curuqyada = waaxyaha*

Cududdeenna maallee

*Cududda = awoodda, xoogga*

Ciiddeenna qodannee

Canba uu ka soo baxo

Ceeryoomo dahabkeen

Dhammaan caafimaadnee

Nabad lagu caweeyana

Geesiga cartamayaa

Caynaanka furayaa.

QAYBTA LABAAD

SAMATALIS I

Inta aynaan u gonda-degin murtida arartan, waxaan jecelahay inaan iftiimiyo in yar kooban sabta keentay inay qaybaha 1 aad iyo 2 aad isku hor-dhac qudha yeeshaan, oo midiba gaarkeed aan ugu samayn waayey arar goonni ah. Ma aha in loo qaato sababta inay ka dambayso labada oo isku mawduuc qudha ka hadkaaya keliya ee waxay ahaayeen furitaankii iyo xidhitaankii shirkii dibu heshiisiinta Soomaaliyeedee Jabbuuti lagu martiqaaday, June 5 dii ilaa 11 di 1991 kii.

Inay soomaaliya u kala daadato, kaddib ridistii taliskii Maxamed Siyaad Barre ka madaxda ahaa, qurub-qurub wada col ah oo dagaallo iskula wadajira, dagaalkii ay jabhado dhaw ahi kula soo jireen taliskii Soomaaliya muddada dheer, oo aan keliya kuma fashilin inay ummadda u horseedaan nolol ka door roon tii hore, balse waxay tahli kari waayeen, midmidkood iyo guud ahanntoodba inay ummaddooda ka baajiyaan saymaha cofaabeed ee dhexdooda ka dillaacay oo wax kastoo soo maray salleello ka dhigay

Jamhuuriyadda iyo ummadda Reer Jabbuuti oo dareensan xidhiidhka walaaltinimo ee dhaqan-wadaagaa ah iskuna xidha dadka walaalahooda ah, isla mar ahaanna xusuusan is taageeriddii ka dhaxaysey, gacantii ay shacbiga Soomaaliyeed ka geysteen muddadii ay u halgamayeer gobanima dooda, isla mar ahaanna ka feejigan halista qalalaasaha soomaaliya ka bilaabmay oo sii daba-dheer aadaa cawaaqib xumida tooska ah iyo halista ay u yeelan karto nolosheeda inaanay sina uga badbaadi karin waxay dunida ugu baaqday sidii loo daba-qabatayn lahaa intaan xeedhiyo fandhaal kala dhicin, gaar ahaanna, waxay isugu yeedhay dhinacyadii is-hayay kuna guulaysatay in ay shir isasoo hor-



fadhiistaan iyagoon cidi u kala turjubaanin, kuna martigelisay  
dalkeeda ilaa ay ka heshiinayeen  
Maansooyinka riwaayadahanina waxay cabbirayeen  
dareenkaa isaga ah oo ka dhignaa baruurdiiq, caloolyow,  
murugo waayaha ku gawdiidsaday iyo kuwo baraarujin, baaq,  
dhalliil iyo dhawraarimo isugu jirey, taageero iyo dhiirri-  
gelin, talo waano iyo tusaalayn intii-loo hidin karayey waxba  
lagala hadhin dardaraan, afeef iyo digniinba, soo-dhoweyn,  
marti-soor, sahay iyo diiqaba ...

HEESTA

## *SOO DHAWEYN*

Soo dhowaada

Soo, soo dhowaadaay

Soo, soo dhowaadaay ...

Aa, aarxibaa-ahaay

Aa, aa, aarxibaa-ahaay,

Maa, marxabbaan bikuum

Suwayee, lee biyaan feenii

Guddi yahay dhammaantiin

Soo dhowaada

Ubax dhud\* iyo baar baxay

Soomaalida dhulkeedaa

Dhibta maanta taallaa

Dawladaha dhammaantood

Dhexdhexaadinaayoow:

Soo dhowaada

Talo ma dhaafaan

Ku soo dhowaada

# GARBA-WEYNE LIBAAX

Godob-qabe libaax baa  
Goor aanan beegayn

*Godob = dakanno, aano  
Beegayn = dhaadayn, fil-  
aynin*

Geed iigu dhuuntoo

*Dhuuntay = gabbaday,  
dhabbaray*

Garbaha i haleeloo  
Ila gaadhay micdiyada  
Inta u i gilgilay buu

*Haleelay = qabsaday*

Iga guud abraaroo  
Geelii an dhaqay iyo  
Gabannadii an dhalay buu  
Giddigood kaxaystuu

*Abraar = booddo*

Geedkaa la hoos galay  
Anna gocasho iyo ciil

*Giddigood = gebigood,  
dhammaantood*

Gego madhan la joogaa  
Gardarrada intaa le'eg  
Gumaadaysa maatida  
Sidaan uga gilgilan-laa  
Inaan goosto weeyaan  
Waa ged aniga ii taal ...

*Gocasho = ciil-kaambi,  
hibasho*

*Goosto = go'aansado*

## II

Waheey guul-darridayda  
Godob aanan hadhayniyo  
Ma gef baan dugsadaa ?

*Guul-darro = jab*

Gardarrooyin badheedhiyo

*gef = qalad  
dugsadaa = eegtaa  
badheedh-caddaan, aan  
geed loogu soo gabban*

Ma ciilbaa igu gaaxdeyoon  
Hurdadii gam'i waayey?  
Ma geydh baa igu raagtayoon  
Intaan guuxay la reemay?  
Ma geelaan dhaqanaayiyo  
Lo'dii giirka lahayd iyo

*Geydh = ciil, cadho  
Guuxay = taahay, goohay*

Idihii goroddii iyo  
Awrkii goolka ahaayee

*Giir = midab is-ku-  
dhafan  
Gorodda = madax-madoow*

Uu ku guurayey reerku baa  
Garba-weyne libaax  
Miciidii godgodnayd iyo  
Intuu gawsaha saaray  
Halkaa geedka guntiisa  
Ku gumaaday dorraad?  
Ma gaaridii an qabaayiyo  
Gabdhihii aan dhalayee

*Guntiisa-jirridiisa  
Qabaayey = ii dhaxday*

Guulle uu iga beeriyo  
Gabannadii an jeclaabaa

*Gabannadii = wiilal,  
innammo*

Geeriyooday dhammaan?  
Ma odayadii gar yaqaankiyo  
Gacalkii an lahaa baa  
Gebigoodba la waayey?  
Waxba yaanan ku goohine  
Garba-weyne libaax  
Ilaa qoorta la gooyo

Illeyn gaabsani maayoo

*Gaabsan = joogsan  
maayo*

Guushii buu la hurdaa  
Halkaa geedka guntiisee  
Geddii aan ka falaayo  
Anigaa garanaayee  
Waa inaan gudintaydiyo  
Golxadkayga afaystoo

*Gol-xad = billaawe,  
abley*

Gantaashaan ku ridaayiyo  
Gumucii u diyaarshoo  
Halkaa geedka guntiisa  
Godka uu ka samaystay  
Galabta ugu dhacaa

*godka = hogga*

### III

Aabbahay goblanyeey  
Aarka gaaddada weyn-leh

*goblan = ubad la'aan  
gaaddo = qaarka sare,  
shafka*

Intuu geedkan xeraystuu  
Gaaridii an qabaayiyo  
Gabadhii iyo wiilkiyo  
Idihii iyo geeli  
Gebigoodba shidhaystuu

*Shidhaystay = qashay,  
dubaaxsaday,  
dubtey = soshay*

Golahaa ku dubtey  
Anna guul-darridayda  
Ma ciil baan gami'i waayey?  
Waa inaan guntadaayoon  
Gaashaankayga safaystoon  
Gamuunkayga afaystoon  
Geesaha dhiigga daraa ...!  
Aabbahay goblanyeey

IV

Maahmaahbaa ku go'nayd  
 Ragba raasa ka guur  
 Marbay taladii go'dee  
 Rag uun gaarka u ahayd  
 Niyada soo geli jirtiyo  
 Hammadi kugu gaagaxdaa

*Raaso = qormo, guri*

Sidii waxad goommantoo  
 Xiniinyihi kaa go'een  
 Naftaada guhaadisaa  
 Waqtigu gees kaa maraa  
 Marbay guul gudashadeed  
 Shaqada gees uga baxdaa  
 Gasiinkiyo dhuunigaad

*Gaagaaxdaa = cabbudha  
 ceshada*

*Goomman = dhufaanan*

*guhaadisaa = canaanataa*

Afkaa soo gelin lahayd  
 Gacmaha uga dhaarataa  
 Gaajadu kugu raasuqdaa  
 Ha qado gaws-kani tidhaa  
 Marbaa guri inad dhistiyo  
 Jacayl gabadh lala galaa  
 Guur xaaraan kaa noqdaa  
 Wax kale gorodda u lushaa  
 Wixii tiisu ay gashee  
 Geeriyooni dantiisee  
 Madaafiic aan ku garaacnoo  
 Geedka xoog kaga saarno

*Gasiin-cunto, dheef,  
 dhuuni*

*dhaarataa = u diiddaa*

*raasuqdaa = khamiirtaa*

*Ha qado = yaanu wax cunin*

*galaa-dhex maraa*

*xaaraan-bannaanayn, kaa*

*xarriman yahay*

*madaafiic = hubka cul-  
 culus*

GABAY  
*DHALIIL*

1) Afriikada garaadkeedu waa  
 Gaajo-beel doone  
 Gobanimo ma sooryeyso iyo  
 Gogol xalaaleede  
 Ninkastaa wuxuu gaadayaa  
 Googo' lacageede  
 Gaawaha inay buuxisay Gaadh  
 is-leedahaye

*Gaajo-beel-doon =  
dhadhamo raadis*

*Sooryeeyo = ciseeyo*

*Gaadayaa = u gabbanayaa*

*Gaawe = dhiil, doobi,  
hadhuub*

Iyadoon galley beerannoon  
 Hawl u gaballaaxsan  
 Gawsaha markay cadayatiyo  
 Micida gayr-gayran  
 Garaw aanay qodan bay rabtaa  
 Inay ku goysaaye  
 Waxay gacanta hoos haysataa  
 Guri shisheeyaade  
 Adawgeed ninkii gawracee  
 Gooyey hilibkeeda  
 Iyadana godkeeda u qoday  
 Daba guclaysaaye  
 Dhawrtadu markay gaabatay  
 Ini ka gaajooto  
 Iyadaysku wada gaydhatoo  
 Waa geddaan rabaye  
 Kumanyaal markay gawracdee  
 Gawda laga saaro

*Gaballaaxsan = u  
dhaqaaqin, qabanin*

*Qodan = beeranin*

*Adawgeed = aabbaheed*

*Godkeeda = xabaasheeda*

*Guclaysaa = oroddaa*

*Dhawrto = kaalmo,*

*Gaydhata = cadho-  
burburta*

Anna googgo'ii soo hadhaan	<i>Googo' = wax yar</i>
Dibu gardaadshaaye	<i>Gardaadshaa =</i> <i>barbaariyaa</i>
Go'yaal iyo gasiin iyo markaan	<i>Guunyo = xoolo, hanti,</i>
Guunyo badan siiyo	<i>lacag</i>
Ninba geenyadii uu dhaluu	
Golaha keenaaye	<i>Golaha = fagaaraha,</i> <i>madasha</i>
Anigaa geblaha lay tumaa Goor	
iyo ayaane	
Garsooraan haddeed u dallacoo	<i>Garsoore = xaakim, gar-</i>
Layma guud maro e	<i>yaqaanka</i>
Goconsada markii an u tumee	
Laysla garanwaayo	
Jannaaliyo Gadiid iyo markii	
Gaydhba loo yeedho	
Gadh-caddaadiyaashii markaan	<i>Shawro = shiro, faqo</i>
Goonni ula shawro	
Warkii gudaha reeraha markii	<i>Gaacsho = taabto,</i>
Laygu wada gaacsho	<i>dhiibo</i>
Ninkastaa wuxuu gocan	<i>gocan = tabanayo</i>
markaan Geliyo dooseega*	
Usha geedka laga goynayaan	<i>usha (ul) = dhengedda,</i>
Gibir* ka qaadaaye	<i>laanta</i>
Hadal iyo go'aankii waxaan	<i>Gooyey = dhammeeyey</i>
Talo ku soo gooyey	
Guntimahaan Afriikada u	<i>Guntimaha = dabinnada</i>
xidhay Way ku googo'ie	
Gu'yaal iyo gu'yaal badan	
hadday Baadho gudaheeda	
Gantaalaha halkii an kaga ridi	
Waanay garanaynne	

Ilaa suurto gaadhayso oo  
Laysla gubanaayo  
Go'ayeey Afriikaanka waa  
nood\* u goonniyahe  
Siday nolol u goobaabiyaan  
Gool\* ma dhaliyaane

*gubanaayo = shuf-  
beelayo*

*AFRIKADA SADKEEDII*

2) Afriikada sadkeedii

*Sadkeedii = saamigeedii,  
qaybteedii*

Waa horaa la soortee

*Soortay = saanyaday,  
qaybsaday*

Samir qaata baan idhi

Dabaylaha dhacaayiyo

Dilka iyo masiibada

*Masiibada = qalalaasaha*

U diyaar noqdaan idhi

Tab-qabyaaladeediyo

Taariikh ninkii wada

Isagaa ku-taagane

Ha la tiiriyaan idhi

*Tiiriyo = taageero,  
caawiyo*

Biyo ma leh dhulkiinnuye

Haddaad beero qodataan

Noloshaa ba'aysee

*Qodataan = falataan  
Ba'aysa = xumaanaysa*

Ka banbaansadaan idhi

Banbaansada-iska jira

Lacagtiyo mushaaradu

Hadday idinku fillaanayn

*fillaanayn = deeqaynin,  
kefaynaynin*

Hadba qolo an siiyee

Isku deysta baan idhi

Haddii uu dagaal dhaco

Lagu dilo rag kaa mida

Anigaa ka dooxiye

Ha u diririnaan idhi

Dariiqaa runteen furay

Kuwa imminka diiddani

Bal maxay dareemeen?

*ka dooxiye = ka matajinne**Diririna = dagaallamina**imminka = hadda, xilligan**dareemeen = dhaadeen*



*HUNGURI WAD MA ARKO*

Waqti aad u gun-dheer iyo  
 Ka gu'aal ka gu'aal baan  
 Libaaxii geedkan gelaayee  
 Guunyadaydii idleeyey  
 Gallad kuuma samaynnoo  
 Hawl yaraan kama guurine  
 Gumucyo aan ku asqeeyiyo  
 Gantaal baan kaga saaray  
 Madfacaan ku genaayey baa  
 Ummaaddii geyigeenna  
 Dhammaantood gam ka siiyey  
 Maydka goobaha yaallana  
 Gebigood anigaa lehe  
 Hadhkan gooddiyadiisiyo  
  
 Gudihiiisa qabaw  
 Goonni baan u mutaystoo  
  
 Layla soo geli maayo  
 Inta reer Garab-Daaq  
 Maanta geeridu qaadeey  
 Goblameen dumarkoodu  
 Tiradadood garan maayo  
 Aaway faarax Gadh Weyne  
 Sawtan qoortu gamuuntee  
 Gaskii meeshani yaallo  
  
 Lugihii Gorod aaway  
 Gacmihii Cabdi Buuxna

*idleeyey = dhammaayey**gallad = waxtar**asqeeyey = u nacay**gemaayey = ridayey**gayiga = waddanka**gam = ibir*

*gooddiyada =  
 cidhifyada, dacallada*

*goonni = gaar**mutaystay = xaq, yeeshay**gamuuntay = go'day*

*gaskii = sayntii,  
 timihii*

Saw kuwaa gummudmee  
Garbaa ay ku sinmeen  
Wixii aan ka gubtey  
Eey galiilyootay naftaydu  
Ma gadaala dhalkii  
Reer Galool iyo Faarax  
Shalay aan gacan haynee  
Na gaadhayn weligood  
Garabkayga is-taaginee  
Aan gumeysan jirnaa  
Annagoo reer Garas ahoo  
Waxa Geeska ku nool  
Gebigood u adkaynoo  
Ugu guunyo badhnaynoon  
Cidi aan nala guulin baa

Galabta noo bu'aya  
Anoo taa ka gubtay  
Geedkaa raaxada weyn leh  
Goonni baan u mutaystoo  
Layla soo geli maayee  
Nin waloowba go'aankan  
Dhegahaaga gasho  
Ninkii soo gardarroodee  
Inuu geedkan fadhiisto  
Damaciisu u geeyoow

Innagaysla go 'aynnee  
Dubaaqaaga gasho  
Geeribaan ka xigaaye  
Guul ciyaar lagu taabo

*gummudmay = gammuurmay*

*Galiilyo = jidhiidhico*

*Guulin = wadaagin, nagu  
qordinin*

*Bu'aya = qudhinaya*

*gasho = u raarid*

*Damaciisu = hunguri ka  
galo*

*Dubaaqa = niyada,  
Ka xigaa = ka door  
bidayaa  
taabo = lagu helo*

Hawlyari loogu gam'o  
Goormaynoogu dambaysey  
Go'i waa doqoneey

## II

Gurboodkii yaryaraa iyo

*gurbood = ciyaal,  
barbaar*

Dhallintii gebigeedba

Ummaddii gayigaygu

Geedkan bay ku dhinteene

Inaan gooni u sheegtoo

Gudihiisa fadhiistana

Anigaa gar u yeeshay

Ninkii soo gal-yidhaana

Inaan qoorta ka gooyaan

Taladii ku guddoontay

*guddoon = go'aan*

## III

Nimankaan gurbamaayoow

Gudcurbaad socotanne

Giddiigiin i dhegeysta

Anigaa guyaal badan

Cidla-gale ahaan jirey

Anigay guyaal badan

Dhibaatadu i guud tiil

Cidla-gale anaahaa

Geeridu ku badan tahay

Gees kastoo la eegana

Geedkani anayska leh

Niinna iima soo galo

Qofna ilama soo galo

*gurxan = qawdhan  
gudcur = habeen madaw*

*cidla gale = dibad,  
gale dibad joog*

*guud tiil = i haysatey*

*eegana = dayaba*

Gogol ilama dhigan karo

*IV*

Gurboodkii yaryaraayoow  
Taariikhdaad u gefteene  
Anaa geedkan lahaa  
Kuwii ii goglayee  
Gogosha ii dhigayoow  
Ma geydaan taladiisoo  
Ma gaadhaan malihiisoo

Aniga waa gurigaygiyo  
Aqalkii aan gelayey  
Markii geedka wanaagsan  
Shalay loo gurmanaayeyna  
Anaa ciidammo gaariyo  
Intoon guuto kaxaystay  
Keliday gabban waayoo

Libaaxii geedka ka saaray  
Ninkii soo gal yidhaahdoow  
Hooyadaa gacaloo  
Dambarkii godalkeeda

Gu' hore aad ka jaqday  
Baad gadaal ka xusuusan  
Xorriyooy goblantay  
Gobanimoooy hoyatay  
Gayigoow samir qaado  
Gambooleyda ku nooleey

*geydaan = uma qalantaan*

*Gaadhdhaan = ma fulin  
kartaan*

*Gelayey = u hoyanayey*

*gabbasho = laabasho,  
waabasho*

*saaray = bixiyey, eryey*

*dambar = caanaha ugu  
horreeya ee neefka  
dhalay laga liso*

*Jaqday = nuugtay*

*hoyatay = god gashay*

*samir = quus qaado*

*gambooley = haweenka la  
qabo*

Goosta weerka asayda

*weerka asayda = marada  
hengesha, marada oorida  
saygeedu dhintay ay  
xidhato*

U guddoonta belaayo  
Kol haddii gudahaaga  
Garanwaa ku murmaayo  
Ninba meelay u gaadho waa  
inoo gumucaa  
Ninba waxay u goysaba waa  
inoo gubasho  
Ninba heeru ku gaadho waa  
inoo kala go'  
Ninba geesu u eertaba waa  
inoo kala guur

*eerto = ciirsado*

(Hees)

## SOOMAALI BAA TIDHI

I

Gobannimo tis-qaaddoo

*tis-qaad = taabba-gal*

Adduunyada la taaloo

Tirsan baan ahaa

Sharaf taabba qaaddoo

Tog barwaaqo joogtoo

*tog = doox*

Tiigsanaysa nololoo

*tiigsanaysa = higsanaysa*

Toosan baan ahaa

*toosan = qumman, hagaagsan*

Dadkaa kala tegaa

*Kala tega = kala firdha*

Tabaalada iigu wacan

*tabaalo = taws, waxyeello*

Tummaataa igu fogaatay

*tummaati = nabarka eebada*

*gacantu la socoto*

Laftii taaggaa i jaban

Tintayda dabbaa ka bixi

Taftaydaa bannaanka taal

*taftayda = cawradayda*

Waxaan tebayaa aqoon

*tebayaa = waxa iga maqan*

Dadkoo isku tiirsadoo

*tiirsada = is-cuskada*

Wanaag lagu toosiye

*toosiyo = hagaajiyo*

Waaxaad talo iga qortaan:

"Markaan taag yaray

*taag = itaal, tamar*

Ninkii wax i tara

*tara = gacansiiya,*

*gargaara*

Waxan ku tashaday

Markan tamar-galo

*tamar-gal = taabbaqaad*

Inaan anna taakuleeyaa"

*taakuleeyaa = gargaaraa*

Soomaali baa tidhi

## II

Midnimo tamaraysatoo

*tamaraysatay =*

Tusmada loo xaadhayoo

*xoogaysatey*

*tusmada = qormada, guriga  
ay degeysey*

Geesi tamaro waaweyn

Dhexdooda ka toosiyoo

*toosi = kacdo, ka dhalato*

Soomaali ku tiirsatoon

La taaban haddaan ahaa

*la taaban = laga baqo,  
laga dambeeyo*

Maantooy talo iga xun tahay

*iga xuntay = iga baahdey*

Waqtigu tiir igu xidhxidhay

Tabcada ay igu rogeen

*tabco = mija xaabo*

Kuwii aan taba baree

Tacsiinta u soo dhigeen

Tunkayga ku qaadi jirey

*tunkayga = degtayda,  
dushayda*

Taariikhdaan eegayaa

*eegayaa = dhawrayaa*

Runbaan tuurka u fadhiyi

*tuurka = taagga*

*fadhiyi = ku sugi*

Waxaad talo iga qortaan:

"Markaan taag yaray

Ninkii wax i tara

Waxan ku tashaday

Markaan tamar-galo

Inaan anna taakuleeyaa"

Soomaali baa tidhi

TIX  
*TIRTIRSIIN*

Cilmigiisu badnaa  
Cimrigaaga oo raagay  
Cayn kastuu ku tusaaye  
Soomaalaay cawadaadi  
Cisigaagiyo nuurki

*raagay = in badan jira*  
*cayn = nooc*  
*cawadaadi = ayaankaagi*  
*cisigaa = sharaftaa,*  
*karaamadaa*

Calankaagii adkaadee  
Caan baxee la yaqaanney  
Waxaad cooddi lahayd  
Iyaba waa calafe  
Ma caynkanuu ku dambeeyey  
Anaa caaro ku dheeriyo  
Annagaa curad ahoo

*cooddi = xoog, tamar*  
*calafe = nasiibe*  
*caynkan = sidan*

Cid kastaw talinayna  
Soomaali waa cilladdeeda  
Waana caado ay dhaafin

*curad = walaalaha ka*  
*ugu da' weyn*

Waana tay ku curyaantee  
Caynkaa maanta ka yeeshay  
Ilaaheenu cadaab iyo  
Badi maayo cidhiidhiyoo  
Jannaduu ku casuumiye

*cillad = iin, nuqsan*  
*dhaafin = daynin, ka*  
*waantoobin*  
*curyaantay = naafawday*

Abwaankii caanka ahaayee  
Cabdillahi Suldaan  
Codkiisii loo bogayee

*cidhiidhi = diiqad*  
*casuumi = martiqaadi,*  
*ka waraabin*

*loo bogey = la*  
*jeclaaday*

Intuu ciid nala joogey  
Qabiil waa cuduroo  
Soomaalaay waa cadawgaa  
Immisuu ku cabaaduu  
Carrabkiisa ku daashey  
Ceebtuu kaaga digaayey

Ma caadhdhaad geliseen  
Wuxuu kuu cabbiraayey

Caddaan maw aragteen  
Aaway ciidammadii  
Cuddoodu adkaatee  
Cadawgoodu ka waabtay

Aaway cuurki barbaartiyo  
Culimadii waddanku

Aaway ciil-tireyaashi  
Culuunta heer fog ka gaadhee  
Cilmiga fiican lahaa  
Aaway cawradihii  
Aaway cuudki badnaayeey

Caanihiisu ku deeqiyo  
Carradii dihinayd

Waxba yaanan calaacal

Calooshayda ku hiifine  
Ninka aan cawadaadiyo  
Cisigaaga jeclayni  
Ceebtuu kaa arkayo

*ciid = ifka, noolaa*

*cadaw = nacab*

*cabaaduu = dhawaaquu*

*kaaga digaayey = kaa  
waaninayey*

*caadhdhaad =*

*cabbiraayey =  
sheegayey, tilmaamayey*

*waabtay = weeday  
mildhaawayey*

*culimadii = aqoon -  
yahankii*

*cawrado = gabdho*

*cuudkii = xoolihii  
noolaa*

*deeqay = fillaaday*

*dihinayd = aan la  
maalin*

*calaacal = hiirtaanyo,  
hiif-hiif*

*Hiifin = canaanan*



Caddaan kuuguma sheegee  
Waxaan caawa ahaan  
Codkaydiinku gubaayo  
Ceeb la'aan u hadlaayo

*gubaayo = kulaylinayo*  
*ceeb = fadeexad,*  
*cambaar*

Cadkeennaa isku yaalloo  
Canaantu waa tirtirsiin

*tirtirsiin = dhiirri-*  
*gelin*

(Hees)  
*XUJO*

Wixii dhacay

Waxa aad dhigteen

*dhigteen = samayseen,  
yeesheen*

Hadallada la soo dhuray

Dhegihiinna geliyoo, dhegeysta

Dhallintii waddankiinniyo

Hooyaadii dhabarka

Dhallaankay ku siddey

*dhallaanka = ubadka*

Odayaashii dhulkiinna

Bal maxay ku dhinteen?

Maxaa dhiiggu ku daatay?

Dhismahaw dumiseen?

*dumiseen = burburiseen*

Dhaqankii u rogteen?

*rogteen = dooriseen*

Dheemmankii iyo luulki

Dhoobadiinnu lahayd

Bal maxaad u dhacdeen?

*dacdeen = boobteen*

Dhaxalkiinna dambe

*dhaxalkiina =  
aayihiinnaa dambe*

Bal maxaad u dhigteen?

Kuwa dhalani dooneen

Dhibta taalla ogeyn

*taalla = jirta, joogta*

Dheef maxaa u taal?

Xoolo dhaqatadiinnii

*xoolo-dhaqato = xoolo  
jir*

Dhankay maanta jiraan?

Gabay  
*GOL DALOOL*

*I*

Gaadiidku heeryada marbuu  
Gees u badiyaaye  
Nin guhaad qabaayina marbuu      *Guhaad = gawdh, canaan*  
Xadhiga goostaaye  
Afrikaay cadaawaha na galay      *Cadaawaha = colka*  
Ee na kala goostay  
Ee geesiyaashaan dhalliyo  
Guraya maahayska  
Ee guunyadeennii dhashiyo      *Ganida =*  
Ganida maalaaya  
Gayigana intuu gebi hantiyey  
Guraya maadhkiisa  
Gol-daloolo badaneey Afriik      *Maadhkiisa = hantida*  
Waanaad garanayne      *khayraadkiisa*  
Innagoo dhammaan goommanoo      *goomman = goolmoon*  
Gaajo macaluullay      *macaluullay = u*  
Bahalkaa gujada nagu hayee      *dhimanaya*  
Ganacu weynaadey      *ganacu = calooshu*  
Ninna kama galiilyoon xumaha  
Gogosha noo yaalle  
Mar haddaan gumawnoon  
dagaal Galabta qaadaynin  
Gaashaan haddaan ula tegeyn  
Gamasyo dhiigaysan      *Gamas = hubka lagu*  
Xiniinyaa in laynaga guraa      *dagaallmo*  
Nagu gar weeyaane

Inaynaan haween guur ku deyin  
Nagu gar weeyaane  
Gabdho iyo inaan wiil la dhalin  
Nagu gar weeyaane  
Maxaad guri yagleeshaa adaa  
Gabay xilkaaggiye

*Yagleel = ood*  
*Gabay = gudan kari*  
*waayey*

**Geeraar**

*II*

Maa adigaa wax taraayoo  
Raggan aad u tayiisteed  
Ku talbiistay gidaarka  
Toosinaaya in dhoow  
Tafahaaga bal eed

*Taraya = qabanaya,*  
*kordhinaya*  
*Tayiistay = yaraysatay,*  
*xaqirtay*

*tafaha = taagta,*  
*itaalka*

Toosin baa kugu fiicane  
Raggii aan is guraynee  
Godobtu ay na dhex taallee  
Gu'yaal aan ku maqnaayee  
Inaan guusha ka hooyo

*ka hooyo = ka helo,*  
*libaysto*

Go'aankaygu ahaaye  
Ilma guud mad madoobe  
Sidii geenyo xarraantay

*Xarraantay =*  
*talaxgabtay, dekaantey*  
*la cuno*

Sanka goolka lahaayee  
Garas-geed midhihiisa  
Gasiinkooda cunaayey

Midhaa geedka ku yaalliyo  
Garaskaw karinaayayee  
Garra-seegga ahaayeen  
Macdantooda guraayaye  
Gannoodeen indhahoodu

*Gannoodeen = foororeen,  
wax arakaynin*

Gees kaleeto arkaynin  
Loo gurguurtay habeenno  
Gooni loogu wax sheegoo  
Intoo loo gogol xaadhay  
Galiilyooday dhammaanoo  
Gibishii iska tuurayoo  
Labada gees u yar joogtiba  
Anay ii guddiyaanoo

*Gibishii = heeryadii*

*Guddiyaanoo =  
tashadaan, shawraa*

Maalin aan yar guhaadshay  
Ilaah baa i gargaaraye  
Gacan baa dhici gaadhey  
Ninka gaystay xumaantee  
Ina giig la yidhaana  
Anigaa garanaayee  
Waa inaan la giriifoon  
Golaha weyne adduunka  
Geeyo oon ku ciqaabo  
Maxkamad gaar ah la saaroo  
Guusha aan ka helaaye  
Ma gu' baa iga dhacaaya

*Giriif = shaqo joojin*

*Dhacaaya = yaraanaya*

(Hees)

## SOOMAALIYEY MAQAL

Soomaaliyeey  
Soomaaliyeey maqal  
Waa talo sokeeyee  
Soomaaliyeey maqal  
Geesigu siduu yidhi  
Soomaaliyeey maqal  
Sannadahan intii dhimatayee  
Saantooda lagu aasay siigada  
Soomali ugu filan  
Intii socotay waa hore  
Soomaali ugu filan  
Sabadaad qaxootiga  
Saxariir dhibaatiyo  
Inta silic la joogtaa  
Soomaali ugu filan  
Colaad laysku seegiyo  
Wixii sebenkan ka tegey  
Waa xumo socdee tuur  
Beesha nabad u sahamiya  
Maanta' nabad u sahamiya  
Ilamaa sinnaan iyo  
Samo laysku raacana  
Seexan maayo geesigu

*Sokeeye = gacal, xigto*

*Saantooda = haraggocda*

*sabada = agagaarka*

*saxariir = silic*

Soomaaliyeey maqal  
Waa talo sokeeyee  
Soomaaliyeey maqal  
Geesigu siduu yidhi

Soomaaliyeey maqal  
 Inta sebi la waayey  
 Soddon jire la gawfacay  
 Surka odayo laga jaray  
 Inta dumar sadkoodiyo  
 Adduunyada la seejiyo  
 Aqoon yahan la soocoo  
 Cilmi laga sugaayey  
 Sabab li'i ku dhimatay  
 Soomaali ugu filan  
 Inta sacabbo caydheed  
 Saakadan la joogtee  
  
 Surmi iyo harraad iyo  
 Inta gaajo solantay  
 Tobankiiba waa sagaaloo  
 Malyuumaad sare u dhaafe  
 Colaad laysku seegiyo  
  
 Wixii sebenkan kaa tegey  
  
 Waa xumo socdee tuur  
 Beesha nabad u sahamiya  
 Maanta nabad u sahamiya  
 Ilamaa sinnaan iyo  
 Samo laysku raacana  
 Seexan maayo geesigu

*sebi = dhallaan, cayddi*

*surka = qoorta, madaxa*  
*sadkoodii = calafkoodii*  
*seejiyey = kadab-gooyey*  
*soocay = miidhay*

*caydh = saboolnimo*  
*saakadan = subaxan aynu*  
*joogno*  
*surmi = oon, harraad*  
*solantay = dubantay*

*seegay = lagu kala*  
*dhintay*  
*sebankan = xilligan*  
*kaa tegey = ku dhaafay*  
*tuur = ka hadh, illaw*

TIX  
*XAAL ADDUUN*

"Innalladiina Farraquu Diinahum  
 wa kaanuu siican lasta minhum"  
 Sadaqallaahul Cadiim.

Addunyada oogadeeda  
 Dhammaan aadmiga ku nooli  
 Kuwaan iriqays xignee  
 Ul iyo diirkeed nahoow  
 Ayaantay iga xumayd

*oogada = korka, dusha*

*iriqa = isir, dhalsho*

*ayaan = dharaar, maalin*  
*iga xumayd = dhibtu i*  
*haysatey*

Awooddayduna yarayd  
 Kuwii abtirsiimo iyo  
 Abnimo iigu hiiliyoow

*abnimo = ehelnimo*

Aboodiga dhacay xaqayga  
 Ableydii aan ku diley  
 Afeeyee ii lisee  
 Addoonsiga ii nacoow  
 Sidaa ani oohintayda  
 Shalay uga uur kacdeen

*uur-kacdeen = uga jiidh-*  
*naxdeen*

*alan-ba' = eedaad*

Inay anna alan-ba'iinna  
 Naftaydu adkaysan weydey  
 Kolley waad i ogthiine  
 Awooddaydiyo kartida  
 Aqoontiyo garashadayda  
 Intuu Alle igu-ogyahay  
 Anoon irbad idinka dhimin

*kartida = karaanka*

Agtiinna inaan is-taago  
Inaan adhaxdiinna jaban  
Ogaadoon idiin gurmado  
Idiin soo ururiyoo  
Shirkani u abaabuloo  
Ujeeddadu kama fogee  
Ergaan ahay nabad siddee  
Arliga Soomaaliyeed  
Ayaamo dhoweyd horteed  
Raggii u arrimini jirey  
Kuwii eedeeyayee  
Iblays weeyaan yidhee  
Awoodda ka qaadayoow  
Dadkiinnii kala ambaday  
Intaad soo ururisaan  
Inaad uur-ku-taalladiyo  
Iimihii hore baanataan  
Ayaan idinka eegayee  
Ammuur aan hore u dhicin  
Ayaan-darro tii ka weyn  
Intood ummaddii baddeen  
Ayaad arligii gubteen  
Indheer-garad iyo nin raga  
Aqoontiyo garashadii  
Dalkiinnu u aayi laa  
Unuunka intood jarteen  
Miyaad ummul taag-darrayd  
Ilmaha weydaariseen

*adhax = laf-dhabarta  
gurmado = kaco  
u abaabulay = u qaban-  
qaabiyey  
sidda = wadda, doonaysa  
arliga = gayiga, carrada  
u arrimini = ka talini  
eedeeyey = ku kacay  
ambaday = lumay  
baanataan = dawaysaan  
eegayey = sugayey  
ammuur = arrin  
ayaan-darro = nasiib  
xumo  
baddeen = u horseeddeen,  
ku gasabteen  
aayi-laa = dhaxli lahaa  
unuunka = kurka, madaxa  
taag-darrayd = itaal  
xumayd, jilicsanayd  
weydaariseen =  
dhaafiseen, seejiseen*

Miyaad tii uur lahayd  
Abley kaga soo riddeen  
Curyaan iyo ruux indha-la  
Oo aan orodkaba karayn  
Miyaad eebada darteen  
Awooddaad ku loollanteen  
Alle idinku dhaariyee  
Arsaacaqday leedahoo  
Muxuu aayaheedu noqon  
Haween wada agal-cad iyo  
Agoon daadduun ahoo  
Ardaa kale kuududdoo  
Dad aan asalkood ahayn  
Anfaaciyo quud ka sugi  
Ummadda Soomaaliyeed  
Addoonsina soo martee  
Ammuurtaa weli ma arag  
Adduunyada laguma maqal!  
Ajooy dhadhankaa mid noqoy  
Shaydaan wuu na ambiyee  
Ibleys muu noo beddelo  
Ummadi weli kuma ducaysan  
Ninkii aaminaa yaqaanne  
Aniga aar iyo shabeel  
Dugaag baan u arkayaa  
Abeesiyo beyda jiifta  
Markaan labadaba arkeen  
Ogaadey waxay yihiin  
Ammaan midna waan u waayey

*riddeen = dooxdeen,  
tuurteen  
curyaan = cagooleh  
eebo = hubka  
loollanteen = hirdanteen  
arsaaq = dheef  
aayaheedu = duuggeedu  
agal-cad = weercad  
asay, hengel, hengef  
kuudud = yuurur  
asal = isir, walcan  
quud = cunto  
ajo = biyaha uskag ah oo  
urayya*

Dhigtaan udub tiirinayn  
Alool iyo kebed dul saar  
Aqliga yidhi baa gabno ah  
Halkaa aan oodda dhigay  
Ujeeddadu waxa ay tahay  
Indheer-garad kama ambado  
Masgiid qudha uun ku jira  
Eedaankuna uu u dhacay  
Allaa la hortaagan-yee  
Kiiyoo isu uur fayow  
Imaam qudhi inu tujiyo  
Ayuunbaa la ogolyee  
intoo lays wada ag-kaco  
Haddii mid kastaa iskii  
Aayaadka u jiihiyuu

*tiirinayn = taagerayn*

*gabno = caana yar*

*ambado = habaabo*

*u dhacay- = loo addimay*

*uur-fayaw = calool-san*

*tujiyo = tukiyo*

*ag-kaco = baal yaaco*

*u jiihiyo = kor uga daba  
akhriyo*

Dhankuu doono u addimo  
Islaannimo kuma jirtee  
Ujeeday leeyihiin  
Salaaddaa lama aqbalo

*aqbalo = oggolaado, ma  
qunto*

Ilaahay baa yidhee  
Miyaa la illawsan yahay  
Mid taa u egoo ag-taal  
Aqoon-yare yeelkadii

*u eg = la mid ah*

*yeelkadii = isagay  
jirtaa*

Nin ragi waa ila arkaa  
Addoonku hadduu dambaabo

*addoonku = qofku  
dambaabo = gefo, qaldamo*

Adduunka intuu dul-joogo  
Ee aan ajashiisu gelin  
Istaaq furallaw bannaan

*ajasha = hedda*

*bannaan = furan*

Allena wuu ka aqbalaa  
Arkaantana lama beddelo  
Araarta an gabiyoona

*araarta = hadalka  
hordhaca*

*guda-galee = gonda-dego*

Ujeeddada guda-galee  
Soomaalaay aayahaaga  
Ha aasine aayar garo  
Ilaahaagana u noqo  
Qabiil iyo ololihiisa  
Ayaad eedaye ka joog  
Awooddiyo wadajirkaa  
Ayaad ku ammaanantee  
Ninkii kuu uur-xumaa  
Itaal aad kaga adkayd  
Ayaan uun kula sugaayey  
Albaab haysugu balliqin

*eedday = ku jabtay*

*balliqin = furin*

## II

Aammin kii iigu dhowaayee  
Ilaahbaygu ogaaye  
Uurka aan ka jeclaayoow  
Waqtigaa ad arkaysee  
Arammideeda belaayo  
Ayaanba meel irkataa  
Darraad adigay ahayd  
Anna maanta ahaanbay  
Umalka iyo dhibteedu  
Oogadayda dul-taal  
Waddankaa ololaayiyo  
Adhaxda liicday darteed  
haddii aad aragteenoo

*arammideeda = iinteeda*

*irkataa = cuskataa*

*umal = hiirtaanyo*

*liicday = wiiqantay*

ka adkaysani waydood  
Awooddaada dul-saartay  
Arrin weeye wanaagsane  
Anna waan oggolaaday  
Halkaa taa an ku oodee  
Arriin sheekhu lahaa iyo  
Intii aad na farten

Annana waan oggolaannay  
Arrin laysku lahaa iyo  
Waa abaal gacaltooyo  
Ballanteenu Isniin

*oodee- = xidhee*

*na farten = nagula  
dardaaranteen*

Hees  
*RAGANNIMO*

Adduunka haddii la rogayo  
Miyey guntu soo ruqaysaa  
Dadkaa raarida la dhigay  
Haddaan laga deyn rag-ragashada

Raadkooda miyaa la baabiin  
Ciiddooda miyaa la rarayaa  
Runtii way gudhdhoo  
Been baa rugaha

Reeraha furtee  
Ragannimo rakay,

Ku jirtaa wallee

Waqti raaxa-laan  
Weli raadiyaa  
Raacdo goobayaa

Ribbataye dadoow  
Ragaaddaye ayaa

Maruun soo rogaal-celin

Ragannimo rakay  
Ku jirtaa wallee

Rasaasta haddaanad joojin  
Miyaad rajo yeelanaysaan

*rogayo = gembiyayo  
ruqaysaa = fuqaysaa  
dhigay = wadhay  
ragragasho = ku  
digashada*

*gudhdhey = abaaddey  
rugaha = guryaha,  
qormada  
fuurta = dejisa  
rako = meel  
cidhiidhyoon, adag*

*raacd-goob = baadi-  
doon  
ribbaataye = rikatay  
ragaaddey = naafawdey,  
wiiqday  
rogaal-celi = soo  
laaban*

*rasaasta = xabbadda*



Ninkaan roonaansho kuu qabin  
Reerkaaga miyuu u tudhayaa?  
Raqdaada miyuu ka naxayaa?  
Inuu riiqdo wuu ku dhaartee  
Raran lagu beddelay  
Ramadkiyo nimcadi

Ragannimo rakay ku jirtaa,  
Wallee

Nabsi raarmay baan  
Weli raadinnaa  
Raad-goobayoo  
Waannu raagsannee

Yaa soo rogaal-celin?  
Ragannimo rakay  
Ku jirtaa  
wallee

*roonaansho = wanaag*  
*u tudhayaa = u naxayaa*  
*raqdaada = maydhkaaga*  
*riiqdo = rafto, jabo*  
*raran = carrada kulayl*  
*ramadka = xoolaha*  
*dhalay*

*raarmay = xannibmay*

*raagsannay = nagu*  
*dheeraaday*

TIX  
*SOOMAALIYEY HA HESHIIN*

Soomaaliyeey ha heshiin  
Ma habboona sidaasi

Taladaa isla huursani

Horay idiin boqna-goysoo  
Dabkaa maanta huraaya

Waa halkuu ka bilaabmee  
Hantaaqadaa idiinku wacnayd  
Nin qudhoo wax hoggaanshey  
Hambadii waddankiinniyo

Hantiduu wada qaadannoo  
Inta uuna hurayn iyo  
tolkii buu ku hagaajinnoo

hanjabo goor kasta joogtiyo

harraad buu idinku laynne  
maantaad hawlkar tihiinoo  
waqti fiican hesheene  
idinkoo isku heer ah  
nin walawba halkii  
horjooge aad ka ahayd  
weligaaba ku heesoo  
calankaaga ku hayso  
heshiis aan soconayn iyo  
shirku yuu idin habsaaminne  
hawlihiinna ku toosa

*ma habboona = ma*  
*hagaagsana*  
*huursan = degebsan,*  
*dedan*  
*boqna-goysey = kadday*  
*huraaya = shidmaaya,*  
*reeraa-baya*

*hantaaqo = nitaakho*  
*qudha = keliya*  
*hambadii = intii*  
*hadhay*

*hagaajin = ekeyn, u*  
*duwi*  
*hanjabo = hatidaad,*  
*caga juglayn*

*is-ku-heer = siman*

*ku toosa = ku hagaaga*

GABAY  
*H I D D E*

Hiddahay ahayd iyo markaad  
 eegto dhaqankeeda  
 Asalkeeda Soomaaliyoo *Awrran = xoog weyn*  
 sharaflehoo awrran  
 Ubad wada walaaliyo iyadoo ul *ubad = carruur*  
 iyo diirkeeda  
 Abtirsiinyo iyadoo gudboon odiyo *gudboon = maso ah*  
 wiilkiiba  
 Oo aynigay tahay dhammaan lagu *ayniga = da'da, ganka*  
 ammaanaayo  
 Ololaha qabiilkiyo waxaad ku  
 ambaqaaddaanba  
 Aalad iyo xumaan iyo waxaad  
 arammi beertaanba  
 Aabbo iyo hooyiyo waxaad  
 ubaxa laysaanba  
 Arrafada dharaartii salaad  
 uunku wada iidey  
 ummaddii waraabe ka dhergee  
 aarku ku casheeyey  
 Maydkii ardaayada ku go'een  
 cidina aasaynnin  
 Ooryaha raggooddii lumee agasha *lumee = la waayey,*  
 loo saaray *dhintay*  
 Goortuu af-garadkii dhintee lays *agal = asay, hengef*  
 aqbali waayey

Waayeel itaal-daran kolkii loo  
 arxami waayey *arxami = waayey-*  
 Aqallada burburay daarahaan *naxariisan waayey*  
 idhan ka noolayn day *idhan = in yari*

Aroorida dhulkaa laga dhigeen *aroorida = bannaanka*  
 udub ka taagnayn day  
 Hiddahaa indhaa laga ridee *oofa = feedha, docda*  
 oofa laga toogtey  
 Adduun-dhaqatadaa maalka iyo  
 awrta laga boobay  
 Urugadiyo ciilkii markii *urugada = ciilka*  
 dumarku aanyaabay *aanyaabay = anfariiray*  
 Eelaha xanuunkiyo markay *iintu = nuqsaanta*  
 iintu wada gaadhey  
 Ammaanka iyo nabaddiyo markii *iimoobay = naafoobey*  
 samuhu iimoobey  
 Arladaba markii laga qaxee  
 ubadku daadduumay  
 Ummadduba markay kala diddee  
 gobol agoomoobay  
 Gaajada dadkii la ambadee  
 oonku wada laayey  
 Idinkaa belaayada unkoo  
 eedda ku lahaaye *eedda = canaanta*  
 Arlada idinkaa baaba'shoo  
 eedda ku lahaaye  
 Dabkaa ololi idinkaa shidoo *shiday = huriyey*  
 eedda ku lahaaye

Taariikhda idinkaa ba'shoo  
eedda ku lahaaye  
Idinkays ugaadhaye nin kale  
idin ma aafeynne  
Aniga iyo anigiyo anaad  
ku amba seegteene  
Anaa qaban anaa qabani baad  
ubad ku layseene  
Calankii afkiinnii lahaa  
waad ka oroddeene  
Nin waliba amaarad u toshaad  
ku arrin weydeene  
Islaamnimo ka gudubtoo ifkiyo  
seegte aakhiro e  
Ubadkeeda gooshaa cuntee  
in isma dhantaane  
Afartaa odhaahdayda iyo erey  
canaaneed dheh  
Araarteeda maansada haddaan  
talo ku soo oodo  
Inay ururto Soomaalidii kala  
ugaadhawdey  
Oo uursamaan lagu tashado  
way ekoon tahay dheh  
Wixii hore illooba idinkoo  
Ehel walaaloobay  
Aarmiga intaad tuurtid iyo  
Eebadaad sidatid  
Inaad dibu abuurtaan nabadi  
Way ekoon tahay dheh

*ba'shay = tirtiray*

*amba-seeg = dan-seeg*

*oroddeen = irdhawdeen*

*amaarad = astaan,  
calaamad*

*gudubte = kabaxde*

*goosha = libaaxa  
dheddig*

*canaan = hiif*

*oodo = xidho*

*ugaadhaw = irdhaw*

*uur-samo = niyad  
wanaag*

*ekoon tahay = habboon*

*aarmiga = hub casri  
eebada = hubka gacan*

Is raac iyo midnimo inad dhistaan  
Way ekoon tahay dheh  
Aayahiinna oo laga tashado  
Way ekoon tahay dheh  
Inaad dibu aglooshaan nololi  
Way ekoon tahay dheh  
Gobannimada oydee arradan  
Inad dhistaan weeye  
Ummaddii horuu kala tagtood  
Ururisaan weeye  
Ballanka idinkoo oofinnoo  
axad ku qaadaaya  
Arrin mida inaad yeelataan  
Way ekoon tahay dheh  
Adduunyadu dhammaanteedba  
way idin sugaysaaye  
Eedaad inta idiinku filan  
Waana aragteene  
Usha dhiga is-aammina tashada  
Arammidii maydha  
Is aqbala is raacaa xumaan  
diinka aya roone

*aglool = abuur,  
yagleel*

*arradan = qaawan*

*oofin = fulinaya,  
kasoo baxaya*

*eedaad = rafaad,  
kadeed*

*roon = dhaama*

TIX  
SAMO GOOB

Guurtida aqoontiyo	<i>Guurti = waayeel samo ah</i>
Indheer garatadiisiyo	
Sama goobayaashoow	<i>sama-goob = nabad- doon</i>
Guddiyahay salaan guud	
Maamuus an gaagixin	<i>maamuus = xurmo, qaddarin</i>
Gobannimo ku ladhan tahay	<i>ku ladhan = weheliso, ku dheehan</i>
Gacmo furan guddoonsada	
Guddiyahay ma kala ihin	
Laba geeddi dheer iyo	<i>geeddi-dheer = qayaad dhulal kala fog</i>
Gebiyo u dhexeeyaan	<i>gebiyo = hataqyo, jarar</i>
Goobtana isugu yimid	
Guddiyahay ma kala ihin	
Gaal iyo islaamnimo	
Laba kala geddiyanoo	<i>geddiyan = kala jaad</i>
Midba diin u gaara leh	
Goobtana isugu yimid	
Guddiyahay waxaan nahay	
Geeskani Afriikaad	
Laba Guulle wada furay	<i>furay = dejiyey</i>
Guddi yahay waxaan nahay	
Laba goof wadaagtoo	<i>goof = ceel gudhay, guri</i>
Gallinkaba isugu xiga	<i>gallinka = degmada</i>
Guddiyahay waxaan nahay	

Hilbo aanan kala go'in	<i>hilbo = jiidh isku yaal</i>
Guddiyahay waxaan nahay	
Geed iyo caleentii	
Garashiyo xigtaan nahay	<i>xigto = gacal, walaal</i>
Girridkeennu waa meel	<i>girrid = jirrid</i>
Gayigaad timaaddeen	
Golihiinni weeyaan	
Ma tihiin Giriig iyo	
Ummad aan la garanayn	
Mar labaad salaan guud	
Maamuus an gaagixin	
Gobannimo ku ladhan tahay	
Gacmo furan guddoonsada	
Immikana go'aankiyo	
Shirka goobta loo yimid	
Waxa gooha keeniyo	<i>gooha = reenka, guuxa</i>
Aan u gudubno sheekada	
Goodaha colloobiyo	<i>goodaha = beelaha</i>
Gacalkiyo xigaalada	
Sharafkii ka guuriyo	
Gabadh laysa siiyiyo	
Guur loo xishaa jirin	<i>xishaa = hungureeyaa</i>
Gulufkiyo dagaallada	<i>gulufka = weerarka</i>
Goosatada ableeydiyo	
Gudintiyo billaawaha	
Waran gees biciidle ah	<i>gees-biciidle = af dhuuban</i>
Gaashaanka dirireed	
Hubka laysu wada guray	

Gawraca walaalaha	
Gumuca is-la beegsaday	<i>beegsaday = isku quudhay</i>
Gabbalkii dhacaayiyo	
Waagii guduutaba	
Malyuumaadka go'ayyee.	
Gar la'aanta lagu dilo	
Gasariirka maydkee	<i>gasariirka = darxumada</i>
Isagoon god lagu ridin	
Weli guudka yaallee	
Gorgorkiyo waraabuhu	<i>gorgorka = haadka weyn</i>
Goosiga ku naaxeen	<i>goosiga = quudashada</i>
Galaayuuska ciilkiyo	<i>galaayuus = sawaxan</i>
Gocashada raggoodii	
ilmo gabaxda naagaha	
Gondahooda qoysee	<i>gondaha = qoobka</i>
Gambadii caddayd sida	
Gosha ubadka lagu sido	
Kuwa aan wax galabsane	<i>galabsan = geysan</i>
Kuway laysay gaajadu	
Harraadkana la golongolay	<i>golongolay = gotay</i>
Garashada aqoontiyo	
Tacliintiinna guurtee	
Geba gebaha laga dhigay	
Gabbalkeedi uu dumay	<i>gabbalkeedii = xiddigeedii</i>
Guntimaha dhaqaalaha	
Taariikhda gadantee	<i>gadantay = aasantay, luntay</i>
Gunta xididka loo jaray	

Geddiyaasha soo dumey	<i>geddiyaasha = gebiyada</i>
Daaraha geddoomee	<i>geddoomay = dumay, burburay</i>
Madaafiicda lagu ganay	
Dhulka ciiddu gubatee	
Dhirta gaasti lagu shubay	
Beerihi gabnoobeen	<i>gabnoobeen = dhalmo daayeen</i>
Midhihiina ka guureen	<i>ka guureen = dhalmo daayeen</i>
Geyigii idlaayoon	<i>idlaa = dhammaa</i>
Guri maanta nool iyo	
Geed la hadhsadaa jirin	
Bulshada is-gumaaddiyo	
Geerida la yaabka leh	
Gobannimada ooydiyo	
Soomaali kala go'a	
Warka sida galiilyada	<i>galiilyada = naxdinta,</i>
GUULEED maruu helay	
Cabbaar buu gannoodsaday	<i>Cabbaar = rabbac, qaddar</i>
Gadhka saaray lawyada	<i>gannood = fadhi foorar ah</i>
Talo maaro goobkeed	
Markii uu u kuur galay	<i>kuur-gal = ka baaraan deg</i>
Galiilyada la soo toos	
Labadiisa garab iyo	
Geesaha intuu deyey	<i>deyey = eegay, fiiriyey</i>
Dabadeed guntiga xidhay	
Geesigu wuxuu yidhi	

Gobollada Jabbuutiyo  
 Markii uu gumeysigu  
 Goobtani ka talin jirey  
 Iyagoo gefkii iyo

Gardarrada badheedhka ah  
 Dadka lagu garaacoo  
 Ninba goonni loo furay  
 Gondahana ka xidhan yahay  
 Noloshuna go'doontahay  
 Gole habar dugaagiyo  
 God waraabe hoos taal  
 Ragannimadu gudhan tahay  
 Runtu geed xadhaadhiyo  
 Iyaduna gammoor tahay

Dharaartii gilgilashada  
 Calan guudka saaroo  
 Gunnimada ka hoos baxa

Aan u qaadnay geeddiga  
 Kuwii hawsha nala galay  
 Gacantaydii midig iyo  
 Garabkaan ku tiirsaday  
 Gaashaanki cadawgiyo  
 Iiga hiishey gaalada

Go'ayeeey asaaggay  
 Beeshii gadaannayd  
 Gabbalkeed miyuu dumey

*gefki = tacaddigii,  
 joor-falkii*

*gammoor = gamboor,  
 geed xoolaha daaqaa  
 ku dhintaan*

*gunnimada =  
 midiidinsiga*

*tiirsaday = cuskaday*

*hiishey (hiil) =  
 dhiciyey  
 asaaggey = qayrkay,  
 facay  
 gadaanneyd =  
 dhisnayd  
 dumey = dhacay*

Ma sidii gelgelintiyo  
 Goob laga hayaamaa

Isagoo gasiinkiyo  
 Gogol uu ku seexdiyo  
 Gama'aba ka saahiday

Nafta goonni ula shawr  
 Dabadeed go'aansiga  
 "Galbataye Allahayoow  
 Gurmada baa habboon "yidhi  
 Jabhadaha war loo gee  
 "Gawda aan maqlaayiyo  
 Gumuciyo rasaasaa  
 Dadka lagu gumaadiyo  
 Gantaalaha dhiguu " yidhi  
 Iyaguna garawsade  
 Gadh wadeenno beeleed

Guddiyaal la soo xulay  
 Goob loogu wada yeedh  
 Isu-geynta beeshiyo  
 Gogol-xaadhka nabadeed

Isagoo ku guda jira  
 GUULEED wuxuu yidhi  
 " Gardarrooyinkii hore  
 Godobtiyo xasaasiga  
 Gunta reerka loo dhigay  
 Wixii dhacay gu'yaalladan  
 Idinkoon guntima furfn

*laga hayaamay = laga  
 guuray*

*ka saahiday = ka  
 soomay ka caagay  
 shawr = shir*

*galbatay = tagtay*

*gumaad = xasuug*

*gadh-wadeen =  
 hoggaa-miye  
 xulay = miidhay,  
 soocay*

*Gogol-xaadh =  
 diyaarin,  
 qabanqaabin*

Ila-guud ha laga maro  
Go'aan lagu daweeeyo

Samo lagu gunaanado

Waa in laysla gaadhaa  
Guday waajibkiisii  
Guddiyahay wanaagsani  
Idinkoo guddoonsaday  
Taladaad gorfayseen

Is-af-garanshadiinnii

Guulaha ka soo baxay  
Hawraarta loo guux

Ujeeddada godkeedii

Allaylehe ma gees-marin  
Waa gob iyo caadkeed  
Immikana go'aankiyo  
Gebagebada maansadu  
Waxay gobo' ku soo tidhi

Guubaabo wada jira  
Waanooyin dhaxal gala

Midnimadu u gole tahay  
Guddiyahay wanaagsani  
Gacmaha is qabsada oo  
Guul iyo walaalnimo  
Ha u gurato sheekadu

*daweeyo = baanto,  
bogsiiyo  
gunaanado =  
dhammeeyo*

*gorfayseen = ka  
baanteen*

*loo guux = loo  
riyaaq, lagu farxo  
godkeedi =  
dulucdeedii*

*gobo'-tidhi =  
ururtay*

*waanooyin =  
dardaaranno*

*gurato = ha noqoto*

## TIX WAX SHEEG;

### I

Nimanyohow shilkii dhacay

Sharka iyo waxyeellada

Soomaali lagu shiday

Shoorkii ibliiskee

Shanta meel u kala raray

Belaayada shirrabanee

Dalka shirixa loo dhigay

Shiidkiyo dagaallada

Shaygii xumaayee

Sharafkeeda lumiye

Afrikada ku shaac baxay

isagoo shamaal dhebey

Beeshani shuq soo yidhi

Shaasheeyey nabaddii

Ina laga shakaalaa

Shirka loo haloosiyey

Shaydaanka laga naar

Immikana sharmaarkaa

Sheekada inoo furi

*shil = dacdo  
waxyeello wadata  
sharka = xumaha*

*shoorkii = taladii*

*shirraban = dardarta  
qabta*

*shirixa = gondaha*

*shaac baxay =  
caanbaxay  
shamal-dhebey =  
cartamaya*

*shaashee = sadhee,  
xumee*

*shakaalaa = dabraa  
loo haloosiyey = loo  
qabtay*

*furi = bilaabi*

### II

Wafdiyohow warraaqa codkayga

Maansadan walaaca ku dheehan

*warraaq = qaylada*

Waydiyo baroorta la weeran *weeran = hengelan*  
 Wawleyda ciilka la jiipta  
 Waqtigiyo wax jooga ku saabsan  
 Wafdiyoow adaan kuu wadaaye  
 Waatane waraysi la yeelo  
 Wayddii waxay ka hadlayso *wayddii = su'aal, warso*  
 Ujeeddada markaad ku wereegto  
 Wejigiyo salkeeda ogaato *salkeeda = dabadeeda*  
 Ha waabanne jawaabta wax soo dheh  
 Adduunyadan wanaagga ka\* *soontay = suurday diidday*  
 soontay  
 Wanaag lama wadee laga weecay *weecay = leexay ka beydhay*  
 Runi waa horay wehel beeshay  
 Waydiyo xumaanta wareegi  
 Oday baa wadoo ka wakiil ah  
 Isagaa wadoo ka mas'uul ah  
 Wadaaddadiina ka waabte  
 Wacdi iyo xadiis lama sheego  
 Waayeel ma waansho dadkiisa *waayeel = oday*  
 Wafidiyohow Ujeeddada Weedha *weedha = ereyga*  
 Halkii aan kuu wadey aan ku *ku weecsho = ku duwo*  
 weecsho  
 Soomaali weyn waddankeeda  
 Waayadan walaaca ka taagan *waayadan = beryahan*  
 Waydiyo xumaanta war beeshay  
 Warshadaa gubtiyo wax-ku-oolka  
 Beeraha warkooda la dhaafay *dhaafay = daayey*  
 Waddankiyo dadkii wada gaadhay  
 Idinkaa wadoo ka-mas'uul ah

Weligood dad aan kala weecan  
 Waddan keliya weyne ku uumay *uumay = abuuray, alkumay*  
 Diintooda wacan ku walaala  
 Weel qudhana dheef ku wadaaga *dheef = cunto, quud*  
 Idinkaa walaac ku abuuray  
 Idinkaa wanaagga ka leexshey *ka leexshey = ka duwey*  
 Idinkaa warmaa u afeeyey  
 Idinkaa ku waansha is-laaya *waansha = hanuuniya*  
 Walcan-go'a agoonta warraaqday  
 Weerkiyo baroorta haweenka  
 Idinkaa wadoo ka mas'uula  
 Waayeelka soodh-ku-wabsiinta  
 Waracyada la laayiyó maydka  
 Waraabuu cunuu ku wishiirrin *wishiirin = golomisi, goohi*  
 Weligiyo musheekhda la laayey *musheekh = culimo*  
 Idinkaa wadkooda u sababa *wadkooda = dhima-shadooda*  
 Weji dadab walaal kala jeestay *kala jeestay = is-nacay*  
 Midnimada qabiilku wareemay *wareemay = dhaawacay*  
 Qarannimada weydey wax-dhawra *dhawra = ilaasha*  
 Nimanyohow wanaag ku daweeya  
 Nimaanyohow wax-yeellada joogta  
 Lama waaraye wax-u-kaadsha *u kaadsha = hambeeya*  
 Wehel iyo wadaage ahaada  
 Wejigiyo qalbiga isku weecsha  
 Aniguna warkii an ku koobo *koobo = gabagabeeyo*  
 Walaalnimada yaan la illoobin  
 Waana waajib kaasi i saaran  
 Waaniyo wax-sheegna u qaata.



HEES  
*SOOMAALIYEEY DAA ...*

Soomaaliyeey daa,  
Guddiyahay ha dagannina  
Ha dagan, ha daganninaa  
Doorashada kursigu  
Waa derejo naar ahe  
Guddiyahay ha dagnnina  
Doorashada kursigu  
Waa qabiil dantiisee  
Doorashada kursigu  
Waa dira-diraalee  
Guddi yahay, ha dagannina

*kursigu = derejadu*

Hilbihii dadkiinnaa  
Meydkii dorraad go'ay  
Sawkan dibadda yaallee  
Ku daboolin ciidda,  
Durba inad illoowdaan  
Ma dabeeccaddiinnaa?  
Isha kii daba  
Xumaa uga dambeeyee  
Maxaa keenay dooddiyo  
Reer hebel halkuu degi?  
Way yaabtay duniduye  
Ma dilkaad ku naaxdaan?  
Ma dhiiggaa durduurataan?  
Ma dagaal sokeeyaa.  
Dabka aad ku hurisaan?

*daboolin = aasin, dedin*

*dooddiyo = murankiyo*

*hurisaan = shiddaan*

Dulligiyo xumaatada  
Aan daboolka saarnee  
Danta guud ka wada mara.  
Waxa aad ku dooddaan  
Dalka yaa u talin jirey  
Kee daacadoo aan doorannaa?  
Sidaasay dadweynaha  
Dantu ugu jirtaa ...

QAYBTA SADDEXAAD

SAMATALIS II

(HEES)  
DOOR-ROONEYAAL

Door-rooneyaal	<i>door-roone = hor-muud, foolaad, mudan</i>
Laba dar-u-heshiisoo	
Derisaynu nahaye	<i>deris = jaar</i>
Duul wada dhashoo	<i>duul = dad, qoon</i>
Dusha hooyo saartiyo	
Inaan nahay dad mida	
Daah nagama saarree.	<i>daah = dabool, caad</i>
Duul wada dhashoo	
Is-ku-diir aho	<i>isku-diir = is-ku-midab ah</i>
Dan-wadaag ah baan nahay	
Degmadeennu waa meel	<i>degmada = deegaanka</i>
Degel baynu wada naal.	<i>degel = rug, qormo, guu</i>
Waxaad diiddan tahay buu	
Jidhkayguna dareemaa.	
Miyey daacadnimadiyo	
Duugoobi dhalashadu	<i>duugoobi = gaboobi</i>
Waxaan uga dan-leeyahay	
Kuwa naga dambeeyiyo	
Soomaali dul ahaan	<i>dul ahaan = guud ahaan</i>
Salaan lagu dawoobiyo	<i>dawoobo = caafimaado, bogsado, reeyo'</i>
Dareensiiya xiisaha	<i>dareensii = gaadhsii, usheeg</i>
Dalkayaga ku aragtaan.	

TIX  
GUUBAABO

Guuleed wuxuu yidhi :	
"Guddiyahay warbixin guud	
Gellimmada shirkeenniyo	<i>gellimada = wakhtiyada</i>
Guubaabo lagu daray	<i>guubaabo = dhiirrigelin baraarujin</i>
Iyo hadal garawsi leh	
Guurtida Oroobbiyo	
Golihii Amriikiyo	
Gadh-wadeenka Aasiya	
Guud ahaan adduunyadu	
Gebigeed ka siman tahay	<i>gebigeed = dhammaanteed</i>
Wuxu yidhi" go'aankii	
Garta lagu dhammaystiray	
Waa maalin guushii	
Geeridu ag-taaloo	<i>ag-taal = u dhawdahay, waxba ka xigin</i>
Dalka loo gurmanayee	
Gacmaha isu-dhiiboo	
Soomaalaay is-garabsada	<i>is-garabsada = is-kaashada</i>
Dabadeed gargaariyo	
Guunyo aan dhammaannoo	<i>guunyo = mooro</i>
Gorofkiinna lagu shubo	
Gallad iyo wanaag suga.	
Wixii taa ka goonniya	<i>goonni = gaar ah, is ahaan</i>
La garwaaqsan maayee	<i>gar-waqsan maayo = yeeli maayo, aqbali maayo</i>
Ha ku geeddi-seegina	
Anoo gaabshey maansada	

Murtidana an gees marin  
Hadal wuxu ku go'an yahay  
Kuwa libinta gaadhee  
Nabaddii guddoomee  
Guulaystey maantoow  
Geeddiga horuu-wada  
Gun-dhiggii waddaniga

*libin = guul*

*gun-dhig = sees, asaas*

II  
Ragoow qalalaasihiyo  
Qabyada sebenkaa watoo

*qalalaase = tala-murug*

*qabyada = hawl aan  
dhammayn, dhiman*

Markaad qaladdada dhaciyo  
Qisooyinka eegto qaar  
Qarnigii yeygii ka dhaartay  
Qiyaas inan taagannahay  
Quraankeenna fasisiray.

*taagannahay = joognaa*

Qisada aan uga socdana  
Haddii an idiin qayaxo  
Soomaaloo qiimaheediyo  
Halkay qaayo taagan tahay  
Allaha Qaaddiri og-yahay  
Siday u qayirantay iyo

*uga socdana = uga jeedo  
qayaxo = caddeeyo*

*qaayo = haybad, sharaf*

*qayirantay = beddelan-tay,  
doorsoontay*

Qasaaraha maanta gaadhay  
Qareen mida inaynu nahay  
Qalbiga tebayee xusuusan  
Qiirada beer-laxawsigiyo  
Qandhada haba ii burshee

*qareen = qaraabo, ehel*

*qiirro = qoomammo,  
tiiraanyo  
qandhaha = xummadda,  
kaarka*

Quruumaha taabtayoo  
Qof nooliba kuma farxine  
Qalkii qiimaha lahaa  
Markii qiiq lagu shareeray  
Raggii aan u qaylinnoow  
"Qorshaha nabad-  
raadintiinna  
Guddida loo qaybiyee

*bursho (buriyo) = badsho  
shareeray = shaqlay*

*qaybiyey = qoondeeyey, loo  
xil  
saaray*

*qalad-tirno = saxno, hufno*

Qoreysey haddaan ahayn  
Murtida aan qalad-tirniyo  
Halkaan runta qaabbilsinnay  
Haddaad nala qaadateen  
Qadderin bay noo tahoo  
Walaaloo is-qaban jiriyo  
Qareen run ah inaynu nahay  
Idinkaa qun-u-muujiyee  
Qormada Soomaaliyeed  
Nabaddii ka qaxdee luntay  
Dadkoo kala qaybsan iyo  
Qas iyo xumo lagu beddelay  
Haddii Qaadirkeennu keenay  
La'aanteed lama qoslee  
Qaaliga nabaddii ahayd  
Idinkoo qawlkiinna iyo  
Qalbigu meel keliya yahay  
Qaadoo waatane guddooma.

*qaadateen = heshiiseen  
qadderin = xushmo, xurmo*

*qormada = dalka  
qaxday = tagtey*

Dadkii u qulbee u oomay  
Wax badan qiir-qiir ku jirey  
Iyadaa qiimahoodi iyo  
U soo celin quruxdiyoo

*u qulbay = u baahday*

Qasaaraha uga gurmane  
Qalbiga jecel ee u baahan  
Qaadoo waatane u geeya.

Midday qarannimadu eedday  
Midnimo ay qoonsatee

Dalkii qalabaa-geddiyey

Qabiillo is-weerariyo  
Qaxootiyo baahi iyo  
Qudh-gooyiyo dhiigga keentay

Qabiil weeyee ka taga  
Wanaagga mid qoonsadoo

Isagu qalba-qaatamiyo  
Kolleey qarad-laa jiree

Qabyaalad intoo dishaan  
Qabriga ku ridoo ka taga  
Naftiisa ha quusiye

### III

Quruxdaan arkaayiyo  
Sheekadan la qoofalay  
Qasdigiyo ujeeddada  
Marka aan qiyaastay  
Qalbiyaal walaala ah

Waa qawl ka soo baxay  
Waa hadal qummaatiya

Shirkii qaylo-dhaantee  
Qaban-qaabadiisii

Qorshihii ka soo baxay

*eedday = ku baaba'day*  
*qoonsatay = ka xumaatay,*  
*diiddey*  
*qalabaa-geddi = gembiday,*  
*rogtay*

*qarad-le = danayste,*  
*dhuuni-raac*

*qabriga = xabaasha*  
*quusiye = samriye*

*qoofalay = taxay, xardhay*

*qawl = hadal*  
*qummaati = toosan, gar ah*

*qaban-qaabo = diyaarin*

Qadobbada heshiiskii  
Lagu duugay qalimmada  
Nabad qiima-weynliyo  
Waa hadiyad qaaliya  
Qaadannoo guddoonsannay.

Mar ay qodax sarmaaneed  
Qoobkaaga hoos taal  
Maalin qaabka noloshiyo  
Qabyo xaalku kaa yahay  
Qarannimo habawdiyo  
Qalalaase dirireed  
Qiil lagu daweeyiyo

Mar ay talo qadhaadhahay

Qulub iyo caloolyoow  
Qalbigaagu rogan yahay  
Qareen iyo sokeeyaa  
Qaylada yimaaddoo  
Nin ragaa ku qaabbila

Dhibta kaala qayb-gala.  
Qummanoow walaaloow  
Sidaad noo qadderiseen  
Qiirada la yaabka leh  
Mahad weeye qurux badan  
Annaguna qubuul nidhi.

*duugay = saxeeaxay*

*hadiyad = deeq, kaalmo*

*qoobka = raafka*

*xaalku = arrintu*

*habawday = luntay*

*daweeyo = bogsiiyo, baanto*  
*Qiil = maaro*

*qadhaadhahay = ribbatay,*  
*adag-tahay*

*qulub = walba-haar, welwel*

*qaabbila = soo dhoweeya,*  
*ku marti-qaada*

*qurux-badan = bilicsan*  
*qubuul = oggol*

(HEES)  
*HAMBALYO*

Shirkii heeryada duleed  
Shaydaanku hal buu lahaa  
Hantaaqda hoggaan u qoday  
Habaarkii waalidkood  
Hiddaha liitee ka kacay  
Soomaali habeen u galay  
Hurdada kama toosayaan  
Habaar-qabe wuxu lahaa  
Hawraarta dhexdooda taal  
Hangoolka anoon u qaban  
Miyey is-la-heli karaan?  
Halyeeyada noo kacee

*hantaaq = dalluun*  
*habaar = inkaar*

*hawraar = hadalka*

*halyeeyada =*  
*geesiyaasha, hanaddada*

GUULEED u horseedka yahay  
Ujeeddada hadafka iyo

*hadafka = yoolka,*  
*himilada*

Habkoodu wuxuu ahaa  
Dhibaataada had iyò jeer  
Inaa laga wada hadlaa  
Walaalnimo heer saroo  
Midnimo ku habaysantiyo  
Inaa nabad lagu hirtaa

*hirta = beegsadaa*

Waxa hoogle  
Cadawiyo wixii la hal-  
maalaa, hoogle  
Waxa hiil-leh  
Walaalaha heshiiyaa, hiil-leh

Geesiga halgamayoow  
Faariikhda hodankaad  
Kaga taal halbawloo  
La hilmaami maayee  
Hawshii ad wadatana  
Ku hungoobi mayside

*hilmaami = seegi*

*hungoobi = khasaari,*  
*waayi*

Waxan kula hor-joognaa,  
Guul habboon  
Hambalyiyo salaan wacan.

TIX  
CALOOLYOW

Aw-good ma daarine  
Wuxu sii ad-adagaa  
Ma aarbaa badhkood dhalay?  
Sawnigii indhaa xidhay?  
Een idhi ha eegina  
Meel ubax ka muuqdiyo  
Dhulka aad u qurux-badan?  
Ururrada heshiiskiyo  
Nabad loo arrimiyo  
Is-afgaradka yaa wada  
Ka uraaya meelahan?  
Waa sidee ujeeddadu?  
Afrikaay gammoor iyo  
Geed lagu halaagmiyo  
Gocondhiyo sunbaad tahay.  
Caqligaagu waa gidir  
Sallax-gaw ah weeyaan  
Biyo kaama gororaan  
Golihinna sare iyo  
Ilaa kiinna guunka ah  
Is-ma garasho dhaantaan  
Waxan uga gol-leeyahay  
Geed baa hadloo yidhi  
"Gudimooy adoo qudhi  
Ima goyn karteene  
Gobolkay baa kugu jira."

*badhkood = qaarkood*

*arrimiyo = taliyo  
is-af-garad = heshiis*

*gidir = gabno, gudhan*

*gororaan = dhiiqaan*

*guunka ah = gaboobay  
dhaantaan = ma kala  
wanaagsanidin*

Mahmaahdaa gundheertaad  
Afrikaay ku gadantoo  
Ninba goob u joogaba  
Awr goola weeyaan  
Waa lagu gabraartaa  
Is-ma gacashataanoo  
Gobannimiyo sharafiyo  
Calanka uma guuxdaan  
Cadawgiin wixii gubey  
Kama gacan sarreeyaan  
Kolba kii wax-garadiyo  
Geesigeeda qalatooy!  
Gosha tii ku haysee  
Naaska u goglaysiyo

*gadantay = la mid ah*

*gabraartaa = ugaadhsadaa  
gacashataan = garabsataan*

*guuxdaan = riyaaqdaan*

*qalato = shidhaysato*

*goglaysey = u dhigaysey,  
jaqsiinaysey*

Gabdhaheeda dooxaay.  
Gooruu habeen galay  
Gudcurkuna madow yahay  
Gurigiinna laga ooy.  
Goormaad ogaataan  
Gantaalaa idinku maqan  
Cadawgaagu kugu ganay?

*Kugu ganay = kugu taagay,  
kugu riday*

Waxay gurato mooyee  
Cidna uma gargaartooy  
Waxay gabasho mooyee  
Cidna uma garawdooy.

*gabasho = qariso, gaddo*

Hadba dawlad garaw iyo  
Galley iyo hadhuudh badan  
li gooda haysooy.

Yaa gogogo' lacageed  
Gosha iigu shuba oo  
Maanta ii gurmada oo  
Anna gacashadaayoon  
Gogosha u dhigaayoon  
Gabdahayga siiyaa  
Ku gunaanad seegaay!

*iigu shuba = i siiya*  
*ii gurmada = ii kaca*

Ga'da kalena waxay tahay  
Dhulka gooro laga tegey  
Dayaxana la guud baxay  
Afrikaay gadh-weyneey  
Adduunbaa galool iyo  
Gole sare u waashee  
Gunta hoose madhaneey  
Gayigaagi hooyoo  
Nimco lagu galladayoo  
Macdan galalacayn iyo  
Webiyadu geddoomaan  
Wax ka goosan mayside  
Idinkaa galaas madhan  
La gaalaa-baxaayoo  
U go'doomay dhawrtee  
Goob lagu barbaariyo  
Guri nabada diiddooy  
Gabbalkaagi wuu dhacay  
Sida adhiga gorodda leh  
Is-ka gura madooboow ...  
Taa halkaa ku gooyee

*gooro = beryo aan dhaweyn*

*galladay = mannaystay*

*gooso = qabso*

*galaas = koob*

*dhawrto = dewero,  
qarafaysi*

*gabbalkaagi' =  
cadceeddaadi*

Ga'da kalena waxay tahay  
Godka ay ku hoyatiyo  
Gurigeeda dumisooy  
Gaadoow shabeel iyo  
Gucummaale aariyo  
Gool iyo dhasheedaay  
Hadba kaw garnaqayee  
Geedka uga baanee  
Godobteeda diidiyo  
Gacalkeeda heeraay  
Gabdhaheeda ugubiyo  
Gaarida haweenkee  
Gurigeeda joogtiyo  
Gadh-castiyo duqaydii  
Garashada lahayd iyo  
Aaway gabannadaadii?  
Waxba yaan ku goohine  
Gaaraa bidhaan iyo  
Goob lagu habsaamaay...

*gucummaale = shaashle*

*Gool = libaax dhiddig*

*godobteeda = xumaanteeda*

*heera = dhaawaca, dila*

*ugub = gabadha aan curan  
ama dhalin*

Gumuciyo rasaatiyo  
Middiyaha ku gawraca  
Gacantaad ku sidataa  
Ruuxii gar-waaqsada  
God-madaw ku dubatooy  
Waad wada gumawdee,  
Adduunyada is-kaga guur  
Geeridu xaq-weeyee  
Godka aakhiraw hoyo  
Gegidii xisaabtiyo

*gegidii = bannaankii*



Geliddii qiyaamaha  
Goor ay ahaataba  
Nin waliba wuxuu galay  
Ilaahbaa ka goyniye  
Adigoon garraba jirin  
Ku sug guul-darriyo ciil.

Taa halkaa ku gooyaye  
Ga'da kalena waxay tahay  
Gar-yaqaanno taliyiyo  
Guurtida aqoontee  
Gurmaddada culculusee  
Ninba gees ka yimiddee  
Gacal iyo xigaaliyo  
Garashada luntée maqan  
Walaalaha is-gawracay  
Soomaali kala-go'a  
Intaanay guntu u ruqin  
Ha la gaadho yidhiyoow  
Go'aannada heshiiskiyo  
Shirkii golaha loo yimid  
Nin waliba garaadkii  
Waydinkii ka geystaye  
Anigana war iga gura :  
Gebigeed Afriikaa  
Gudinta isu sidatoo  
Isku wada gumaaddoo  
Waagii gariirraadan  
Gaadhsiiyey cudurkoo  
Ku gardaadshey xumahee

*ka goyni = ganaaxi  
garraba = dhannaba*

*ruqin = fuqin, bixin*

*geystey = falay  
gura = dhegeysta*

*gumaadda = xasuugda*

*gardaadshey = barbaariyey*

Nabaddaad u guuxdeen  
Haddii loo gudboonyoo  
Loo geyn Afriikada  
Iyana ay garwaaqsani  
Anna hay gagabisee  
Guul iyo badh weeyaan.  
Hadday se reer u gaartooy  
Inta kale is-gubayaan  
Anigaa geddiyayoo  
Ninna kuma gam'aayee  
Nabaddaad guntaysaan  
Gabadh uguba weeyoo  
Gedefaysey timahoo  
Naasuhu gimeenoo  
Ninka geyaba waa ani  
Iyadoon gabbaatiyo  
Cidna guunyo uga sidin  
Guga soo socdee dhow  
Anigaaba guursane  
Gogol-xaadhka nabaddiyo  
Guuxiinnu waa been  
Aan is-garanno goor kale

*guuxdeen = riyaaqdeen  
gudboon = siman*

*gagabiso = dawikhiso*

*geddiyaga = gembiyaya*

*gam'aayo = ledaayo*

*guntaysaan = dhisaysaan*

*gedefaysey = feedhatay*

*geya = guurku u bannaan  
yahay*

*gabbaati = xoolaha  
gabadha*

HEES  
*GEEDDIGA HORU UWADA*

Guga-kani shirkii dhacay  
 Geesiyada heshiiyee  
 Gacal iyo walaal iyo  
 Isku raacay gaashaan  
 Gebigeed adduunyada  
 Ha u gacan sarreeyaan  
 Indheer-garadka xaajada  
 Gunta hoose taabtee  
 Hawlaha u gogol-dhigay  
 Ha noolaado GUULEED.  
 Gacalkii colloobee

*colloobay = kala  
 irdhookey*

Gantaaluu ka hurayeen  
 Gadh-wadeennadoodiyo

*gadhwaadeen =  
 hoggaamiye*

Guddigii midnimadaa  
 Gocondhadii dhextaalliyo

*gocondho = qodax  
 yaryar oo badan*

Godobtii daweyoon  
 Galbataye, yaanay gaaggixin.  
 Ka ilaasha gamashiga  
 Geeddiga horuu-wada.

*gamashiga = gudhista*

Geesiyada heshiiyoow  
 Garab qudha ahaada  
 Soomaali gobannimo  
 Gu'gu hawgu hooree  
 Nacabkii gumaadiyo  
 Ka ilaasha gaadaha

*hooree = da'ee  
 nacab = cadaw  
 gaadaha = tuugga*

(GABAY)  
*BOGAADIN*

Garabkaygan midigta iyo bidix  
 Gacal wadaagaynno  
 Idinkiyo guddida iyo khalqiga  
 Goobtan wada jooga  
 Waxaad iga guddoontaan salaan  
 Gebi ahaantiinna  
 Afartaa salaan gaaban iyo  
 Garashadaydii dheh  
 Maansadan go'aankeeda iyo  
 Gob iyo xaalkeed dheh  
 Waxaan uga gol-leeyahayna waan  
 Idin garwaaqsiinne  
 Gu'yaalkani wixii dhacay haddaan  
 Gobol ka soo qaato  
 Soomaali kala goosantoo  
 Waayo kala guurtay  
 Golxad iyo billaawiyo waxay  
 Gudin afaysaaba  
 Gawraca dhexdeediyo waxay  
 Gudurta beertaaba  
 Waxa geesiyaashii la diley  
 Galawgu feentaaba  
 Gaarida haweenkiyo waxay  
 Gabadhi ooydaaba  
 Gayiguba markuu baaba'ee  
 Garabku naafoobey

*xaalkeed = caadadeed*

*gobol = qayb, in-yar*

*goosantay = kala  
 luntay*

*gudur = naxli*

*feentaa = gigaa,  
 cunaa*

Gurmadka iyo qaylada wafdiga      *wafdiga = ergada*  
 Loogu gacan-haadshey  
 Isagoo garwaaqsaday shirkaa  
 Loogu gogol xaadhey  
 Geeridii hadday tabatay iyo  
 Maydka gudaheeda  
 Gocashada xanuunkiyo hadday      *gudimadii = hubkii*  
 Gudimadii tuurtay  
 Soomaali gucun iyo hadday  
 Garatay xeerkeeda  
 Gardarradii hadday maydhay iyo      *maydhay = gilgilatay*  
 Godobti hoos taalley  
 Oo ay isu-guuxeen sidii      *Gol iyo neefkeeda =*  
 Gol iyo neefkeeda      *neef, xoola ah iyo*  
    *ilmahii*  
 Gacal iyo walaalnimo haddii  
 Laysu gacan qaaday  
 Galladdaa Ilaah baa lehoo  
 Mahadi gaadhaaye  
 Gudatay waajibkiinniyo wixii  
 Kula gudboonaaye  
 Idinkay gartiin tahay inaad  
 Talo guddoontaane  
 Waa inaad gaggaabtaan xornimo      *gaggaabta = yagleesha*  
 Gadantayee liicday      *liicday = wiiqantay*  
 Soo gardaadsha calankii gu'yaal  
 Badan agoomoobey  
 Geeddiga horuuwada runtay  
 Gobi jalleecdaaye  
 Guddigii heshiiskani galee      *goobta = madasha,*  
 Goobta kula joogey      *meesha*

Iyo wuxu guddoonsuhu yidhuu  
 Idinku guubaabshey  
 Godlataye waraabaha ka dhaba      *godlatay = darartay,*  
 Yuu gabbaanadine      *maggawday, maalis u*  
    *diyaar ah*  
 Taariikh wixii gaaggaxiyo  
 Gooba noloshiinna  
 Hurdadaa habeen lagu gam'aa  
 Gees ka wada jeesta  
 Gamcaha is-qabsada ragannimay      *hadhisaa = magan u*  
 Guushu hadhisaaye.      *tahay, jamataa*

HEES  
SOKEEYAHAYOW

Sokeeyahayoow

Sad walaalku leeyahay

*Sad = saami, qurus*

Kii ugu sarreeyee

Laysa siin lahaabaan

Sahay kaaga dhigayaa

*sahay = jid-mar*

Suuradaha quraankiyo

Salaamiyo sidii roon

Ayaan kugu sagootiyey

*sagootiyey =  
dardaarmay kambalka  
sabada = firkada,  
duleedka guriga,  
kambalka*

Sabadiinna roob iyo

Saxan-saxo udgoon iyo

Sinnaan iyo walaalnimo

Sal-dhiggiinna weeyaan

Magaca Soomaaliyeed

Intoo aad sare u qaaddaan

Sidaadii hore ku noqo

Sideeda u dhawra oo

Samaantu inay negaato

*dhawra = ilaaliya  
negaato = xasisho sal  
dhigto*

Salaamee waa dardaaran.

TIX  
GOBANIMO

Su'aal gaaban iga hoo

Gobannimadu waa maxay?

Gobannimadu waa guul

Sida aad u garateen.

Gobannimadu waa guul

Geed midho leh weeyaan

Waa meel gashiiniyo

*gashiin = tayo, taransi*

Nimco lagu galladayoo

Gaajadu ka dheer-tahay

Marna gu'iyo Jiilaal

Waa ceel an gudhiniyo

Webiyaal gurxamayoo

Haro wada gingiman iyo

*haro = waro, balliyo  
gingiman = buuxa,  
haahanaya*

Gal xareeda weeyaan

Marna guri dugsoonoo

Guduhuna xariir yahay

Gabaddanada Jiilaal

*gabaddanada = dhaxanta,  
qabawga*

Go'a laga huwanayiyo

Gal xareeda weeyaan.

Marna waa gammaan faras

Adhi iyo lo'iyo geel

Meel guunyadaadii

Inba gees u daaqdoo

Waa godin barwaaqo ah.

*godin = gotin, dooxo*

Marna gooda kala tegey  
Gacalkiyo xigaalada  
Isu-geeya weeyaan  
Marna goobta dirireed  
Gardarrada shisheeyaha  
Gaashaankii libintiyo  
Gumuc lagaga aarsado  
Gudin loo afeeyoo  
Wax gumaadda weeyaan.  
Marna magaca guud eed  
Dadka kula gudboon tahay  
  
Waa sharafti gaaroo  
Gayigaagu leeyahay  
Gobannimadu waa taas.

*dirireed = dagaaleed*  
*shisheeyaha = nacabka*

*aarsado = cad-goosto*  
*loo afeeyo = loo listo*

*gudboon tahay = kuu eg*  
*tahay*

## II

Soomaaloo milgaheediyo  
Maamuusteedi luntoo  
Magicii ay lahayd iyo  
Muruqeedi adkaaday  
  
Is-maandhaafka qabiilku  
  
Masaxuu lumiyoo  
Calankeedi mudnaayee  
Muuqday ee la yaqaannay  
Magallooti ka yeelay  
Masiibadii kala geysey  
Kol haddii laga maydhoo  
Midnimo loogu yaboohay

*milgaha = sharafta*

*adkaaday = xoogaystey,*  
*riiray, gaammurey*  
*is-maan-dhaaf = is-af*  
*garan-waa*

*magallooti = naf la'aan*

*yaboohay = deeqay, lagu*  
*kaalmeeyey*

Waa Ilaah mahaddii,  
Majaraheeda hoggaanka  
Ninka loo magacaabee  
Mas'uulka looga dhigoow :  
Ummad maamul qalloocan  
Muddo dheer ku jirto  
Macaluul iyo gaajiyo  
Miidhana uga dambaysoo

*qalloocan = gurracan*  
*muddo = waqti*  
*macaluul = gaajo raagtey*  
*miidho = quudsi,*  
*dala'si, xoogid*  
*waaqle = madfaca jibka*  
*saaran*  
*asqeeyey = dhawaweley,*  
*waaley*

Madaafiic iyo waaqliyo  
Moortiyeeegu asqeeyoo

Maskaxdoodu duntay  
Sida loogu maleeyee

*maleeyo = taliyo,*  
*hoogaamiyo*

Madax loogu noqdaa  
Mashaakil weeye runtiiye  
Mawjadii u xumaabaad  
Muquuratood ku jirtaaye  
La malayso dadkaaga  
Macbuudkii na abuuray  
Murtidiisa quraankaan  
Miciin kaaga dhignee

*murtiyee (latin) = madfac*

*muquuratey = quustay*

*miciin = tsageero,*  
*gargaarsi*

Midigtaada ku qaado  
Diinteennaan musuq-maasuq  
Madmadoow la dhalliiliyo  
Midhif aanan lahayne  
Mabda'aaga dul-saaroo  
Ummaddaa murugsan  
Si wanaagsan u moolis.

*midhif = qalad, saxar*

*murugsan = qasan*

III

Haddii uu malahaagiyo  
Mabda'aagu xumaadoo  
Maskaxdaadu habawdo  
Nin ragaad mudataayoo,

*mudataa = u irkataa, u  
aydaa, kuu baxaa  
marinka = jidka, hilinka*

Marinka kuu bixiya  
Haddii u midigtaada  
Muruqeedu xumaadoo

*muruguedu = lixaadkeedu,  
itaalkeedu  
maaro = xal, taag*

Waxaad maaro u weydo  
Bidixdaad mudataayood  
Ku miciinsan kartaa

Middaan taa uga jeediyo  
Murtideeda an sheego

Markii ay magacaygiyo

Milgihii waddankaygiyo

Midnimadiisu dumeen

*dumeen = burbureen*

Walaalkaygan macaan iyo

Mataankaygi labaadee

*mataano = mar calool ka  
soo wala baxay  
marooro-dillaac = hammad  
jab, niyad-jab*

Ka marooro-dillaacee

Madal-weynta aqoontee

Arrintii murugsan iyo

Mashkalad oo dhan dawaysa

Qayladii maqashiiyee

masuuliin kala qaybsanoo

Shan\* meelood ka socdiyo

Martiqaaday Adduunkee

Murugadayda darteed

Madashiisii gogloow.

*murugadayda = dhibaataada  
madashiisi = gurigiisi,  
golihiisi*

Miciinkii i gargaaree  
Madalweynta Jabbuuti  
Malahayga shirkan  
Lagu maamulay maanta  
Madaxiisa ka keenayoow  
Madaxweyne qudhaadiyo  
Mas'uuliinta kaleetaba  
Abaalkii u mudnaa iyo  
Mahadhooyin hadhayn iyo  
Buugga meera adduunkee  
Ma dhaafaanka xusuusta  
Sharaf aadmi mutaystaa  
Magaciinnu ku yaalloo  
Waa sidaa mabda'aygu

*madaxiisa = garaadkiisa*

*qudhdhaada = laftaada*

Madaxweynuu kelidii  
Maamka weyne adduunkuu  
Ka muuqdaa kelidii  
Mawlahaan baryayaaye  
Madaxiinnuu ha raago  
Magaciinnu ha waaro.

*maamka = dhul-bare*

*raago = waaro*

HEES

YIDIDILLO NABADEED

Waxaan urinayaa nabad  
Ardaayadii gubtiyo

*Ardaayo = goleyaal,  
garab-dhig, faafyo*

Aqalladii dumoo

Dib loo agloolay baan arkayaa *Aglool = dayac-tir, kab-*  
*kabid, dib u dhis*  
 Dhulkii ololayoo *ololayey = gubtey*  
 Ubax ka soo baxaan eegayaa  
 Waxaan urinayaa nabad  
 Dadkii kala ambadayee  
 Isu oommanaayoo *isu oommanaa =isu*  
*boholyoobay*  
 Isku soo ordaan arkayaa  
 Ayaankii lumiyo *ayaankii = xiddiggii,*  
*nasiibkii*  
 Aayihii dhulkeenoo  
 Indheer-garadku soo sidaan  
 Eegayaa  
 Inaa eed la dhaafoo *dhaafo = waantoobo*  
 In xun laga gudboo  
 Lays aaminaa buu  
 Uurku doonayaa  
 Uur-ku-taallo iyo  
 Eeddii la soo maray  
 Dadkii ka ooyayoo  
 Anfariirsan baan *anfariir = amakaag,*  
*yaab, argaggax*  
 Aammusiinayaa  
 Nuurkiyo astaantii *astaan = calaamad,*  
*summad*  
 Ummaddu ay lahaydoo  
 Alle keenay baan  
 Wax kaloo ajala *ajala = dhaawaca,*  
*waxyeello ah, ku'gu dhaca*  
 Ka adkaynayaa  
 AAMMIIN DUCADA

## QAYBTA AFRAAD

## SAMATALIS III

Hees

## *KU SALAANNAY CALANYOW*

Allaah, Allaah, Allaahu Akbar  
Allaah, Allaah, Allaahu Akbar  
Allaah, Allaah, Allaahu Akbar

Soddonkii quraankiiyo  
Salligiyo tasbiixdaan  
Kugu saarnay calanyohow

Madaxdaada sare  
Culimada sujuuddiyo  
Sebigiyo haweenkiyo  
Xoogga qalabka noo sidaa  
Kuu sara-kacoo  
Ku salaamay calanyohow

Wuu guurey saxalkiye

Samo noogu waar  
Aan sidigta maallee  
Samo noogu waar

Xiddigtaa sare u jeeddee  
Dhiig lagu sameeyee  
Shanta lagu sawiray iyo  
Midabkaagu waa saddex  
Sabadoo barwaaqo ah  
KOOW DHEH

Biyo saxar ku dhicin  
LABA DHEH  
Samada oon caad lahayn

*sebiga = dhallaanka*

*saxalki = xumihi,  
cirirki*

*dhiig = midabka cas ee*

*saxar = xashiish, wasakh*

*samada = cirka  
caad = daruur khafiifa*



Kii lagu sameeyoow

Saableyda feedhaha iyo

Siddig dheh

Siddig dheh calanyohow

Lugahaan ku soconniyo

Siddig dheh calanyohow

Sabarkaad ku taaloo

*sabarka = dhexda*

Gacmahaan kugu sidaynaa

Siddig dheh

Siddig dheh calanyohow

Sannad-guuradaadii

Toban iyo shan-weeyaan

Saacad weeye toosane

*toosan = qumman, habboon*

Bishu juun sareedoo

*sareedo = barwaaqo*

Waa toddobiyo labataan soohan

*soohan = isku buuxa*

Dadkaagii ku sugayaa

Saaddiyo ishaartii

*saaddii = saadaashii*

U suurtaawdayoo

Hurdo seexan waayoo

Sacab kuu tumaayee

Samo noogu waar.

TIX

## BAL DHARAARA KU HEESA

I

Hadday gobannimo helaan?

Ha soo qaadaane yaw hayn?

Hays raacaane, yaw heshiin?

II

Maahmaah sii qoto dheeriyo

*qoto-dheer = gun-dheer*

Qisadaan ka hadlaayo

*qisada = sheekada*

Qasdigeeda dhegeysta

*qasdi = ujeedo*

Daacad lays qaddershiyo

*qaddersho = xurmeeyo*

Midnimaan u qalmaa

*qalmaa = mudanahay*

Qawl midaan ku farxaa

*qawl = hadal, mabda'*

Qorshihii nabadeediyo

Sharafbaan ku qancaa

*ku qancaa = i deeqda*

Waa sidaa quruxdaydu

*quruxdaydu =*

*bilicdaydu*

Qoysku waa igu ceeb

*ceeb = qiime-dhaac,*

*sharaf-jab*

Qolona waa ka dhintaayoo

qolo-qabiilo

Ima qaadi karaysoo

*qaadi karayso = ka*

*sarreeyaa, ka cusli*

Qodobkayga labaad

Qalinka laygu saxeexiyo

Waa sinnaan quruxdaydu

Qareenkaygu run weeye

*qareenkaygu =*

*ehelkaygu*

Qabiilna waa cadawgayga

## III

Marka wiilku dhashee  
Dhabarkiisu adkaannin

*adkaan = gahayrin,  
itaalsan*

Dhaylo weeye illaynoo  
Haddaan dhawr sannadood  
Hooyadii dhab ku haynoo  
Naaska ay u dhigaynnin  
Ma dhaqaaqi kareene  
Wax kastoo la dhisaayaba  
Sidaasay u dhigmaanoo

*dhaylo = mujo, curdin*

*dhabta = laabta, gosha  
dhigayn = jaqsiinayn*

*u dhigmaan = la mid  
yihiin*

Taladii dhici weyda  
Haddii aad u dhaqaaqdoo  
Nafta dhaaxa hallaysood  
Dhaawac baa kugu gaadhiye  
Dhaxalka waa la helaaye  
Haddii aad dhan tihiinoo  
Calankaa ku dhegteeniyo  
Dhulkiinnii hantideen  
Dhuumaalaysi ma fiicnee  
Dhibi waa ta dambaysee  
Calankaa dheeha madaw leh  
Haddii aan dhisme xoogliyo  
Lagu tiirin dhaqaale

*dhaaxa = in badan*

*dhaxalka = aayaha*

*dhegteen = cuskateen  
hantideen = hesheen*

*dheeha = midabka*

*lagu tiirin = kaabin,  
adkayn*

*dheelliyo = dhaco  
dhicisoobi = fashili*

*bidjeega (latin) =  
miisaaniyad-*

Inuu dheelliyo weeyoo  
Xorriyaddaa dhicisoobiye  
Dhuunigii la cunaayiyo  
Dhaqaalihiyo bidjeegana  
Anaa dhiibi xaggaygee

Cid kale yaan la dhaweysan  
Dhumucdaydiyo xooggiyo  
Ciidankaygan la dhaarshey baa  
Idiin ilaalin dhulkiinnoo  
Dhufayskawgu jiraayoo  
Ma qusayso dhankiinnee

*ma qusayso = xil kama  
saarna*

Dherga oo iska seexdaan  
Taladii ku dhammeeyee  
Hadday taasi dhacaynnin  
Ood i dhaafsan tihiin  
Afrikaan dhaka buuriyo  
Ilma Reer-Dhanna seegoow  
Hashan dheegga xardhanee  
Dhashayee is-lisaysuu  
Ninna dhiil u hogaystuu  
Qabiil laysugu dhaartiyo  
Ma dhex joogto xumaane  
Dhanka aad u riddaan baan  
Sugayaa waqti dhoowe  
Bal dharaaro ku heesa

## CAAWA WAA HABEENKII

Caawa waa habeenkii

Cadawgeen jabee-

Gobannimo cuddoon

Aan curinnayee

Dadkii ciilka qabey

Caasha uu la soo kacay.

Caawa waa habeenkii

Geesigaan cabsoon

Aan caleemo-saarree

Caawa waa habeenkii

Waa ciidayada

Caawa waa habeen

Dadka cuunkan iyo

Carradani degaa

Dawo caafimaad

Ay ku ciidayaan.

Caawa waa habeen

Cadceeddiyo dayaxa

Iyo ciriradii

Soo caan baxeen

Caawa waa habeen

Uu calankayagu

Caadkiyo daruuraha

La cawaynayaa.

Caawa waa habeen

Waa ciidayada

*cuddoon = luxdan, xooggan**curinnay = dhalinnay**caasha = hanqalka, madaxa**caleemo-saar = cugasho,  
doorasho**cuunkan = gallinkan**ciidayaan = dabbaal-  
degayaan*

## BEEN DARIIQ HA U FURIN

Ha beddelannin sheekada

Been dariiqa haw furin

Badbaad gudhini hays-odhan

Nafataadana ha biimayn....

Bulsho waxay ku negi-dahay

Beeshuna ku dhaqantaa

Badhaadhaha midnimadee

Nin ibliis u baabtaan

Bohoshu is-ka eegiyo

Soo baydha lagu karin.

An kuu biirsho waanee

Bunduqa samo laguma helo

Sidii loo baaba'ayna

Bari iyo galbeed iyo

Adduunyada badhkood eeg.

Ninka belo horseedaa

Nabad lagu bariistayo

Bar inaanu maalayn

Beelaha agteennee

Baahaysanaayiyo

Afrikada badhkeed eeg ...

Baaddil sacabka haw tumin

Gar-darrana ha baayicin

*dariiq- = jid, waddo**gudhin = dhamayn**biimayn = khatar gelin**negi = deggan,  
xasillan**badhaadhe = barwaaqo**baabtay = fashay,  
duufsatay**bohoshu = godka**biirsho = kordhiyo**bunduq = dunbuq,  
goriga (hub)**badhkood = qaarkood**horseeda = hor-kaca**bariisto = beryo, waa  
bariisto**bar = xoolo, maal**baahayso = dewerso,  
qarafayso*

Boogaha qabiilnimo

*boogaha = iimaha,  
nabarrada*

Haddii beerku kala go'o

Lama baanan karayee

*baanan = dawayn,  
bogsiin*

Midnimood u baydhaa

Buruudkaa ku sugan yahay ...

*buruudka = karaamada  
sugan yahay =  
xidhanyay*

TIX

## XUMA DUUG

Dadka Reer Jabbuutoow

Isku duubni iyo

*is-ku-duubni = wada-  
jir*

Daacadnimo wax loo waa

Kala doca-docayn iyo

*doca-docayn = kala-  
qaybin*

Qabiil baa inoo daran

Dirir iyo colaad iyo

*daran = xun*

Duullaan ha laga baxo

*duullaan = weerar*

Wanaag lagu dedaaliyo

Nabad baa dalkaw wacan

Deggenaansho

Waxba laguma doorsado

*doorsado = beddesho,  
siisto,  
dhaafsado*

Deggenaansho

Wax ka doora lama helo

*doora = roon, wacan*

Dawladnimada hodanka ah

Ciiddeenna dahabka ah

Wixii dibad ka soo gala

In la daafacaa qoran...

*hodan = qani, xoola le*

Dantay naga dhaxaysana

Inaa laysla dayo oo

Dariiq loo baxshaa furan

Wixii dibadda yaallana

*dayo = garto, eego*

Dabayluu ha qaadeen

Wixii dixaha yaallana

*dixaha = dooxyada*

Ha xambaaro daadkuye

In xumaa la duugoo

La daboolo weeyaan.

Duul walaalo ahoo

Iska diir-naxaayana

Ninka kala dillaalee

Dab ka shidaya beeshuna

Waa dira-diraalee

Danaystuhu ha naga baxo

*xambaaro = qaado, la  
tago*

*duugo = aaso, la  
tirtiro*

*Diir = midab, dub  
kala dillaala = kala  
xada*

*dira-diraalee = fidna-  
wale, isku dire*

TIX

## DARDAARAN

I

Ciidankayga la dhaarshee

Waddankay u dhasheen

Ka daboolay dhurwaagee

Qaylo dhaanta baxaysa

Dhegtaw raaricinaayee

Sida dhiiddada roobka

Dhibicda iyo dabaysha

Ka dhignaa

gurmalkooduoyow.

Salaan dhuuxiyo laabta

Wadnaa dhiigga maraaya

Ka soo dheegay mudkiisa

Dhammaantiin iga hooya

*daboolay = adkeeyey*

*dhiiddada = dhibicda*

*dheegay = jeemay  
mudkiisa = jiidhkiisa*

II

Ciidankii guntanaayoow

Gaashaan-dhiggii cadawgoow

Gurmaadkii arligoow

Gargaarkii ummaddoow

Abaalkaad gudateen

Dhulka aad u gasheen

Mid go'doomaya maahee

Taariikhduu gelayaa

Gurmalkaad ku jirtaan

Guunyo reer laga qaadiyo

Wax qabiilo u gaariyo

*go'doomaya =  
baaqsanaya*

*qaado = dhaco  
u gaara = goonniya*

Ma ahayn gundhiggiisuye  
Waa inaad garataan.  
Haddaad weerar gashaanna  
Weligiin gef xumaantiyo

*gef = qalad, deel-  
qaaf, godob*

Eed ayaanan la geysan-  
Yaan la laynnin gurboodka  
Waayeelkeenna gaboobayna  
Ka ilaasha guhaadda

*gurbood = carruurta*

*guhaadda =  
hanjabaadda, gaw  
dhiska*

Giddigoodba haweenka  
Ganbo tay ku xidhnayd iyo  
Gabdhaa yaan laga oohin  
Guryaha yaanan la baadhan  
Nabaddaa geyigeenna  
Kii ku soo gar-darrooda  
Inaad gaadh ka tihiin  
Waa inaad garataane  
Dubaaqiinna gesha.

*dubaaqiinna =  
niyaddiinna*

### III

Gurmade soo gaadhayaal  
Guddoonsada waxa tihiin  
Gayigan cududdiisa iyo

*cududdiisa =  
muruqiisa, awooddiisa*

Gaashaanka runtaa tihiin.  
Ilaalada gobannimada  
Kuwaa guntigaw xidhiyo  
Garabka midig baad tihiin  
Geeshkii xaqa eegayee

Dhammaan lagu wada gam'iyoo  
Gaadhkii calankaad tihiin  
Afriikada waxa gubee  
Sidaa u go'doomiyiyo  
Qabiilna ma geli kartaan  
Wixii gardarroonayee  
Nabadda u gefaaya baad  
Xilkiinna ka gudan kartaan  
Sidaa ku guddooma talo.

*gam'o = ledoo*

*xilkiinna = waajibkiin*

(Hees)  
*DABLE DHAARSAN*

Dable dhaarsan baan ahay

Xooggii dalkaan ahay

Derbi aan la marin iyo

Waxaan ahay duubi adag

*derbi = gidaar  
duubi = xoog, muruq,  
cudud*

Waxaan ahay waran wax dila.

Dabkoo ololayaan

Dalaq idhaahdaa.

*dalaq = daf, ku  
dhacaa*

Daljirkaan baqaynninee

Dib u laaban baan ahay

*laaban = waaban,  
joogsan  
dalawda = galawda,  
baqdin*

Wadnahaygu dalawdiyo

Ma yaqaanno digigixa

Ninka neceb danaystahee

*digigixa = naxdinta  
neceb = diiddan, la  
cola*

Wanaag doonayaan ahay

Dan wadaag nin jeceloo

Qabiil diiddan baan ahay...

Geesigaan la daginee

Ka-digtoon tukaha ee

Dardartii shabeelkiyo

*dagin = sirin, gaadin*

*dardarta = jaan-  
fudaydka,  
firfircoonida  
daymada = jaaha,  
eegmada*

Daymada libaaxa-lee

Lagu diirsadaan ahay...

Gobannimada dayrkiyo

*diirsado = ididiisho*

Daryeelkeedi baan ahay

*daryeel = xannaano,  
dayactir*

Dawliskii midnimadiyo

Dawankeedi baan ahay

*dawan = koor bir ah  
dugsi = gabbood,  
dadab*

Dugsi nabadduu huruddoo

Dejinaaya baan ahay.

Hadday taladu durugtana

Cirka danab ka soo dhiciyo

Duufaan qarxaan ahay

*duufaan = dabayl  
xooggan*

Weli duula baan ahay

*duula = lala, haada*

Ninka ugu dul-qaad badan

Dunidoo dhan baan ahay

Ninka ugu dedaal badan

Dunidoo dhan baan ahay

Ninka ugu dareen badan

Dunidoo dhan baan ahay

Daafaca dhulkaan ahay

*daafaca = badbaadiya*

Diintaan ku dhaartee

Qalbi daacadaan ahay.

JOOJIS

GABAY

*WALAAL INUU MACAAN YAHAY*

Walaal inu macaan yahay ninkii	<i>madi = ninka rag</i>
Madi ahaa baa og	<i>kale ay la dhalan</i>
Inay gaajo malag tahay ninkii	<i>malag = dilaa</i>
Mooro daran baa og	<i>mooro daran = caydh</i>
Middaan uga gol-leeyahay haddaan	
Idin mushaaxsiiyo	
Nin mucaaridiyo xaafidkoow	<i>xaafid = mu'ayid,</i>
Waa mid kula taalle	<i>muxaafid</i>
Maqaniyo ka joogoow anaa	<i>mahiibsiin = idin</i>
Idin mahiibsiinne	<i>guddoonsiin</i>
Nin xumaan maddaystaa xornimo	<i>maddaystaa =</i>
Maalin kari waaye	<i>maaxsadaa</i>
Magligiyo haddaan waranka iyo	<i>magli = billaawe</i>
Mudaca soofaynno	<i>mudaca = bir af</i>
	<i>fiiqan</i>
Maamuusta gobannimo haddaan	<i>dhawrin-ilaalin</i>
Dhawrin magaceeda	
Haddii calanka meel lagaga dhacoo	<i>lagu miiso = lagu</i>
Weerar lagu miiso	<i>qaado</i>
Afrikada wixii madhiyey baan	<i>milicsanaysaan</i>
Milicsanaynaaye	<i>dusanaysaan</i>
Maashii bukootiyo haddaynaan	<i>maashii = nabarkii</i>
Arammidii maydhiin	<i>arammi = dhullux,</i>
	<i>iin</i>
Masiibada haddaan daawanniyo	
Maydka garabkeenna	
Murugtiyo haddaan godobta iyo	<i>manuda = diiddada</i>
Manuda xoogaynno	

maatida halkaan dhigi lahayn Mal	
aan is-weyddiinno	
Halkaan maalka daaqsiin lahayn	<i>daaqsiin = foofin</i>
Mal aan is-weydiinno	
malkadaa sidii looga bixi Mal aan	<i>malko = marin</i>
is-weydiinno	
Maqalka iyo araggaba runtay Gobi	<i>macaashtaa-u aydaa</i>
macaashtaaye	
Markii aan samaantiyo xumaha	
Labada miisaamey	
Macbuudkaan ku dhaartiyo Allii	
Mawlaha ahaaye	
Mawlaha qabiilkiyo fidnadu Ma	
laha liibaane	
Midnimiyo sinnaan baa malkada	<i>moodaa = dhaafaa,</i>
Lagaga moodaaye	<i>baxaa</i>
Tashi mida inaan yeelannaa Noo	
martabad roone	
Waxaan nahay mataanaha gacmaha	
Meel ku wada yaalle	
carradkaba marbay labada daan	
Miley is-diidaane	
Walaal kala maqnaan jirey dibbuu	
Mar u heshiiaaye	
Milliqsiga colaaddiyo dagaal Libin	
ma muujaane	
Midnimiyo sinnaan baa qabiil	
Nooga magac roone	
Xumaan murugtey taariikh madaw	
Qabali maan-raaca	



Meel laguma gaadhiyo hir aad  
Maadh ka gurataane  
Xeer meel la dhigay baa jiroon  
Cidina moogayne  
Lama mahadsho weligeed ibtilo  
Loo mashxaradaaye  
Midnimiyo sinnaan baa qabiil  
Nooga magac roone  
Mirro ma leh belaayadu ninkii  
Mililicaayoowe  
Deriskeenna tii madhisay baad  
Magansanaysaane

*maadh = xoolo,  
hanti*

*mahadsho = reeyo,  
nasto*

*mirro = wanaag,  
aaye, abdo*

*madhisay = dabar,  
goysey*

*magansanaysaan =  
dugsanaysaan*

Ninba meel haddaan joogsanaa  
Mahadho weeyaane  
Is-maan dhaafka aadami Afriik Buu  
maqooradaye  
Madnimiyo sinnaan baa qabiil  
Nooga magac roone  
Maro iyo dunteedaan nahiyo  
Kalama maarmaane  
Ninba waajibkiisuu maraa Waa  
midda u roone  
Ninse midiidin taladaw hayaa  
Maanshe degi waaye  
Muslinimo innagoo sheegannoo  
Meelna wada naalla  
Inaa layna kala maadiyaa Miinka  
kuma taalle

*maqooraday =  
halligay*

*maaraa = gadaa*

*midiidin = addoon*

*maadiyaa =  
ilaaliyaa*

Shaydaan marooliyo ibliis Yuu'na  
 maamuliné  
 Innagoo is-maqallaa nin kale  
 Nooga magac-roone  
 Maslaxiyo heshiis baa nin kale  
 Nooga magac-roone  
 Midig bidixba nabadbaa colaad  
 Nooga magac-roone  
 Male laysku raacaa nin kale Nooga *male = talo, arrin*  
 magac-roone  
 Muruq laysu geeyaa nin kale  
 Nooga magac roone  
 Isku miirankeedii haddaan kuu  
 masalo sheego  
 Nin walawba maqal waano waa  
 Lagama maarmaane  
 Midnimiyo sinnaaniyo xornimaa  
 Sidig la maalaa leh  
 Malko caano buuxiyo nimciyo *maax = tar, madhax*  
 Gabanimaa maax leh  
 Murti daacadiyo wadajirbaa Midho  
 la goostaa leh  
 Midigta is-qabsada dawladnimo  
 Way macaan tahaye  
 Murtidu waa dardaarane ninnaan  
 Yay ku hoos-marin dheh

Walaal inuu macaan yahay  
Ninkii madi ahuun baa og  
Inay gaajo malag tahay  
Ninkii mooro daranoow  
Anigaa manfaca garan

*manfaca = dheefta,  
raandhiisi*

Inay nabaddu marinkii xornimo  
Jidkii loo maraayiyo  
Tiirkii midnimadiyo  
Nolosha u magaal tahay

*magaal tahay = hogor,  
hooy, sal-dhig*

Dawladaa horuu-maray  
Sida ay u maalaan  
Iyagaa ka marag furi  
Middiyaha colaadeed  
Dagaal laysku madhiyaa  
Maydka aan la kala garan

*maggoobay = godladay*

Dhulka oo muggooboo  
Maadh kasoo baxaayiyo  
Laga waayo midhihii  
Meehannawga gaajada  
Afrikada madoobee  
Isku meherad seegtiyo  
Kuwa soo maraa garan  
Murtida iyo heesaha  
Waxa loo maldahayaa  
Maan-garatadiinnee

*meehannaw = silica*

*meherad = hawl, dan  
maraa = arkaa, mutay*

Dalka kii ka maqanoow naga maqal  
Kuwa maanta joogoow  
Waad aragtay maansada

*maldahay = sarbeebay*

Mas'uulkii u sarreeyee  
Maskaxda iyo aqoonta  
Taladii murugtee  
Maaro loo heli waayo  
Muftaaxeeda hayiyo

*muftaaxeeda =  
furaheeda*

Macallinkii ani weeye.

Mooraalkaygu sagaashan buu  
Miridhkii dallacaayoo

*miridh = midhidh,  
daqiiqad*

Afrikaan mad-madoobiyo  
Ilma Reer-ma-Tudhaan

*ma tudhaan = ma  
naxaan*

Haddii ay is-maqlaanooy  
Talo meel mariyaan

*meel-mariya = suurto-  
geliya*

*mijaxaabsho = legdo*

Sida loo mija-xaabshee  
Maqluub loogu rogaan  
Milay aanan dhoweyn  
Meedeey buuxda ku qaatay.

*meedeey = shahaadad*

Anigu waa macallin  
Macal-qabadkii adi weeye  
Kaana waaba masiibo oo  
Nabad meel lagu maaliyo  
Midnimo wuu ka dhintaayoo  
Dunidaa mugga weyn leh

*macal-qabad = dillaal*

*mugga = qaadka,  
buuxsiinta*

Hadduu meel u cadhoodo

Makhrib-buu oloshaayoo  
 Laba meel wada joogtoo  
 Mabaadii' ku heshiisina  
 Uma muuqan karaan....  
 Sheekadii melmellayd baan  
 Madaafiicda ka aa'iyee  
 Mar kalayga dhegeysta :  
 Macal-qabadkii birta seeftiyo  
 Boqno-goynta aan siiyee  
 Malkadii aan ku beego  
 Ban-doodu ay ku dhacaysayoow  
 Baashahaan ku gamaa'yayoow  
 Tanaa maanta u baahan  
 Bayl inaa la hunqaacee  
 Barnaamijkayga dhegeyso...  
 Dadka baadi-hallaabay baad  
 Xagga baararka suuqa  
 Kala doodi bawaaddadood  
 Kuwa biiraha qooqa  
 Badsadee is-illaaway baad  
 Marka ay beddelmaanee  
 Maskaxdoodu biyawdaa  
 Qabayaaladdoo buqshadaysan  
 Baar atasyoo kaga iibin.  
 Inta kiin lagu baabiyo

*makhrib = fiid*

*' melmel = maroor, rog  
 ka aa'iyee = ka ridiye*

*boqno-goynta = gonda-  
 goyn, heerid  
 beego = u diro, ku  
 hagaajiyo  
 bandoo = xayiraad  
 socod  
 baashe = halyey,  
 geesi  
 hunqaaco = matago*

*baar = makhaayad*

*biiraha = khamriga  
 qooqa = xumbeeya*

*biyawdo = isku  
 qasanto  
 buqshadaysan =  
 xidhxidhan*

Bulshadii turubleydiyo  
 Bahalluulka khammaarkana  
 Baaqigaad ku macsuumi.  
 Intaw baahan qabiilkee  
 Beer-xanuunka la taahina  
 Markay boogtu dillaacdo  
 Iyagaa bixi doonoo  
 Beelahoo dhan gelaayee  
 Shaqadaa bud-dhiggeedu  
 Haddii ay bixi weydo  
 Idinkaan idin beegsannoon  
 Buuryadaydinka goyn  
 Baxa oo ku dhaqaaqa.  
 Anna aan masaloodee  
 Afrikaan madmadoobiyo  
 Ilma Reer Maca-Naas  
 Maskaxdaan ka ataagiyoo  
 Mishiinkay dhigayaane  
 Maalin dhow igu eeg.

*turubleiy = turubka  
 ciyaarta*

*macsuumi = ku  
 martiqaadi*

*baxa-taga, orda*

*ataagi (laatiin) =  
 weerari, qabsani*

(Hees)

## COLAAD HA KU DEGDEGIN

Waar hooy dadoow  
Hooy, dadoow, dadoow  
Maahmaah dureedoo

*dureed = sula, seben  
hore soo jirtay*

Duqaytidu tidhoo  
Diirran baan hayaa

*diirran = fiican,  
wacan*

Bal aan kula dayee  
Soo dabab-dhigoo  
Dibnahana ka sheeg

Wax-la-yidhi dagaal  
Inaan lagu degdegin  
Waa laga digoo  
Ta sokeeyahana  
Haku darina baa la yidhi.  
Waa loo dagtee

*digay = dardaaray*

*loo dagtee = la  
sahashaday, la  
fududaystay*

Nabad iyo darkeed  
Lama daadiyee  
Qabiil iyo dirkii

*dirkii = jaadkii,  
dhiggii*

Waxay doonayaan  
Qarannimo duntée ...

*dunta = burburta,  
dhacda*

Dusdus iyo afmiinshaar  
Iyagaa dirtee  
Iska diida baa la yidhi.

*dirta = ku adeegta*

Hasha dibad u hoyataa  
Burka iyo dareemaday  
Geela kaga dambaysey  
Soo daaq is-leeduhuu  
Ku dilaa waraabuhu  
Dilmo iyo colaad  
Duullaan ka kacay  
Waa dabar-go'iinnee  
Iska daaya baa la yidhi.

QAYBTA SHANAAD

SAMATALIS IV

HEESTII FURINTAANKA

*NOO MALEE*

Noo malee *malee = tali*  
Aabbo, noo malee  
Noo maleeyoo  
Marinka toosan *marinka = hilinka,  
dawga*  
Nagu hagaaji *hagaaji = toosi,*  
Mooliskii xorriyaddoow  
Noo malee  
Tiirkii midnimadoow *tiir = udub, dhidib*  
Noo malee  
Ma huraankii guushoow *ma huraan = ma dhaafaan  
lagama maarmaarn*  
Noo malee  
Noo malee  
Aabbo noo malee  
Noo maleeyoo  
Marinka toosan  
Nagu hagaaji  
Madaxweyne-yaashuu  
Madashii ay joogaan *madasha = golaha shirka*  
Geesiga ka muuqdoow  
Noo malee  
Noo malee  
Aabbo noo malee  
Noo maleeyoo  
Marinka toosan  
Nagu hagaaji  
"Nabaddu way macaantee

Is-moodsiis hadduu jiro  
Majaraha hoggaankiyo *majaraha = hannaanka*  
Martabada ka taliyoo  
Miyir-diid ha laga baxo"  
Murti kii ku yidhiyee  
Maqashiiyey Dunidoow *maqashiiyey = ku  
dhawaaqay*

Noo malee  
Noo malee  
Aabbo noo malee  
Noo maleeyoo  
Marinka toosan  
Nagu hagaaji  
Jabbuutoo midawdoo  
Magaceedu kor-u-kaco  
Geesiga mabda'iisu  
yahayoow  
Noo malee  
Noo malee  
Aabbo noo malee  
Noo maleeyoo  
Marinka toosan  
Nagu hagaaji

TIX  
BADDA QAAD

Dhaqaalahan ololayee	
Oogadan guradeenna koray	<i>oogada = dusha, guudka</i>
Waqtiga adagee na helay	<i>koray = fuulay</i>
Abaaraha laga fajacay	<i>fajacay = yaabay</i>
Dantani laga ooyayiyo	
Dadkani kala aammin-baxay	<i>aammin bax = shaki</i>
Waxay ka aleeggadeen	<i>aleeggad = qaylo</i>
Markaan eegeen akhriyey	
Waxaan ku idleeyey talo	<i>idleeyey = dhammeeyey</i>
Wixii iimahan wadee	<i>Iimahan = cudurradan</i>
ujeeddadu ay ku timid	
Si buuxda ha loo arkee	
Orda oo badda qaada	
Biyo eebbe dhigay iyo	
Badda lama cantoobee	<i>cantoobo = xantoobo, gacan muggeed</i>
Maxay kaaga badan tahay?	
Barbarkaaba kama deyin	
Waan u bogey ujeeddada	<i>u bogey = la dhacay, u qushuucay</i>
Waana taan u baahnaa	
Rag hadduu badheedhuu	<i>badheedho = caadaya, u, u babac dhigo</i>
Siyaasado badhkood galo	<i>badhkood = qaarkood</i>
Baddan aad arkaysaan	
Sidii booyada biyo-daran	<i>booyad = taangiga biyaha lagu kaydiyo</i>
Baaldi bay ku dhurantaa	
Xaraf sabadii waa dedan	<i>dedan = qarsoon, daahan</i>
Waa daahan kala maqan	

Dabool baa ku xidhan adag	<i>dabool = af-saat, fur</i>
Nin dibloomyo haystoo	
Cilmi-saynis daadshiyo	<i>daadshey = qalin-jabiyey</i>
Indheer-garadka duniduba	
Doc-kastooy ka baadheen	
Shibbanaha ma daaliicin	<i>daalicin = bayaaminnin</i>
Dulucdeeda ma akhriyin	<i>dulucda = mucda, nuxurka</i>
Haddaan shaqalka lagu darin	
Dusha kama xidhiidhsamo	
Rajo lagu dawoobiyo	
Danina way ku xidhantoo	
Duruustiyo qoraallada	
Iska daaya lama odhan	<i>iska-daaya = dhaafa</i>
Anna daba lugeeyee	
Halka ay ku daadegi	<i>daadegi = dhaadhici</i>
Dib ha loogu fiirsado	<i>fiirsado = daymo lahaado</i>
Dadkana nin iyo aragtidi	
Sheekadu ma daahana	
Doc kastay u furan-tahay	
Dayaxiyo cadceeddana	
Nuurkeed ka daalacan	<i>nuurka = iftiinka</i>
Daal iyo harraad ma leh	<i>daal = dekaan, caato</i>
Wax kastoo dawaafiyo	<i>dawaafa = wareega,</i>
Dabayshana ka orod badan.	
"Na'dan" daahan lagu qoray	
Aa'duna" la deris tahay	<i>deris = jaarka</i>
Xarfihi ku daba jirey	<i>ku daba-jirey = ku xigey</i>
Doondoona oo hela	



4(Hees)  
**DARKA NABADDA**

Duul wada dhashoo  
 Degmo qudha ku wada nool  
 Ninka kala dillaalaa  
 Dan muxuu ka helayaa

Dawladnimada iyo  
 Daaruhu dhammaan      *daaraha = aqallada*  
    *dhagaxa ah*

Hadday dambas noqdaan      *dambas noqdaan = bes*  
    *beelaan*

Kee bay u darantoo      *daran = xun*

Laga daadshey caanaha      *daadshey = qubay,*  
    *saydhiyey, rogay*

Dulucdeeda sheekada  
 Doqoneey ma garatide  
 Dibaddaad ka tahay marag

Nin ragoow ha daymoon      *daymoon = jalleecin,*  
    *eegin*

Debnahaaga ka adkaw  
 Darka nabadda soo xidho      *darka = weelka*

TIX  
**BAHARDAAD**

Waxba hay bahardaadine      *bahardaad = fadhiga*  
    *weyn, barraah*

Halkaasood barafaysood      *barafayso = qaboojiso*

Bal ku jiipto dhammaatay      *Bal = salli, darmo*

Bisinkee maxaa dhacay?  
 Nabaddaan ku badhaadhnee  
 Ku negaa beledkeennuyee  
 Beeshu ay dugsanayseyeen      *dugsanaysey = ku*  
    *gabbanaysay*

Weligeen barkanayn  
 Way buquujinayaanoo      *buquujin = xuurtayn*  
 Halkanoo bed-qabteyna      *bed-qabtay =*  
    *nabdoonayd*

Colaad baa laga beeray      *beeray = shiday,*

Ee Afrikaan bogsanaynoo  
 Abidkood ka baxaynin      *abidkood = weligood*

Hadba reer burburkii iyo  
 Qabiil la isku bireeyiyo      *bireeyo = dawraco*

Boqna-goynta dadkoodoo  
 Ku dhammaata bilaashe      *bilaasn = mada la'aan*

Halkanaa bed-qabtee  
 Ma hadday belbesheen?      *belbesheen = besneen*

HEES  
RARAN COLAADEED

Colaadeey dab iyo raran	
Adaa daadduunka dhala	<i>daadduun = habqan</i>
	<i>socod, qax</i>
Adaa dadka laaya oo	<i>laaya = dila</i>
Gu'yaal, beel deris ahayd	
Adaa kala dayriyoo	<i>dayriya = irdheeya,</i>
	<i>erya</i>
Is-dooxa yidhaahda oo	
Xumaan duddadooda dhiga	<i>duddadooda = dhexdooda,</i>
	<i>raartooda</i>
Dagaalku hadduu kacoo	<i>kaco = qarxo, dhaco</i>
Ka dhaco meel doog lahayd	<i>doog = daaq, tigaad,</i>
	<i>baad</i>
Adaa midab dooriyoo	
Dabeecadihii baddela	
Haddaad degganaanshihii	<i>degganaansho =</i>
	<i>xasillooni</i>
Dhammaanba u diiddatiin	
Xumaanta ku diirsataan	<i>diirsataan = ku</i>
	<i>faraxdaan</i>
Dad aan garan baa jiree	
Maxay ku dambaynayaan?	<i>ku dambayn = duuggoodu</i>
	<i>noqon</i>

GEERAAR  
DANTAADA KA RAAC

I)Annagu waan ka duqoownee	<i>duqowney = gabawney</i>
Da'da maanta kacaysaay	
Xumaa gaadhay dalkeenna	
Idinkaa dusha saari.	<i>dusha saari = dhabarka</i>
	<i>u ridan</i>
Maahmaah dooraa ku tidhi	
Midha daray adoon kala dooxin	
Duuduub u liq baa la yidhi	
Walaalkaa duubigiisu	<i>duubiga = xoogga,</i>
	<i>muruga</i>
Dhagaxa uu kugu dakhraa	<i>dakhar = nabarka</i>
	<i>madaxa</i>
Digo u qaadaa la yidhi	<i>digo = saalada xoolaha</i>
Haddii aad daacad tahay	
Ilaah baa daayinoo	
Dariiq kuu baxshaa la yidhi	<i>baxsha = kugu toosiya</i>
Su'aalahan dabaqa saar	<i>dabaqa saar = dabool</i>
Midhkii kuu dan ah ka raax	
II)Siman iyo Siciid, Saafi iyo	
Saalax gebigiinna	
Sahan iyo ergaan nii diriye	
Qaata sahaydiinna	

Soddonkii qur'aankiyo ducaan  
nigu sagootiyaye

*sagootiyey = idin  
raaciye*

Surinkaad maraysaan belada  
Saatir niga qariye

*surin = hilinka,  
sursuurta*

Halka aad ku socotaan markaad  
Sabadi gaadhaanba

*sabadi = meeshii*

Salaan laysu diro ta ugu weyn  
Sooryo ugu geeya

*sooryo = deeq*

Geeraar  
**DOOD**

I)Dood baan jeedinayaayoo  
Arrimaan daaha ka faydi  
Danta beesha ku saabsane  
Diyaar iiga dhegeysta.

*faydi = laabi, qaadi*

Baaqii dawladdu tuurtayee

*tuurtay = ka soco  
yeedhay*

Door dhoweyd la ogaa iyo  
Dalabkii aftintiiyee

Dadka loo fidiyey baan  
ka dab-qaadanayaayoo

*fidiyey = jeediyey*

*ka dab-qaado = ka  
fikrad qaado*

dul yaallaa mabda'aygu

Taa waxaan u daleeyey  
Waddani wuu danqadaaye  
Diif colloga sokeeye

*diif = suluf*

*durugto = fogar*

Hadday sii durugto  
Adoon faallo ka doonin  
Dawladii xoogga lahaa iyo  
Deriskeenna xusuuso  
la doondoonaayo maanta

Xaggee buu ku dambeeyey?  
Taa halkaa ku daboollee  
Rag hadduu arrin dooriyo  
Xaajo uu isku diidoo

*isku-diido = is-maan-  
dhaafo*

Dani ay dhex marto  
Dunida xeerka u yaalliyo  
Dacwad baa u bannaan

*u bannaan = u furan,*

Odayaal wax dareemiyo	
Maskax baa dalka joogtee	<i>maskax = wax-garad</i>
Guddi buu dalbadaayoo	
Habeennaw dibad seexdoo	
Ninba dawgi u sheegtoo	<i>dawgii = gartiisa</i>
Arrintiisa dawaysa	<i>dawaysa = xallisha</i>
Dacar hadday ka qadhaadhooy	
Daran tahay aad u cüslaatay	<i>darantay = adagtay</i>
Labadeenna debnood baa	
Dawadu ay ku jirtaa	
Cadho se waa doqonniimo	
Dacwaddaadooy hallaysiyo	<i>hallayso = lumiso</i>
Dawgay kaa lumisaaye	
Adoo jooga dalkaaga	
Lagu duudsiyi maayee	<i>duudsiyi = deedafayn, miidhi</i>
Xeer ku doono waxaaga	
Taa halkaa ku dabooloo	
Dib anaysugu laabmiye	
Waddani baan ahay doora	<i>doora = weyn</i>
Degelkaan ku barbaareen	<i>degel = guri, baro</i>
Cammuuddiisa dul joogana	<i>cammuud = carro, ciid</i>
Daayin baa igu abuurayoo	<i>abuuray = beeray, uumay</i>
Degmadan baan ku dhashay	
Noqon maayo danayste	
Nacas been ku dillaashoo	
Hadba Diin ku shaqaystoo	
Daanka xoolo ka buuxshoo	<i>daanka = canka</i>
Eryanaaya daruuriye	<i>eryanaaya = xarafsanaya</i>
Daw-cad baan jarayaa	<i>jarayaa = bannaynayaa</i>
Waxba yaanan ku daaline	

Dibad kii ku maqnaa iyo	
Dudda-weynta ka joogaba	<i>dudda-weynta = dadka</i>
Aan u baaqno dadkeenna	
Ha dhammaado dagaalku	<i>dhammaado = istaago, joogsado</i>
Dood wixii na dhex yaalley	
Hadal aan ku dawayno	<i>dawayno = dhammayno</i>
Deriskii kala guureyna	
Haysku soo darsamaan	<i>darsamaan = isu yimaaddaan</i>
Nabaddii degi-weydey	<i>degi-weydey = xasili weydey</i>
Darka aan u gaggaabnoo	<i>gaggaabno = u adkayno</i>
Taariikhda daw cad u jeexnee	
Dooddaydaa igu raaca	
II)Warqad baan dirayaaye	
Danta aan ka hadlaayo	
Iyadoon faallo ka doonin	
Dersikayga labaad	
Dulucdaa hadalkayga	
Duqaydu way fahmayaane	<i>fahmayaane = garanayaan</i>
Dib intaan u sugayneey	
Jawaab soo dirayaan	
Dadweynoow gebigaaba	
Degganaansho ogow	<i>ogow = lahaw</i>

Gabay  
*MAYDHDHAAN*

Taariikh markaan maamiyeen	<i>maamiyey = sawiray</i>
Milicsadeen baadhay	<i>milicsaday = ka baaraan degey</i>
Murtaa tidhi nimaan kuu xidhini yaanu kuu rarine	<i>kuu xidhin = aan xidhihiisa ahayn</i>
Ficil baa Afriikada ka maqan	<i>ficil = xintan</i>
Iyo aqoon dheere	
Garaadkiina waa laga masaxay	<i>masaxay = maydhay</i>
Inay malaystaane	
Inta uu ku maqan yahay ninkii	
Cunayey maalkooda	
Intuu meheraddiisiyo sirtii	<i>meherad = shaqada</i>
Kula dul-meeraayo	<i>dul-meerayo = wareegayo</i>
Intaan muuto-muutada qarsoon	<i>muuto-muuto = muhmal</i>
Mar ay dareemaynin	
Inta dhegaha maar kaga jireey	<i>maar = fur, quful</i>
Maqan tahay joogin	
Maxaan gabay ku maaweeliyaa	
Maba yaqaanniine	
Afartaasi sheekada maldahan	<i>mal-dahan = sarbeeban</i>
Nin iyo maankii dheh	<i>maankii = garaadkii</i>
Marka xiga tilmaantii haddaan	
Idin mushaaxsiiyo	
Afrikada wuxuu macallinkii	
Magane doorshaaba	
Dhiiggeeda wuxuu maaxsaddu	<i>maaxsado = heensado</i>
Midab gumeystaaba	
Hadba kii malayn iyo wuxuu	
Maqasha laayaaba	<i>maqasha = ubadka</i>

Mirixeeda wuxu toogto ooy  
Magan ahaadaanba  
Xanuunkii markuu wada  
danqiyo Muruqi naafoobey  
Gobanimo waxay mililicdooy  
Muhasho reentaaba  
Xaqeedii maqnaa iyo markii  
Dhaxalka loo meersho  
  
Mulkigeeda goortay heshee  
Midigta loo saaro  
Kuma mahadiyaan Eebbihii  
Mawlaha ahaaye  
Ma mis-cirirto oo dawladnimo  
Uma malkeeyaane  
  
Nin walina inuu madax noqdaa  
Loo miglanayaaye  
Muraadkeedu waa ina kursiga  
Lagu macsuumaaye  
Wax ka mid ah ujeeddada haddii  
Aan masala sheego  
Mas'uul shalay ninkii loo gartee  
Magane loo doortay  
Isagoo midnimo toosan iyo  
Marin u jeexaaya  
Marxabbiyo guddoon kama  
helee way makalayaane  
  
Middi bay u qaataan berriyoo  
Lagu mag-maagaave

*danqo = xanuunjiyo  
naafoobey = wiigmay  
muhasho = buseel,  
yu'asho  
meersho = la siiyo,  
wareejiyo  
mulki = xaqa  
lahaanshaha  
mis-cirirto =  
yagleesho  
malkeeyaan =  
gardaadiyaan  
miglanayaa = tafa-  
xaydan yahay  
muraad = ujeeddo  
macsuum = sooryee  
makalayaan =  
dilayaan  
mag-maagaa = lagu  
gawracaa*

Muruqeeda kuma ciil-baxdoo  
 Kuma macaashaane  
 Maamuuska calankiyo xornimo  
 Dawladnimo miiggan  
 Waxa uga macaan dhawrto iyo  
 Madhax la siiyaaye  
  
 Abeeskiyo waxay mililicdaa  
 Miciyihiisiiye  
 Mawliid haddii loo dhigana  
 Magansan maayaane  
 Maxaa lagu dawweeyaa ducada  
 Ma laha aammiine  
 Afrikadu mudnaan way nacdiyo  
 Inay midoobaane  
 Kol hadday martabaddeeda iyo  
 Diidi magaceeda  
 Masiibada ninkii baday haddii  
 Maragga loo haysto  
 Dimuqraadinimadiyo\* intay  
 Nabadda miicayso??  
 Inta laba mataana ah warmaha  
 Loo mitirinaayo  
 Inta weli la kala maadineey  
 Midiyo buur joogto  
 Ma marayso waanadu intay  
 Meel wax ka arkaynne  
 Maxaa lagu dawweeyaa ducada  
 Ma laha aammiine  
 Inta geesigeedii maqnaa Loo  
 mashxaradaayo

*macaashaan =  
 faa'iidaan*

*miiggan = cuddoon*

*dhawrto = dewero  
 madhax = qudhun*

*mililicdaa = eegtaa*

*mawliid = duco,  
 Alla-bari*

*baday = ugu wacnaa*

*mitirinaayo =  
 dnuudhuminaayo*

Eenay mudanaheedi la diley  
 Muran ka keenaynin  
 Macdanteeda duul kale intuu  
 Ugu malaynaayo  
 Marriinkaa intay xidhan tahëey  
 Meherka diidayso  
 Maqaar saar intay jeceshihiyo  
 Weliba maydhaanka  
 Inta ay ka madhan tahay runtiyo  
 Waxa inoo muuqda  
 Mar hadday ka toosayn hurdoo  
 Damaqsanayn miidha  
 Markay garato way dheer tahooy  
 Maya tidhaahdaaye  
 Maydhaxdiyo dufkeedaa u daa  
 Kuma maqlaayaane

*muran = asaraar*

*Duf = cuf, guf*

10 Gabay  
*GOCASHO*

Arrin gadantay taariikh gundheer	<i>gadantay = qarsoontay</i>
Milay gaboobaa ah	
Waqti laga gudboo siibtayoon	<i>siibtey = jiitay</i>
Cidina gaadhaynin	
Anay gocasho-reen igu dishiyo	
Gaydh xusuus mudane	
Afrikada gawiran iyo Jinsiga	<i>gawiran = gabnada ah</i>
Uur-gubkay badaye	<i>uur-gub = caloolyow</i>
Bal aan soo gunaanado adduun	<i>gunaanado = gunto</i>
Galabba waa cayne	<i>soo gaabsho,</i>
	<i>gabagabeeyo</i>
	<i>abuuray = beeray</i>
Adduunyada naflaha guud	
socdee Guulle ku abuuray	
Bari iyo galbeed uumiyaha	<i>carari = ordi</i>
Carari guudkeeda	
Afarteeda geesood khalqiga	<i>gees = baal, cidhif</i>
Gelaya ee buuxa	
Ninba goob u joogiyo bulshada	
Gaar u dhaqankeeda	
Inkastoon ku kala goonninoon	<i>goonni = gaar</i>
Lays af garanaynin	
Haddana gumuc abuurkeenni	
hore Ma laha guuroowe	
Aadan baan ka soo wada go'niyo	
Xaawa gebigeene	
Sagaal dhalad gudboon inaynu	<i>sagaal-dhalad =</i>
nahay Wayla garateene	<i>sagaal bilood ku</i>
	<i>dhashay</i>
Markay nolosha guud taagantiyo	
Magaca kuu gaara	

Dhaqaalaha markii loo guntaday	<i>guntaday = loo tafaxaytey</i>
Nin iyo geestiisa	
Gun iyo baarba aadami wakaa	
Guusha weeraraye	
Dayaxuu u guuroo hawada	
Sahan ku goobaaye	
Shuhuuray ka kala gooshayaan	<i>gobolkood = qaarkood</i>
Maanta gobolkoode	
Afrikaay go'doontoo adaa	<i>yuurura = fadhiya</i>
Goobxun yuurura e	<i>kadallooba</i>
Gayigaad lahayd oo nimcadu	
Gubo'tidhooy buuxdo	
Gaajiyo harraad buu darteed	
Luun-ku-gawracaye	
Goblan foolxun gabadhaad	<i>goblan = ubad la'aan</i>
baddiyo Geeridiyo hoogga	<i>ku gaboobay</i>
	<i>hoogga = jabka</i>
	<i>mudid = dooxid,</i>
	<i>dilid</i>
Indheer-garatadaadood dishiyo	
Geesi mudiddiisa	
Gawraca walaalkaa ayaad Gob isku-	
mooddaaye	
Jaarkeenna nacabkii gembiyee	<i>nacab = cadaw</i>
JAAD gondaha gooyey	
Ee guudka kaa raran jireed Daba	<i>raran = heeryayn,</i>
guclaynaysey	<i>midiidinsan</i>
Wuxuu gebagebeeyaba tanuu	
Galabta joogaaye	
Garbahays-qabsada waxa tihiiin	
Gacal walaaleede	
Gurranuhu sidaa kuma tagee Gooya	<i>gurrane = waa</i>
xadhiggiisa	<i>gumeyste</i>
Gunta NABAD Jabbuutaay	
haddaad Libintii gaadheene	

*MIDNIMADA U SOO BAYDH*

Beeshani Jabbuutee

Badda xeebta

Badhtamaha ku nooleey

Inaan kala baxnaa

Waa baylahdeennee

Beenloow qabiil

Noogu baaqayaa

Maskaxdii baryoodkiyo

Qalbi baaryey weeyoo

Waa baabba'eennee

Berigii xorriyaddii

Isla baadidoonkii

Wixii aan ku badinniyo

Ba'e wada jirkeennii

midnimada u soo baydh

Inu belel innaga kaco

Basanbaas innagu dhaco

Ninka baadi-doonoow, buus

Bili Aadan weeyoo

Marka dhiilku buuxsamo

Isagaa is-buriyoo

Baallaha ka daatee

Waxaan kaga baxaynaa

*xeebta = dhulka**badda ku**xiga**kala baxnaa = kala**soocannaa,**qaybsannaa**baylah = dayacnimo**beenlow = beenaale**berigii = waagii**badinnay = guul**hellay**wada-jir = isku**duubni, midnimo**baydh = leexo, weeco**basanbaas = jaah-**wareer**dhiil = hadhuub,**doobi, gorof**is-buriya = is maax-**dumiya**baallaha = hareeraha,**shinacyada*

Buureey ha dumin iyo

Bismillaahi wada DHAHA

Afrikadu badhaadhaha

Uma wada bislaannoo

Wax baa uga ba'aayee

Boqorkii na uumoow

Allahayoow belaayada

Adigaa na baal-marin

Inta baalka sharafta leh

lagu wada bariisani

Barkin weeye nabadduye

Boqorkii na uumoow

Allahayoow belaayada

Adigaa na baal-marin Aammin

*bismillaahi = magaca**alle oo cuskado**badhaadhe = nimco**bislaan = diyaar uma**aha heer ay ku hanan**karto, may gaadhin**ba'aaya = ka hor**taagan**uumoow = abuuraw,**alkumow**baal-marin = naga**baydhiin**baalka = taashka**barkin = barkimo,**makhaddad*



TIX  
AKAA MADOOBE.

I)Qorigaa Madoobee  
Aa-kaa la magac baxay  
Masiibada uu Aadmigu  
Is-ku madhiyey weeyaan  
Afrikada is-moogina  
markay talo ku murantay      *muranto = asaraarto*  
Mabda'aysku diidaan  
Ka ay Maatidoodiyo  
Mudanaha ku layseey      *mudanaha = hal-yeyga,  
hanadka, geesiga*  
Isku malagto weeyaan  
Musaambiik\* Angooliyo\*      *malagto = madhiso*  
Ruwaandada\* ad maqashee  
Maydku uu cidlada yaal      *cidla = waaqla*  
Ka sidaa u madhiyee  
Midab-doorshey weeyaan      *midab-doorshey =  
dhalan-rogay*  
Maqla reer Jabbuutoow  
Ninka kaa miciinsaday      *miciinsaday =  
ciirsaday*  
Murugiyo dhib mooyee      *murugo = tiiraanyo,  
uur-ku-taallo*  
Macaash kama helaayee  
Iska dhiga masiibadan  
Waxa ay murtidu tahay  
Intay kala maqnaan-layd  
Kala maarmi maysee  
Hays-maqasho weeyaan

II)Warshadaa Altaabee\*

Soo saarta aa-kaa  
ilaahay ha olooshee  
Aasaaskii dhismaheeda      *aasaas = bilaw,  
yagleel*  
Markii loo amba-qaaday      *amba-qaad = qalqaalo*  
Adduunku iskuma raacine  
Rag adduunyo la siiyeyoo      *adduunyo = xoolo, maal*  
Ujeedo gaara lahaa baa  
Arrintaa ka dambeeyey      *ka dambeeyey = soo  
abaabulay, u sabab  
ahaa*  
Markayse hawli idlaatee  
La soo saaray aa-kayгаа  
Arladaa lagu baahshoo      *arlada = dhulka,  
adduunka*  
Afrikuu wada gaadhay  
Sida laysugu aa'een      *aa'een = rideen*  
Uga iibsana lahaynee      *iibsana lahayn = gadan  
lahayn*  
U idlaado dadkeennuna  
li-dheh bay u baxsheenoo  
**baxsheen??- u sameeyeen**  
Loo albaab-furayey  
Wadkiyoo la arkaayaan      *wadkii = mawdkii,  
geeridii*  
Aqalka soo dhigannaayoo  
Kol haddaan indhaheenu  
Wixii muuqda arkaynin  
Wixii yaalla agteennana  
Ruuxna uu urinaynin  
Waa ayaan-darro-weyne      *ayaan-darro = nasiib  
xumo*

Nin madow addoonsiga waa *addoonsi = midiidinsi*  
Waa wax loo abuurro  
Ilamaa abid baa la *abid = weligood*  
ugaadhsanayoo *ugaadhso = gabraaro*  
Oday Biiqay weligeen *Biiqay = hagaagsan*  
Ardaageenna kama tegin *ardaa = garab- dhig*  
Kama fulo adeerkeen *fulo = kama quusto*  
Intaasi waa arartiiye *arar = hor- dhac,*  
*gogol-xaadh*  
Aan u tago ujeeddada  
Afrikada ta gaadhiyo *ta gaadhay = ta ku*  
*dhacday*  
Afar sanoo innaga tegey  
Adduunyada wixii dhacay  
Waa lama illoobaan  
Ma idlayn karaayee *idlayn = dhammayn*  
In-yaroo tusaala ah  
Aan ka sheego dhawr Erey  
Waddammadu ku oolee *ku oolay = ku negaaday*  
Inta badan u haystee  
Abadhkooda taxayuu *abadh kooda =*  
*abshaxooda*  
*taxay = gooyey*  
Oday-biiqay soo maray  
Iyagu way ogyiinoo *og-yiin = garanayaan*  
musaambiik Angooliyo  
Jabbuutiyo Aljeeriya  
Wixii gaadhay eedaad  
Ma illoobayaan Abid  
Sawd Afriik ta gaadhiyo  
Sidii loo addoonsaday  
Weli way eggerantoo? *eggerantay=luggo'day*  
Arligii burburay iyo

Ummaddii dhammaatayna  
Aa-kaygaa u sababoo  
Asbaabtiisa lagu lumay  
Yamantaa agteennee  
Eedaysay Cadanee  
Arrin lagu dhammayn-laa  
Is-af-garasho iyo nabad  
Ololaha qabiil iyo  
Ka aamminay dagaalkee  
Arligoodu baaba'ay  
Aa-kaygaa u sababoo  
Asbaabtiisa lagu qoray  
Ereteriya maqallee  
Sidii looga ooyeen  
Uga uur-xumaannee  
Ummushooda loo qalay  
Aa-kaygaa u sababoo  
Asbaabtiisa lagu qoray  
Soodaan Abaartiyo  
Is-af-garansho li'idaa  
Jabhadahay ka ooydee  
Arligeeda wax-u-dhimay  
Aa-kaygaa u sababoo  
Asbaabtiisa lagu lumay  
Dadkoodaa Ugaadhiyo  
Buuraha ambanayiyo  
Afartuu u qaybshiyo  
Ammuurtuu dhex dhigay Jaad  
Aa-kaygaa u sababoo  
Asbaabtiisa lagu lumay  
Soomaali urur iyo

*ka aamminay = ka door-*  
*biday*

Awooddooda loo bogay  
 Awaarii ku qiiqiyo  
 Lama-arag dadkoodii  
 Aa-kaygaa u sababoo  
 Asbaabtiisa lagu lumay  
 Af-guntane, inkaar-qabe  
 Af-laaqaale qorigaa  
 Ul-barde ah dhexdeeda-le  
 Aboodiga sankiisa-le  
 Adeeryada dhegteeda le  
  
 Waa lagu idlaadee  
 Innagana innaga dhiga  
 Labada is-aqoonsane  
 Anfac meel ku wada cunay  
 Uur-qudha ka soo baxay  
  
 Ee u aabbo wada dhalay  
 Inay is-oggolaadaan  
 Sida ul iyo diirkeed  
 Abidkood ahaadaan

*af-laaqaale = farraarro*

*adeeryo = goodirka,  
ugaadh waaweyn*

*dhiga = tuura, quba,  
daadiya*

*is-aqoonsan = is-  
ictiraafsan*

*anfac = quud, dhuuni*

*uur-qudha = hooyo  
keliya,*

## GEERAAR DEEXASHO

Kuwa beenta u deexda  
 Haw dubaaxsho jidhkooduye  
 Runtoon diirka ka qaadaa  
 Dantu ay ku jirtaa  
 Dulucdaa hadalkaygu  
 Danaystooow kuma sheegin  
 Doqoneey iska joog  
 Nin ragoow dibnahayga  
 Hadal weeye da'weyne  
 Dooddu yaanay ku dhaafin  
 Intaan joogno dabaysha  
  
 Carrabkaa dacwiyaayee  
  
 Saddex baa u darnayd  
 Saddex baa ka dambaysey  
 Saddex baa dalka joogtey  
 Saddex baa lagu daayey  
 Markii aan dirirayney  
 Dhiiggii daadanayey  
 Colaad baa u darnayd  
 Ninka jooga docdaydee  
 Anigoo an dareemin  
 Dalluunta ii qodayey  
  
 Xumaan baa ka dambaysey  
 Haddaanay dawlad ahayn  
 Wixii loogu dareeray  
 Ma dul-qaadan karteene  
 Nin da'weyn, Rag da'weyn

*dhaafin = seegin  
joogno dabaysha =  
ifka*

*dacwiyaya = doodaya,  
garramaya  
darnayd = xumayd*

*daayey = dhaafay  
daadanaya = qubanaya*

*docda = dhinaca*

*dalluun = hoobaaq,  
godka*

*dareeray = talo galay*

Aqoon baa dirka joogtey  
Dorraato halkii an naalley

Inaan laga digo rogtaa

Markii dood lagu

dhammeeyey

Sidaasaa lagu daayey

Annagu waan ka duqoownee

Da'da maanta kacaysaay

Wixii gaadha dalkeenna

Idinkaa dusha saari

Maahmaah dooraa ku tidhi

Midhaha daray adiga oon

Adiga oon kala dooxin

Duudduub u liqbaa la yidhi

Walaalkaa duubigiisu

Dhagaxa uu kugu dakhraa

Digo u qaadaa la yidhi

Su'aalahan dabaqa saar

Midkii kuu daran ka raac

*naalley = oollayn,  
degganayn*

*digo-rogta = laga  
guuro*

*duqoowney = gabawney*

*kacaysaay = taabba-  
gashay*

*gaadha = ku dhaca*

*dusha saari =  
dummaaddiina*

*weeye*

*kala dooxin = kala  
dillaacin*

14 HEES  
*SAHAY*

Abwaannada sebenkan ee

*abwaannada = hal-  
abuurka, maanso-  
yahanka*

Waqtiga saadaaliyaa

Mariiqii sare tegee

*mariiq = xiddig (mars)  
felegga ka tirsan*

Cirkiyo samadaa fadhiyey

Su'aalaha nooga yimid

Waxaa sabab looga dhigay

San-ku-neefle joogoow

*san-ku-neefle =  
uummane, noole*

Maxaad nolol sugaysaa

Adduunyada samir ka qaad

Sadkaad ku lahayd ka bood

*samir = ka quuso  
sad = calaf, gayb,  
saami*

Sir baa ku jirtee wax maqal

Sagaalkii laba-ka-goo

Caqliga seeraha u daa

Aqoon baa nagu saddexan

Miyaa sidig kuu irmaan

*sir = xog qarsoon*

*seere = dhul xidhan*

*sidig = hal neef  
aanay dhalin la  
oggolaysiiyey*

Dadoow la sadqayn karaa

Idaa sumal-looma-dayo

Sarmaan geed lagu tilmaan

*sarmaan = geed  
godxeed oo dhulka  
jiifsada*

Cadceedda siraad-gabtiyo

*siraad gabtay = if-  
tiin beeshay*

Dayaxa saab lagu dhex-ridey

" Waxbaa ka si'yaa ", la yidhi

Adduunyadu waa silloone

*silloon = gurracan*

Sidaad moodayso maahee

*moodayso = u  
malaynayso*

Sadkii aakhiruu jiraa

Malaa lagu sii socdaa

Rabboow soonkiyo salaad

Adigu sahay nooga yeel.

*sahay = jid-mar*

15 GUUX  
*SARBEEB*

I) Sarbeebtiyo hadalladayda

*sarbeeb = ereyo-  
daahan*

Su'aashaa ninkii gartoow

Idaha sumalka an ku daray

*sumalka = wanka  
goodha ah*

Sakada reeraha ka bixi

Taladu subaxday ka timid

Salaaddii duhur ka dood

Habeen bay saaran tahay

Carradu waa sabo udgoon

*udgoon = ur naftu  
jeclaysato*

Barwaaqadu seer-ma-weydo

Roobkaa saani noogu da'ay

Xareedduna way sinsimi

*saani = qummaati  
xareed = biyo roobka  
sin-simi = dindimi  
dur.duri*

Guddiga aad sara-kacdeen

Bil iyo sannad iyo habeen

Intaasay soo socdeen

"Sa'baa magacoodu yahay

Wax-weyn bay idiin sidaan

Haddii salaw iyo harraad

Dadkaagu la soogan yahay

*salaw = kulayl  
soogan yahay = tuban  
yahay*

Sufraarka biyaa ku jira

*sufraar = sibraar,  
weel caanood haragga  
xoolaha laga sameeyo*

Siddaha dhiishaa ku xidhan

Kalkii sidig laga lisiyo

Caanaha subag lagama bixin

*siddaha = xashigga  
la*

Dhay weeye an saxar lahayn	<i>gabto marka weelka la</i>
Barkiga "siin" baa ku qoran Faruhu way siman yihiin	<i>dhiisha = haanta (weel)</i>
Sad weeyaan kaa maqnaa Marriinka Sareedo sii Inaad u xidhaa la sugi Ninkii sannadooyin badan Ilaahay saacidee	<i>dhay = caano lis ah marriin = arrad-beel u xidho = u labbisto</i>
Ku siibtay ayaanad noqon Salaamana waan ku idhi	<i>saacideeyey = karaameeyey siibte = simbiririxday salaama = nabadgeliyo, ammaano alla.</i>
II)Anaa shay qaaliyoo Shucuurtii walaalnimiyo Shifada dawo lagu guntiyo Wanaag lagu soo shaqlee Nin-yow sharaf iga guddoon Waxaa shandaddaa ku jira Aroos shin barwaaqo dhacay Marriin lagu soo sharraxo Shaygii ugu qurux badnaa Sidii shifo loogu xidhi Aduun baa sheegi kara	<i>shay = wax shucuur = dareen shifo = fayo, caafimaad shaqlay = huwiyeey, qariyeey shandad = waliinjo, sanduuq shin = gu' xilli sharraxo = qurxiyo qurux = bilic aduun = adiga uun</i>
III)Adduunyadu waa sagaal Ma dhaafsana sadar kalee Halkaasaa lagu sar-jaray	<i>ma dhaafsana = ma dheera sadar = saf, xarriiq</i>

Weligeed ku samaysan tahay. Inaa toban lagu sar-jarayna Dad baa saakadan u qaba Hawsheed ku saloogan weli Si kale u arkoo ka maqan Ujeeddadan uga socdaa Warkii ergadeed siddeen	<i>saakadan = subaxan saloogan = ku jira ergo = dhexshexaadin, gar- qaad sajilay = qoray sawiri = fasirkeeda bixin sixi kara = qalad tiri kara sooryo = marti-gelin casuumad sebenkan = xilligan surmiyeey = oomay, dayoobay saxal = cirir, seben xumaad suubban = wacan sikaday = lagu fogaadey saakumey = saahiday, suuray la seexday = la gam'ay</i>
Warqadaa lagu soo sajilay Wixii u ku saabsana Indheer-garad baa sawiri Abwaankaa sixi karee, Su'aashaa doqon ma garan Nin raga sooryey u tahay Wixii sebennada dhiciyo Dhibaataadi lala surmiyey Ayuun saxalkeeda maydha Ergadatani suubban iyo ka dhigan yahay sahanka yimid Belaayada lagu sikaday Inaa laga soo noqdaa Ujeeddadu saarantoooy Salaantu ku kooban tahay Hurdadii laga saakumee Waxa badan laga soommanaa La seexday sheegayaane,	

Warqaddan labadeeda sadar  
Siinkiyo wawgaan ku qoray  
Beelahan sahankawgu diray  
Inay sacabkaw tumeen  
La siistay sheegayaan

*la siistay = la  
oggolaaday*

Saadaasha nin aamminoo  
Xil-saaran yahaan ahee  
Markaan saxay waan aqbalay  
Sarbeebtiina waan ka baxay

Hees  
*GAR-DHIG*

Giddigiin dadweynoow

*Giddigiin =  
dhammaantiin*

Gar-yaqaan haddaadiin

*guubaabo = baraarujin*

Heesaha guubaabada

Gabaygiyo tusaalaha

Geedkii la joogaba

Haddaad maanta garateen

Haddii godka laygu rido

*godka = xabaasha  
rido = aaso*

Geeridu waa ii xalaal

*geeridu = dhimashadu*

Walaalkaa kaa gar-daran

Hadduu ku gumaadayana

*gumaadayo = dilayo*

Adaa gacal ugu xigee.

*u xiga = ugu dhow*

Gartiisa tus baa la yidhi

Maxaan waano u guntoon

*ku goohay = ku  
dhawaaqay*

Ku goohay tusaaladiinna

*gadantay = libidhay*

NABADDII gadantee la

waayey

Haddii aad u gogol dhigteen

Guulaysta walaallayaal

IGEERAAR  
*HA DABBAALINE DAA*

I) Waxba laysma diyaarinne  
Miyaad soo degdegteen?

II) Ha u soo degdegaane  
Ha dabbaaline daa

I.) Ilaa ay degsanayso

Ku dabbaala halkaa

II) Ha dabbaaline daa

I.) Waxa aan u dabbaalay

Ilaa laysu diyaarshoo

Nabaddu daayacmin weeyoo

Dul ahaan Afrikaankaa

Dariiqii ka hallawsano

Dantoodii garanaynoo

Iyagaa isku duuloo

Daamankayska ridqaayoo

Reer dameero-la-joogoow

Ilma daaniye waashay baa

Maanta noo dadabuudhayee

Waa inaan is difaacnuu

Waqtigoodi ku daahayoo

Qabiil bay dugsadaanoo

*ha dabbaalin = ha  
celin,  
degsanayso =  
xasilayso*

*dayacmin = baylihin*

*hallawsan = habawsan,  
lunsan*

*is-ku-duula = is-  
weerara*

*ridqaa = burburiyaa*

*dadabuudhay =  
daandaan saday*

*difaacno = iska-  
celinno*

*daahay = ku  
habsaamay, ku  
dhammaaday*

Nabadda way ku duryaanoo

*duryaan = duribay ka  
qaadaan, way ku  
bukoodaan*

Masiibadii derderraydee  
Dam-ka-siisay Afriikana

Waxay soo debashaysaba

Tanay maanta duqaysoo

*dabashaysaba =  
gaangaanbisaba  
tanay = halkanay  
duqaysay = ku  
habsatay*

Jabbuutaa u dambaysaye

Ilaa ay degayaanooy

Dadnimadooda gartaanoo

Daacad laysku habeeyo

Dib inaan u cesho,

bal maxaad ugu diidi.

II.) Haddaanay dawlad ahayn

Ninkii diida wanaagga

Way ku duugi lahayde

Waxa ay ku dul-qaadan

Dadkeeday jeceshay

Nabad ooy ku daryeeshee

Dedaalkeed ku jirtaaye,

Ha u soo degdegtoo

Ha dawayso xumaantee

Ha dabbaaline daa

Abaartii iyo diiftiyo

Dakharkii iyo dhiiggii

Wixii gaadhey dalkiiyee

Magaalooyin dunshey

Nacas aan damqanayn iyo

*daryeel- dayac- tirto*

*damqanayn = jiidh-  
naxaynin*



Doqon baan garanaynne  
 Dadku way ogyihiine  
 Ha usoo degdegtoo  
 Ha dawayso xumaantee  
 Ha dabbaaline daa ...  
 Barbaartaa u duqawdoo  
 Dadweynaw dhega-beeloo  
 Ubad daa'imayaa  
 Daraaddeed gam'i waayoo  
 Dhallintii da'yarayd baa  
 Daraaddeed indha-beeshoo  
 Dadkanaa u harraddane  
 Ha u soo degdegtoo  
 Ha dawayso xumaantee  
 Ha dabbaaline daa ...  
 Ha ku degdegin ...  
 Halkeedaa ku dabbaal !

*duqawdey = gabawdey*

*harraaddan = u oomman*

II.) Dadku wuu u bukaayoo  
 Ummaddaw dacatayoo  
 Dumarbaa u galgaaloo

*galgaalay = tebiyey,  
 shinkii ay ubad dhalii  
 lahaayeen seegay  
 damalloosho = loo  
 gangaamo,*

Aroos loo damalloosho  
 Dhallintaa muddo diiddoo  
 Daraaddeed uga soomaye  
 Ha u soo degdegtoo  
 Ha dawayso xumaantee  
 Ha dabbaaline daa.

*soomay = saahidey*

I.) Waxan uga dan-leeyahay

I.) Waxan uga dan-leeyahay  
 Diirka aan ka qaadee

*diirka = dubka  
 qaado = rogo*

Dugsi nabadi, inay tahay  
 Dagaalkuna qudhmuunyahay  
 Waa inay dareemaan  
 Doodaha qabiilkiyo  
 Dakanada dhexdoodana

*dakanada = godobta  
 aanadeeda*

Waa inay daweeyaan  
 Adduunyada dhammaanteed  
 Nabad baa u udubee  
 Waa inay ogaadaan  
 Ololaha qabiilkiyo  
 Isku wada il-jebintay

*udub = tiir*

*il-jebin = sangasho,  
 khaakhaayir  
 baahnayd = tooggo-  
 qabtey*

Afrikadu ku baabnayd

Waa inay illoobaan  
 Dawladaha badanee  
 Calankoodi duubee

*duubay = laabay,  
 dhacay*

*dooryaan = diqsi  
 waaweyn*

Dooryaanku buuxee

Dambaskiyo dirxigu hadhay

*dirxiga = cayayaan  
 yaryar oo uskagga ka  
 dhasha*

Dad wixii kasii jirey  
 Daacuun calooliyo

*daacuun = cudur  
 calooleed dilaa ah  
 dawikhis = wareeris*

Gaajadu dawikhisee  
 Is-ku wada dambaabee  
 Dubanaaya maydkee  
 Sharafkoodi dumiyeey  
 Nimacadoodii daadshee

*dambaabay = gefey*

Magacoodii doorshee  
Dadnimada ka baxayee  
Dugaagoobey ee lumay

*dugaagoobey =  
bahaloobey*

Wixii dilay ma moogee  
Waa inay dareemaan  
Ilaahbaa dul-qaadloo  
Cadhadiisu darantoo  
Halka uu dabka u shido  
Ninna kuma dambeeyoo  
Dubbihiisa kama baxo  
La iskama difaacee  
Intaan laysku wada darin  
Dembiyada xumaantiyo  
Qabiilada ha daayaan,  
Isku duubnidooday  
Dalka iyo dadkoodiyo  
Midnnimada la daayacay  
Waa inay daryeelaan  
Diintana adkeeyaan  
Nabaddana ku daaqaan  
Waa sidaa dantooduye  
Weli miyey dareemeen

*dambeeyo = hadho*

II.)Maanta waa la dareemoo  
Samadaan dusheenniyo  
Degelkaaba u baahane  
Dawladda waa dawadeeda  
Ummadda waa dawadeeda  
Dhulka waa dawadiisa  
NABADDU waa dawadeenna

TIX  
*WAAJIB*

I.)Qof kastoo wax-garadaba  
Waddankiisa hooyeed  
Waajibkuu ku leeyahay

*waajib = xaq*

II.)Kama weecanaynee  
Hawsha waan wadaynaa

*weecanayno =  
leexanayno*

I.)Dunida markuu  
weynaheen  
Rag buu ku wareejiyoo

*ku wareejiyey = u  
dhiibay  
dego = yaallo,*

Midiba waaxduu ka dego  
Waa kaa hawshiisa wada  
Indheer-garatada waddanigaay  
Wacdigii diintuu Alluhu

*wacdiga = waanada  
diiniga ah*

Dadkiinna ku waansha yidhi  
Maxaad uga weecateen?  
Inaad waddo fiicaniyo  
Wanaag iyo khayr fartaan  
Maxaad uga waabateen ?  
Wareerkani lagu jiriyo  
inaydin ka weecisaan  
Maxaad uga waabateen ?

*waabateen = gaabsateen  
hakateen, joogsateen*

III)Waaxyaha haddaan  
nahay  
Wixii nala gudboon iyo  
Waajibkii ma seegine

*ma seegin = ma  
dhaafin, ma baal marin*

Kuwa weriya aadmiga  
 Walaalnimada farayee  
 Ku wacdiya midnimadee  
 Ka wacdiya qabiilkee  
 Uga diga waxyeellee  
 Waddadaw tilmaamee  
 Wax-u-sheega baan-nee  
 Qalbi waano deeqdiyo  
 Dad wax-qaadan baan jirin  
 Waa beryiyo habeeniyo  
 Waqtigii an joognaba  
 Qofna waari maayoo  
 Wadki deyni maayee  
 Wuu idin hallaynnoo  
 Wehel ma leh ibliiskuye  
 Ka soo weecda baan nidhi  
 Colaad laysku wiiqana  
 Wanaag laguma gaadhee  
 Waar daaya baan nidhi  
 Sinnaan inan ku waarniyo  
 Waxa fiican nabaddee  
 U soo weecda baan nidhi  
 Waayeel gaboobiyo  
 Waaya-arag dardaarmiyo  
 Aqoon-yahan waddaniyiyo  
 Wadaaddada dhammaantood  
 Wacdigiyo kitaabkiyo  
 Warka waan u sheegnoo  
 Waxba kama hambaynnine  
 Qalbi waano deeqdiyo  
 Dad wax qaadan baan jirin ..  
 Wax-ka-siya dadkaa jira !

*weriya = tebiya*

Waqti aakhir-sebenoo  
 Weliyada sirtoodiyo  
 La waraysan diintoo  
 Weynaha la caayoo  
 Waalid lala collooboo

*waalid = aabbo iyo  
hooyo*

Walaal kala dheqaaqoo  
 Kii wax ad u sheegtee  
 Wanaaggaw tilmaantaa  
 Waran kuu afaystiyo  
 Waxaa-soo dhan baa jira.  
 Waqti aakhir-sebenoo  
 Xumaa lagu walaalyoo

*tilmaanto = astayso  
afaysto = listo*

Baaddil loo wan qalo oo  
 Dulmi lagu werdiyo oo  
 Xaqa laga warra'yoo

*lagu walaalyahay = la  
isku raaco  
baaddil = xag-darro  
dulmi = xag-duudsi  
warra'o = la iska  
indha-tiro*

Runta laga walloodoo  
 La wadaago beentoo

*walloodo = guulo  
dido- saso, bayr laga  
qabo*

Laga dido wanaaggiyo  
 Waxaa soo dhan baa jira  
 Dad wax qaadan baan jirin,  
 Haddii weyne nagu simo

*nagu-simo = nolol nagu  
gaadhsiiyo*

Waaxyuhu ma daaline  
 Hawsha waan wadaynaa

*wadaynaa =  
socodsiinaynaa*

Indhii waxay yidhaadeen  
 Indhaa wax an ku aragneen  
 Kaga baydhno ooddee  
 U gargaara ruuxiyo  
 Waxan nahay ilayskii

*ruuxo = nafta  
ilays = iftiin, nuur*

Aqoontii dhulkeennee  
Dadku eeganaayiyo  
Waxan nahay abwaannada  
Maansada abuuree

*abuura = sameeya,  
curiya  
u horseeda = ku ku  
haga*

Irdihii la marayiyo  
Ambadii la joogaba  
Dhaqankiyo asluub wacan  
Laga eegto baan nahay

*irdihii = albaalkii  
kadin, illin  
asluub = anshax, edeb  
laga eegto = lagaga  
daydo*

Muusikada ugbaadka ah

*ugbaad = cusub,  
casriga  
aglool = unka, curiya*

Kuwa soo agloolee  
Ereyga u sameeyee  
Kolka ay idleeyaan  
Ididdiilo wacaniyo

*ididdiilo =  
yididdiilo) rajo*

Heesaha ammaanta leh  
Ummaddawgu baaqee  
Soo abaabulaan nahay ...;  
Erey-shaxan la sheegiyo

*erey-shaxan =  
halabuure*

Suugaantu idilkeed  
Aqalkay u hoyatee  
Laga soo unkaan nahay  
Indheer-garadka dunidee  
Waxa dhaca og-baan nahay  
Kuwa arad barwaaqiyo  
Masnadii abaydina

*unko = curiyo, bilaabo  
  
arad = arli, dhul  
masno = dhul biyo leh  
abaydin = ilmaha  
naaska hooyadii gabay*

Illinkay u mari layd  
Ummaddaw tilmaamee  
U aaneeya baan nahay

*u aaneeya = farta ugu  
fiiqa*

Aqoon-yahan waxaan nahay  
Dadka kii ambanayiyo  
Ummaddooda uga diga  
Irgin lagu jabaayiyo

*ambanaya = lumaya*

*irgin = geed caano leh  
oo sida ciinka u baxa  
jabaayo = halaagmeyo*

Alhuumada qarsoon iyo  
Halkay odaxdu taallee  
Inniqday dareemaan  
Gabaygiyo araartiyo  
Ku asteeya heestee  
Aadmiga faraan nahay ...  
Uugaanka joogiyo  
Aafiyo belaayada  
Kuwa uriya baan nahay ...  
Kuwa ugu il-dheeree  
Kii eeqa-beeriyo  
Eexiyo qabiil wada  
Uubaha ka qodayiyo  
Kii uurka timo ku leh  
Ugu jira olola-xumo

*uugaanka = sawaxanka  
aafu = belaayo*

*eeqa-beer = hiirtaanyo  
eexasho = qaraabo kiil  
uub = dalluun, hataq*

*olole-xumo = ficil  
xumo*

*iimaanku = damiirku  
qoonmay = dhaawacmay  
ammin = waqti xun  
duura = wareega*

Ka iimaanku qoonmee  
Ammin-qayska duuree

Waa hore la iibsaday  
Af-miinshaarka loo diray  
Inu uunka kala dilo

*uunka = dadka,  
khalqiga*

Intaasoo ujeedda leh  
Kolkaan aragnay gebigood  
Kama aammusnaanee

Kuwa uunka weriyee  
Ummaddooda shiriyee  
Intaan ololku dheeraan  
Ayaantiiba toban jeer  
Ogeysiya baan nahay ...  
Dad la eeday weeyaan  
Markaan u andacoonnee  
Agtayada ay joogaan  
Way nala ilmeeyaan  
Berrina way illoobaan  
Ummaddii arladatani  
Waxaan nidhi idaylkood  
Nabad ka amban-maynee  
Yaan laga irdhoobinoo  
Laga uur-xumaannine  
Yaan laga abaal-darin  
Wuxuu noole aammino  
Lagu urursanaadaa  
Lagu gam'o idaylkeed  
Arliguna ku negi yahay  
Nabad baa u udubee  
Ayaan laga abaal-darin  
Aan ilaashannaan nidhi ...  
Dad la eeday weeyaan  
Odhaahdaan farayniyo  
Ereygaan nidhaahnaa  
Malaha wuu ag-marayaa ...!

*aammusnaanno =  
gaabsanno*

## HEES YIDIDILO

Noolaatay yididdiiladii  
Nuxuskiina guuryoo

*nuxuskii = rucdigii,  
saxalkii  
naaf = cirir, xiddig*

Naafkiyo xiddigihii  
Waxay ag-degeen negaadoo  
Nasiibkeenni baa yimidoo  
Waxaan ku heshiinney  
nabad  
Nabadeey, nabad

Negaatay arrinteenni  
noloshoo  
Ka neefsaday xumaantoo  
Nuurkiyo wanaaggii  
Dayaxay ku nabanyiin

*neefsaday = nastay  
ku naban = ku dheggan*

Nasiibkeenni baa yimid  
Waxaan ku heshiinney  
nabad  
Nabadeey, nabadeey,  
nabadeey, nabad

*nasiib = ayaan*

Naftu waxay jecleyd baa  
Naxligii ka qaadmoo  
Loo helay naruuroo  
Waxan naawilayniyo  
Nasiyaay waxaa timid

*naxli = uur-xumo, wahab  
naruuro = rajo,  
yididdiilo  
naawilaya = yu'anaya*

Nabaddaan sugaynee  
Nasiibkeenni baa yimid  
Waxaan ku heshiiney nabad  
Nabadeey, nabadeey,  
nabadeey, nabad

GABAY  
*HAYB AADMI*

Haybtiisa aadmiga markaan  
Dul iyo hoos eegay  
Horraysiyo dambaysaba  
markaan Hidiyey taariikhda  
Haaneedka koodii qabtaba  
Kuma hanaaqaane  
Afriikana hoggaan kii qabtay  
Hanaqa gooyaane  
Inay duul habaar qaba  
tahaan Hadal ka taagnayne  
Midnimiyo intaan lagu  
heshiin Halab anooskeeda  
Hirdidiyo intaa labada gees  
Laysku wada heeri  
Intaad godobta hoostaada  
taal Ku hindisoonayso  
Hengel baad ka xidhantiin  
Inaad horumar gaadhaane  
Afrikaay inaad libin heshaan  
Haw haloosiyine  
Intuu kala halleeyuu hullada  
Nacab ku heeraayo  
Huluulaha intuu kuugu jiro  
Horror ku gaadaaya  
Inta uu iskiin wada horgeyn  
Uudin kala heegi  
Hebel hebel intay taagantee  
La is-huruufaayo

*dul = kor, guud*

*haaneedka = naaska  
hasha  
hanaaqaan = xumaadaan*

*hanaqa = rubadda*

*heeri = dhaawicin*

*hindisoonayso =  
hammiyayso*

*hengel = hengef, asay  
agal*

*haloosiyin = haw  
fadhiyin, ha sugin*

*huluul = dhufays  
horror = balal*

*heegi = ilaalin*

*huruuf = canaan,  
hatidaad*

Hagoogtaa intaad leedihiin     *hagoog = weer, hullaab*  
Sida haweenkiinna  
Afrikaay inaad libin heshaan  
Haw haloosiyine  
Hengel baad ka xidhantiin  
inaad Horumar gaadhaane!

GEERAAR  
*DUCO MAA LAGU EEGAY*

Afriki way degi weydoo  
Ma taqaanno danteedoo  
Odayaalna ku daalee  
Inuu Daayin gargaaro  
Duco maa lagu eego?

*duco = Alle Bari*

HORTEEN BUU DAD KU  
HOOGEY!

Dagaalkaa lagu riiqmay  
Dunidoo dhanba gaadhay  
Damacaa bogsan waayee  
Lagu daari hallaabee  
Beelo ay ku dumeen.  
Madaafiicda dayaantiyo  
Rasaastaa dananaysiyo  
Digniin laan warankaa  
Layska soo darbanaayo  
Hubka kii u dambeeyee  
Laysku soo debesheeyey  
Layskama soo daldalayne  
Rag dammaan iyo xooglaa  
Arrintaa ka dambeeyey...  
Nacabkii ku dagaayee  
Daldaloolka dhexdaadiyo  
Daranyadaada ogaana  
Abidkii kuma daynnine  
Duullimaadka xaggeennay  
U diyaarinayaanoo

*riiqmay = naaftay*

*dayaanta = onkodda*  
*dananaysa = reemaysa*

*darbanaayo = ridayo*

*debesheeyey = buuxiyey*  
*daldalay = daba keenay*  
*dammaan = raasamaal*



Duurka loogu jiraayoo	<i>duurka = ayda</i>
Laynoogu soo durkayaa ...	<i>soo durkaya = soo dhowaanaya</i>
Maskaa reer ku duubanee	
Innag daadegi waayey	<i>daadegi = dhaadhici waayey</i>
Illamaa derbi-dheere	
Daaraddaynoo dhacadiidaa	<i>daaradda = albaabka . hortiiisa, qolka Dhacadiida = jiifa</i>
Daaqayee hilibkeenna	
Dhiiggeenni ku durduurtee	<i>durduurtay = ladaabtay</i>
Dibbirayee ka dhergaayana	<i>dibbiray = ka hirqaday</i>
Dawadiisi la waayoo	
Looma daafad helaayo ...	
Daadkii qaaday Lamuumbiyo	
Intii geesi la dooxayna	
Diiwaan baan ku hayaayoo	
Dayfe Fayte Sakaab	
Isagoo weji duuban	
Kooraan baa dallacaayoo	<i>kooraan = quwadda laydhka</i>
Dab-cas baa ka baxaayey	
Ina Duurin Xandaadna	
Dubbihii lagu jiiidey	<i>jiiday = lagu dhuftay</i>
Naxdin baan digriyoo	<i>digriyey = xadreeyey, gariirey</i>
Diidayoon dhici gaadhey	<i>diiday = ciiray, dhacay</i>
Dembigii lagu haysteyna	
Sirtayadaad dad u sheegtayoo	
Diirad baan kugu hayney	<i>diirad = qalab aragga waxa fog soo dhaweeya</i>
Ayaa loo diley kaana...	
Ina Dooddi Mirjaaniyo	

Daba-yeyle Xangaysana	
Daartii ay geleyeenbaa	
Loogu daatay habeenoo	<i>daatay = loogu dhacay</i>
Dadkiinnaa shiriseenoo	
Dawga toosan tusteen	<i>tusteen = u astayseen</i>
Ayaa loo dilayey	
Odaygii Darraqoo iyo	
Ina Duubane Muusena	
Dalluuntay u qodeenoo	
Wiish ku daadejinaayaan	<i>wiish = qalabka wax lagu dallaco</i>
Daaqaddaa ka arkaayey	
Dagafaadhi Rayaaliyo	
Ina Daan Madaxloona	
iyagoo degdegaayoo	
U sii jeeda dalkoodaa	
Diyaaradday la socdeen	
Daab gantaal lagu jiiidey ...	<i>gantaal = gammuun</i>
Ina Daaniye Gaydhena	
Dugsi kii-ka-yaraayee	
Dayra-dayro dhashay	
Meel daraaf ah dhexdiisay	
Dab intay ku shideen	
Ku dubteen hilibkiisaa	
Geesigii doorka ahaayee	
Dhallintaw da'yaraayee	
Dadkaba kii u dhowaayee	
ku barbaaray docdoodaa	
Diley oo kaga xaabay	<i>kaga xaabay = qudha ka jaray</i>
Duqii xeebta gelaayeyna	
Degmadiisa dhexdeediyo	

Daaraddii u lahaabaa  
Dadkiisii layska horgeeyoo  
Dab weyn baa ka baxaayoo  
Daayin baa bixiyee  
Dirqi buu ku sigtay  
Afrikaay kala daadsan,  
Kala daadsan  
Kuma duushid shisheeyoo  
Nacabkaa darban mayside  
Walaalkaa dilmadiisaad  
Middi yaroo daxal leh  
U soo duuban taqaanne,  
Inta aan nin damiir li  
Degmadaada u joogin  
Sheegan maayo dirkaaye  
Dulligaa ku ekoow

*dirqi = in yar*  
*kala daadsan = filiqsan*

*daxal = miridh*

*dirkaa = hiddahaa abkaa*

Hees  
*GODOB YAREEY*

Waqti gaaxsanaayoo  
Godladaa inoo yimid  
Gugaa hooray iyo  
Xareed galacleh baa  
Barwaaqada an gaadhnee  
Inta geelu noo dhalo  
Gaawaha ka maallaa

*hooray = da'ay*

*gaawaha = dhiil,*  
*hadhuub*  
*gorfaha = dhiil*

Gorfaha laga buuxinnoo  
Gunta weelka loo qodi  
Guushaa an haleellay  
Rag garaad leh iyo  
Guddibaa inoo kacay  
Geesigu ka madax yahay  
Heedhe godob-yareey  
Galool iyo godob-yareey  
Alla galool iyo  
Godob-yareey  
Guubaabadeenniyo  
Guushaa an haleellay  
Ku geeraarnay libintoo

*haleellay = taabnay*  
*ku geeraarnay =*  
*farxad heesnay*

Nabad baan ku geeraarnay  
Godob-yaray  
Heedhe godob-yareey  
Galool iyo godob-yareey  
Alla galool iyo  
Godob-yareey

TIX  
JACBUR

Waa jiipto maansadu	
Jacbur iyo murtiba loo	<i>jac-bur = isku-dex-jir</i>
Way kala janjeedhaa	<i>janjeedhaa = kala maroorta, qal qallöocan</i>
Jirjirkay ku socotaa	
Jafaq iyo dixbay mari	<i>jirjirka = dhabarka, kala qalliban</i>
Sida looga jeelbaxo	<i>jeelbaxo = looga haqab beelo</i>
Markan jeedalkaw lulo	<i>jeedalka = shaabuugga, subbitoor</i>
Jaadhaha adkaystoo	<i>jaadhaha = xakamaha</i>
Ninba meeshu jecelyahay	
Ha la jaah-wareeroo	
Jeebadaa ka buuxsada	<i>jeebadaa = jeebabka</i>
Guurtida aqoontee	
Hawlaha gorfaysee	<i>gorfaysa = ka baanta, u guddiya</i>
Ku gardaadda calankee	
Gaashaanka adagiyo	
Gadh-caddaadiyaashiyo	
Odayada guddiyayee	<i>guddiya = geed fadhiista, gar-gooya</i>
Geedaha ka taliyoow	
Ha gadhoodho nabadduye	<i>gadhoodho = sal-dhigto</i>
Gunta weelka uga tola	
Dibad-galaha aydiyo	<i>ayda = caynta</i>
Ku dib-jirey dhufayskee	<i>dhufayska = gabboodka</i>
Dalka iyo dadkiisiyo	
Daafacaaya qarankoow	<i>nin daran = nin adag</i>

Inkastood nin darantahay	
Dawo ma leh colaadduye	
NABAD baa dalka u roon ...	
Dumarkiyo caruuraha	
Loo diray qabiilkiyo	<i>loo diray = u darban, ku foogan</i>
Qolo-qolo u dirirkee	<i>dirir = dagaallan</i>
Is-qabyaaladeeyee	<i>dan-seeg-ku habsaamay</i>
Ku dan-seegay qaladkee	
Qof hadday is-diideen	
Nala daya aqoonnee	
Ku daldalaya shiidkee	
Ku degdega xumaantoow	
Haddii uu dagaal dhaco	
Idinkaa u daranoo	<i>u daran = u liita</i>
Is-difaaci karinoo	
Waraabaydin daaqiye	<i>daaqi = cuni, ruugi</i>
NABAD baa dantiinna ah ..	
Dhallin-yarada diintiyo	<i>dhallinta = barbaarta</i>
Duminaysa dhaqankee	
Madaxooda daartiyo	
Ka samaystay dabaqee	
Dembiyada u waaweyn	<i>ku dabbaalanaysa = ku jirta, gelaya</i>
Ku dabbaalanaysaay	
Dhulka aad dul-joogtaa	
Inta aanu kula degin	<i>kula degin = kula go'in</i>
Aan idiin dardaarmee	
Dariiqii Islaamkiyo	
NABAD baa dantiinna ah	
Ninka loo dulbaaxshee	<i>dul-baaxshay = shidheeyey</i>
Dawlad u shaqeeyee	

Dadka looga roon-yee  
Kolba hawsha loo diro  
Inuu dabada haystuu  
Daacad u habeeyuu  
Dar ilaah ku maamulo  
Lagu siiyey derejee

Hadba sii dallacayeen  
Laga daba shaqaynee  
Siduu doono yeeleen  
Danihiisa mooyee  
Waxa kale damqaynee  
Dulmi iyo dhac badiyee  
Marka uu duddubiyuu  
Hadba daan ka buuxsado  
Dibbirada la sara kaco  
Hadba laba-dubleeyee

Lugta dalabta lee godan  
Kolba meel ku deyayoow  
Haddii anad dareemayn  
Wixii adiga kuu dana  
Dawladaha agteennee  
Dabku uu ka hurayiyo  
Dilka iyo xasuuqiyo  
Daaraha burburay iyo  
Daadduunka qaxa iyo  
Dumarkiyo carruuraha  
Daranyadu ka dheregtiyo  
Intay dibu dhaceen eeg ...  
Dood kalena waxay tahay  
Dalka hooyadaa iyo

*dar ilaah = hor alle*  
*derejo = martabad*  
*garaaddo*

*dhac = xatooyo, tuugo*  
*duddubiyoo = laba liqo*

*dibbirada = dheragga*  
*laba-duble = laba*  
*wejiile*  
*dalbaha = wegdaaha*  
*ku deyaya = ku eegaya*

*hurayyo = baxayyo*

*daranyo = darxumo*

Durdurrada nimcada-lee  
Dix waliba ka yimidee  
Kugu soo dindimayiyo

Deeqdiyo barwaaqadaad  
Weligaa daldalateed  
Cidi kugula doodayn

Haddii aad ku dacaddido  
Rabbi Daayin weeyoo  
Wuu kugu dullaaynoo  
Nabsi waa ma daalee  
Isagaa ku dilayoo  
Deebaaq qadhaadh iyo  
Dacar baad qudhqudhinnoo  
Dufan yeelan maysidoo  
Duudkaad ka hoolmiye

Doqonniimo jeceloow  
Aan kula dardaarmee  
NABAD baa dantaada ah ...  
Duufaanka yimidee  
Dalka maanta joogiyo  
Dibjirka iyo tuuggoow  
Dalam-dalamta suuqiyo  
Waxa aad dudubisaan  
Haddii aanad daynayn  
Waa dabar-go'iinnee  
Aan kula dardaarmee  
Nabadbaa dantaada ah  
Daayaca miskiinkee  
Dibadda iska seexdee

*dix = doox, tog*  
*dindimaya = durduraya,*  
*sida biyaha u socda*

*kugu la doodayn = kugu*  
*haysanin*  
*dacaddido = tacaddido*

*dullaayn = casili*

*deebaaq = waabay, sun*  
*qudhqudhin = dhami*  
*dufan = dux*

*duudka = dusha, oogada*  
*dhabarka*  
*hoolmi = muldhan murxi*

*dibjir = biyaala-suuq*

Cidi ay durrayn iyo *durrayn = waxyeelin*  
 Habar daasad sidatoo  
 Daaduun ku timidoo *daaduun = doolqaad*  
 Doonaysa calaf<sup>o</sup> *calaf = risiq*  
 Loo daro bariiskoo  
 Dar ilaah u dheregtaay  
 Nabad baa dantiinna ah ...  
 Baayac-mushtari laha  
 Cunto aan bislayn iyo *bislayn = aan, la karin*  
 Baandheeya kaydkee *baandhee = shaandhee*  
 Hadba sicirka beenta ah  
 Biirbiirsanaayee  
 Waagii bariistaba *waagii = gabbalkii*  
 Boqol nagu dallacayee *dallaca = kordhiya, ku*  
 Buqshadeeya lacagtoow *siyaadiya*  
 Hadday belo timaad galab  
 Baylbaad hunqaaciye  
 Iyadaad ku baridee  
 Bisaddaad ka carariye  
 Nabadda u balaasee *balaasee = meel u*  
 Dahabka iyo doollaar *samee, u meel day*  
 Ninka kala debberayiyoo *debberaya = kala*  
 Kan damaarka haystee *minawaraya*  
 Waqtiguna u dararee *dararay = u hagaagay,*  
 Duraysaha ku noolee *wax siiyey*  
 Daacdaacsanaayoow  
 Haddii u dagaal dhaco  
 Daayerka cooflaad  
 Dibadaha la geliyoo *coof = bulbul*

Duurka aad la seexane  
 Duunyada xaggeed dhigan  
 Balan kula dardaarmee  
 NABAD baa dantaada ah  
 Daabulada jaadkiyo

Daammiri ku qooqaha

Doodaha mijilisyada

Dacaayado ka fidiyaha  
 Ummaddaysku dirayoow  
 Dugsi maleh qabyaaladi  
 Waxay dumiso mooyee  
 Adna kuma degeyside  
 Weligaaba doodoo  
 Waa lagu dareemee  
 Intaan daadku kula tegin  
 NABAD baa dantaada ah

Dibadaa u dhoofaha  
 Hawlaha dalkiisiyo  
 Degmadiisi gabayee  
 Inta uu durduro tegey.  
 Dal shisheeye joogee

Soo dira cajaladaa  
 Ku dabbaqan qabiilkee

Dabka lololinaayoow  
 Waxba kaama daahnoo  
 Cidi kuma dulmaysee

*daabulo = xagal,*  
*jawaan*  
*jaad = qaad*  
*daammiri = qaadka isku*  
*khamiray*  
*mijilisyada =*  
*fadhiyada ragga*  
*doodaha = muramaha*

*kula tegin = ku qaadin*

*gabay = hagraday*  
*dal-shiisheeye = dal*  
*qalaad*

*ku dabbaqan = ku*  
*saabsan*

*daahma = qarsooma*

Adigaa dembiga lee  
Adna demi afkaagoo  
Iska imo dalkaagoo  
Ninna kuuma diidina  
Nabadbaa dantaada ah

*dembiga = gardaarrada*  
*\*demi = aammusii*  
*imo = kaalay*

Hadal lagama daalee  
Dusha sariyo hoostaba  
Dawladi waxay tahay  
Iyadaa dadkeedaba  
Isku soo didiminoo

*sare = kor, dul, guud*

In la kala dambeeyiyo

*didimin = didin ku  
keeni*  
*kala dambeeyo = is  
tix-geliya*

Dedaal iyo is-maqal iyo  
Muruq laysku daro iyo  
Daacad u shaqayn iyo  
NABAD baa danteenna ah  
Waxba yaan ku daaline  
Dadka lala hadlaayiyo  
Shicibkii dalweyniyo  
Intay mari dabayshiyo

Dunidaba ku nooleey  
Doonaa ha diidoo  
Samada ha duqeeyee  
Ha durduro dhammaystee  
NABAD baa danteenna ah

*samada = cirka*  
*durduro = biqlo,  
dhababaco*

Waxba kaama daahinoo  
Runta waa dillaacshee

*dillaacshey =  
caddeeyey*

Afrikiyo dirkeeduba  
Waa dawlad dhegaloo  
Haddii aan alle u deyin  
Maansadan damiirka li'  
Kama daadegeysee,

*dir = jinsi*  
*dhegala = dhega xidhan*

Arrimaha u daranee  
Qarannimada dumiyeey  
Dawladaha rogayee

*daadegeyso =  
dhaadhacayso, duxayso*

Dalku qaadi karin iyo  
Waxan idiinka digayee  
Ha la daayo leeyahay  
Ma oggola danaystiyo  
Kuwa lagu dillaasheen  
Weligood dawoobayn

*rogaya = gembiyaya,  
kambalaya*

*digay = waaniyey*

*dawoobayn =  
waantoobaynin*

Alloow naga dulqaadoo  
Deeqdaada nagu sii  
Ku dabbaalay hadalkee

*ku dabbaalay = ku soo  
xidhay*

*ku dara = biiriya*

Bal ku dara intiinoo  
DUCADIINNA Aammiin

Hees  
*DUGSI NABADEED*

Nabaddan lagu wada degaa  
 Dan bay noo tahay dadoow  
 Nin duunyo leh iyo sabool  
 Duq iyo sebi aan wax garan  
 Derbay uga tahay colaad *derbi = gaashaan*  
 Weliba isku duubnidiyo  
 Sinnaantiyo daacaddaa  
 Dunidu niagu jecshahee  
 Dalkeen ku ammaanahan yahay  
 Dugsay uga tahay qabiil *dugsay = gabbood*  
 Waatii doondooneested  
 Wax badan loo daalayee  
 Habeen loo dibad dhaxee *dibad-dhax = dibjire*  
 Haddii daayin keenayuu  
 Dadkeenu heshiis u yahay  
 Ducooy aammiin haddeed *haddeed = immika ka dib*  
 Weliba aan kuu digee  
 Dardaaran rogoow iga qora  
 Dirqaa lagu soo helee *dirqi = si adag*  
 Ayaanay dib nooga noqon  
 Ayaa daayac aanay mudan  
 Shisheeyena dumin karoo  
 Qof daallini soo dhexgalo  
 Ma doono nin noo darnaa *darnaa = xumaa*  
 Inay nabaddeen degtee  
 Haddeed daranyada ka dhaba *daranyo = daayaca, baylahda*

Hees  
*ISHAARO*

Burdaha dayrkaan akhrinay  
 Ducaa lagu biiriyoo *biiriyey = kordhiyey, daray*  
 Waxaan ku bilawnay hadal  
 Bismillahi, bismillaahi  
 Bismillaahi  
 Banka sheekha yaalliyo *yaalla = deggan, jooga*  
 Weliyadi baddiyo  
 Buuraha fadhiyeybaa  
 Boodhka u fadhiistoo  
 Ishaaro ku baadi-goobay  
 Culimada bariisada *bariisada = barqada, subaxa*  
 Bunka loo saloolee  
 Boqol iyo kun gaadhaa  
 Burhaantoodi raacshey *burhaan = barakada, karaamo*  
 Billaawe cad baa la rogey  
 Booc iyo dhuurbaa la shiday  
 Wanbaa badhi looga jaray  
 Basraay timmir baa la siiyey  
 Waxay ka bukhuuriyeen *bukhuuriyeen = jinni-bixin ka shideen*  
 Jinkii beerkeeda galay  
 Geesiyaal an biqinoo  
 Baydh-baydhiin baa *baydh-baydhiin = leexleexan*  
 Inta beeshayadan  
 Laga soo baxshaa *beesha = degmada*

Bayaan loo dhaariyoo  
Kitaab loo baaciyoo  
Baabacada loo saaray  
Rag baa u baqoolayoo  
Sufraar biyo loogu shuboo  
Bil iyo sannadaw maqnaa  
Belelkiyo dhibtii  
Kuwii u badheedhayoow  
Waad noo baxdeen  
Baadidii maqnayd  
Kuwii soo baajiwoow  
Waad noo baxdeen  
Bukaankiyo xanuunkii  
Haddii laga bogsaday  
Geesiyada biloow  
Ballantii ad qaadeen  
Waad buuxiseen  
Wixii naga ba'naadaba  
Haddii laga baanayo  
Geesiyadii billaayoow  
Ballantii ad qaadeen  
Waad buuxiseen  
Maxaa baahi loo qabey  
NABADDA  
Maxaa baahi loo qabey  
NABADDA  
Waa barwaaqadeenna  
NABADDU  
Waa badhaadhaheenna  
NABADDU  
Waa bariisigeenna  
NABADDU

*baqoolay = bixitimay*

*sufraar = sibraar*

*belelkii = kulaylkii*

*baajiyoow = soo heloow*

*bogsaday = dawoobay*

*ballantii = axdigii*

*buuxiseen = oofiseen*

*ba'naada = xumaada*

*billaa = wacnaa*

Kaalaya u soo baxoo  
Baallaha qabtoo  
Aan bariidinno NABADDA.  
Aga diga  
Irgin lagu jabaayiyo  
Alhuumada qarsoon iyo  
Halkay odaxdu taallee  
Inniqday daree

*baallaha = hareereha*

*bariidinno = salaanno*



QAYBTA LIXAAD

MAANSO QOBONA AH

Hees  
*ASKARIYOW*

*I*

Ma og-tahay askariyohow  
Inad tahay itaalkii  
Gobanimada ugubiyo  
Calankiyo arladatani  
Kii ay irkanayeen

*irkanayeen =  
cuskanayeen*

Inaad tahay awooddii  
Lagu aarsanaayey  
Ma ogtahay askari-yohow  
Aasaaski nabaddiyo  
Abaabulihi guushiyo  
Amba-qaadki noloshiyo  
Eebadii dagaalkiyo  
Indhihii inaad tahay  
Ma og-tahay askari-yohow  
Adduunyada dhammaanteed

*udubka = tiirka  
aarmi = ciidan*

Udubkeedii baad too  
Haddaan aarmi jirin  
Odayada gaboobiyo  
Ubadkiyo haweenkiyo  
Ooryuhu ma seexdeen  
Ifka intaan ku noolahay  
Waan kuu iilanaynnaa  
Kugu uur-qabaw nahay  
Ku ammaanaynnaa

*u iilan' = u darsan*

Ma og-tahay ilwaadêey  
 Markii aan askari galay  
 Arligaynu leenahay  
 Eebbe ugu dhaartoon  
 Oogada xil-saaree ...  
 Aar lagu gam'aan ahay  
 Tiir la irkadaan ahay  
 Adeegaha dantaan ahay  
 Olol iyo dabbaan ahay  
 Onkod iyo colbaan ahay

*adeegaha = shaqaalana*

*onkod = sanqadba  
 danabka*

Addin laga baqaan ahay  
 Seef laba af-laan ahay  
 Geesi aamminaan ahay  
 Indhihii dadkaan ahay  
 Abur iyo masbaan ahay  
 Eedaadku ima karo  
 Aabbaha dalkeenniyo  
 Kuwa aniga ii talin  
 Arrimaha ka soo baxa  
 Ka adkaynayaan ahay ...  
 Ifka intaan ku noolahay  
 Een iilka lay dhigin  
 Waxad igu ogaataan  
 Ood ku uur-samaataan  
 Aarmiga inaan sido

## MAAMUUS HOOYO

Gogoshii asluubtaay  
 Gurigii wanaaggaay  
 Galladdii ammaantaay  
 Gadh-wadeenki noloshaay  
 Guulayso hooyooy  
 Geeddiga horseedkiyo  
 Garabkii midnimaddaay  
 Guubaabadii iyo  
 Gurmaddii wax-qabadkaay  
 Gaaridii ammaantaay  
 Gacantii is-raacaay  
 Galladdii adduunkaay  
 Hooyooy goshaadaa  
 Gaax laga dhergaayoo  
 Guudkaagaa hooyooy  
 Hurdo lagu gam'aa ...  
 Gebigeed adduunyada  
 Guntii laga abuurmaay  
 Hooyooy gobaadeey  
 Gambadaadu waa calan  
 Gibilkaagu waa dahab  
 Girridkaagu waa nool ...

*asluubta = anshaxa*

*galladdii = cawadii,  
 hibo*

*gadh-wadeen =  
 hoggamiye*

*gosha = dhabta, bogga*

*gaax = godol biiray*

*guntii = jirrida,  
 guridka*

*gambada = masarka*

*girridka = jirrida*

(HEES)  
*KA MARAG NOQO*

Macbuudkii i uumoow  
Dhulkaan martabada ku helay  
Dadweynii i magac-dhebey

*magac-dhebey =  
doortay,  
miiggan = cuddoon,  
luxdan*

Gobannimada miiggan  
Midnimiyo sinnaan iyo  
Inaan nabad ugu maleeyaan  
Maagaanaa  
Dadka oo masooboo  
Muruqooda maalana  
Inaan muujiyaan wadey  
Muslin daacadoo  
Maskaxda iyo maan  
Wadajiraan malaynayaa

Mataanaha is-jecellee  
Kala maarminee  
Meel wada degaan  
U malaynayaa ...

La mood, noqonba weydaye  
Badh maroor ahoon

*maroor = gurraan,  
qaldan*

Isku midab nahoo  
middi ii sitaa jira ...  
Badh malaasanoo  
Gumeysigu mudoo

*mudoo = hufiyey,  
qalday*

Isa-soo maqiiqayaa jira  
Ninka marada iyo  
Muska iigu jira ee  
Isku-diraya maatidaa  
Masiibada ka aabbo ah ...  
Ninkaan mooradaydiyo  
Malahaan u dhiibtee  
Intuu morohda ii galo  
Soo muuta-muutaynayaa  
Masiibada ka aabbo ah ...  
Miciyada sunta leh  
Ninka igu mudaayee  
Afka ii macaanayn  
Maqaar-saarka beenta ah  
Wuxu ii maldahayaa  
Miidhada ma qaatee  
Waa maya su'aashu ...  
Murtidiyo tusaalaha  
Gartan madasha soo dhigay  
madasha- golaha  
Afrikaay i maqaloo  
Adduunkoow ka marag noqo  
Macal qabadku ugu wado  
Adduunkow ka marag noqo

*muska = oodda reerka  
maatida = ma kasta*

*moorada = hantida*

*morohda = dhirta*

*maldahay = qariyey  
miidhada = quudhsiga*

(HEES)  
*WALLEE DHEEHAY*

Dhulkeennaa waxa u dhidiba	<i>dhidib = sees, gundhig, sal</i>
Dhaqankiyo hiddihu Dhabarkeeda weeyaan	<i>dhabar = adhaxda, tiirdhexaa</i>
Dhaqankiyo hidduhu Dhismaheenna weeyaan Dharkaan xidhannaa u dhabanee	<i>dhaban = qurux, bilic</i>
Dhallinyarada oo Lagu dhiirrigeliyiyo Dhayda iyo sugaggaa, U dhereg ah ... Geela dhabanka daaqiyo	<i>dhabanta = buurta sinteeda</i>
Xoolahaa u dhaqasho ah Awowgay ma dhimannine Wuxuu dhaxal iiga tegey Xeerkay dhigteen iyo	<i>xeer = qaanuun hiddood dhegaley = godobka xeerka</i>
Dhegaleyda noo taal Wallee dheehaay Ninna dhuunuu ku	<i>dhuuni = dhadhamo, hunguri</i>
Kuu dhex joogaa Ninna dhaqashuu kuug Kuugu dhiidhiyey Waa dhalasho Waa dhuuxa	<i>dhaqasho = xannaano, dhiidhi = dagaallan</i>

(HEES)  
*HIDDA RAAC*

Aabbeheen geesi buu ahaa  
Hooyadeen gaari bay ahayd  
Garbaa loo dhiibi jirey  
Dhegaleey u gaara leh  
Guddigii samayee  
Geedka u fadhiistee  
Xeerkaa gooyey buu ahaa  
Gundhatahaa faraqa-liyo  
Hugiisu go'buu ahaa  
Hubkuna gaashaanka iyo  
Golxadka iyo waranka iyo  
Dagaal gacantuu ahaa ...

(HEES)  
*ISRAA'IIL*

Israa'iil ma boodeen  
Bari-Dhexe intuú dego  
Birta kuma afaysteen  
Waa boqol yuhuudduye  
Ragbaa biirinaayoo  
Baarkaa u fidhaayee  
Barqo laguma gaadheen  
Badda kuma ciyaareen  
Barbaarrada ma laayeen  
Haddaan muruqa buuxiyo  
Isticmaar ku baal-jirin  
Baydda u garaacayn  
Waa bahal gumeystuhu  
Kala baahsanaantiyo  
Baylahdaada jeceloo  
Markuu baadka kula helo  
Kaa bogan qaniinyada  
Burka kuu dhex-gelayee  
Bushimaha dushoodiyo  
Been weeye nabadduye  
Baaruudda qiiqdiyo  
Bunduq weeye duniduye ...  
Afrikaay is-buuroo  
Isa-soo bahaystoo  
Ninka baal u leexdana

*barbaar = dhallin*

*baydda = laabta*

*kala baahsanaan = kala  
qaybsanan  
baylah = dayacan*

*kaa bogan = kaa  
buuxsan, kaa mugsada  
burka = tumbusha cawska  
ah  
bushimaha = dibnaha,  
afka baarkiisa*

Basar wax-ugu-sheegoo  
Ku ballama dagaal.  
Israa'iil ma boobeen  
Carab uma badheedheen

*u badheedh = u bax,  
babac-dhig*

Nabad kuma bariisteen  
Baydkii ilaahiyo  
Barxaddii Rasuulkii  
Waxaan loo bannayn iyo  
Bakhti kuma dhex kariyeen  
Kaare kuma burburiyeen  
Billi kuma ciyaareen  
Haddaan muruqa buuxiyo

*kaare = taangi*

*muruqa = awoodda,  
taageero*

Isticmaar ku baal-jirin  
Baydda u garaacayn  
Waa bahal gumaystuhu  
Kala baahsanaantiyo  
Baylahdaada jeceloo  
Markuu baadka kula helo  
Kaa bogan qaniinyada  
Burka kuu dhex-gelayee  
Bushimaha dushoodiyo  
Been weeye nabadduye  
Baaruudda qiiqdiyo  
Bunduq weeye duniduye  
Afrikaay is-buuroo  
Isa-soo bahaystoo  
Ninka baal u leexdana  
Basar wax ugu sheegoo  
Ku ballama dagaal

# GEBAGEBO

(HEES)

## KAALAYA BAL DAAWADA

Bandhiggii adduunyada	<i>ban-dhig = carwo</i>
Laba baratankoodii	<i>baratan = tartan</i>
Markii laysu soo baxay	
Booddadii shabeelbaa	
Ka soo badiyey aarkii	
Ninka buugga qorayee	
Barbar-joogay waa bahal	
Maroodigi bakaylaha	
Ku barraahsan jirayee	<i>barraahsan = hawaarsan jirey</i>
Laga wada baqaayaa	<i>baqaayey = cabsoonayey</i>
Inta loo badheedhay	
Baqtigiisi laga kacay	<i>bakhti = mayd</i>
Xoog baaqday weeyaan	<i>baaqday = khasaaray</i>
Sharaf bururtay weeyaan	<i>bururtay = ba'day, dhacday</i>
Nin la baabtay weeyaan	<i>baabtay = falay, marreeyey</i>
Maskax badhax ahoo	<i>badhax = khalidan, doortay</i>
Biyo lagu daroo	
Beenawdey weeyaan	
Waqtiiyohow ba'aagiyo	<i>ba'aaga = jabkaaga</i>
Hawlahaagu badanaa	
Maxaa beelo wada yaal	
Ku bariistay NABAD	<i>bariistay = kusoo toosay</i>

Bacad-horeba kowsaday  
BA'AN baa u marag furay  
Wallee lagama baxayee  
Allahayoow belaayada  
Bisinkaan ka hoos-galay

*bisinka = magaca alle*

## TIX

D)Ninka diirka madowee  
Dusha laga raraayoow  
Dirka liita een  
Dux dhadhama lahaynoow

*diirka = gibilka, jidh*

*dirka = faca, hiddaha*

*dux dhadhama = dareen  
siqsiqa*

Maskaxdiyo dareenkij  
Kii laga daboolow

*daboolay = daahay, laga  
suuriyey*

Inta laysku kiin diro  
Idinkaa is-dilayee  
Aan kula dardaarmee  
Birta daabka dheerliyo

*birta = waxa loo jeedaa  
eebada lagu diriro*

Iska-daa dhibaataada  
Adigaa dantaadii lagaa  
duudsiyee

Adduunyada bal daya sida  
Dabka loogu shidayo  
Daan-daansigiyo

*daya = eega, u fiirsada*

*daandaansi =  
gardarraysi*

Dulmigiyo colaadaha

Duullaanka xoogga leh  
Halka dunida lala tegey  
Kaalaya bal daawada  
Ummad-yahay bal daawada

duullaanka = weerarka

## Hees

II) Ninka diirka madowoow  
Daadduunka iyo  
Dulliga iyo gaajadu  
Waa dabeecaddaadee ...  
Maydka dibadda yaal  
Dhiiggii ka daataa  
Dhulkii digo-dooriyoo  
Toban dayro dhaaf

daadduunka = qaxootiga

dulliga = darxumada

digo-dooriyey = dhaaf  
rog

dayr = xilliga xaga  
iyo jiilaalka u  
dhexeeya

Miyuu roob'ku da'ayoo  
Dhulkii doog ka soo baxay  
doog- tigaad, deegaan  
Waxad daacad mooddaa  
Ninka dabinka kuu dhigay

mooddaa = u malaysa

dabinka = shirqo

Adduunyada bal daya  
Sida dabka loogu shidayo  
Daan-daansigiinniyo  
Dulmigiyo colaadaha

dulmi = xaq, darrada,  
tacaddiga

Duullaanka xoogga leh  
Halka dunida lala tegey  
Kaalaya bal daawada ...

Ninka dabarka goostoow

## III

dabarka = xadhig lugaha  
lagu xidho

Dayaxiyo daruuraha  
Iska daansha-daanshood

daansha- daanshood =  
taxaash, temeshle

Oo dabaqaddaa sare  
Inta dookhu nacas yahay

dookha = damiirka  
kaskiisa

Ka dillaalo samadaa ...  
Waxaa loo hamiyo digleeyey

dillaalo = qadhaabo

ham iyo digleeyahay =

loo musuusugayaa

daalka = naxashka

Nafta daalka saaran  
Dahabkeeda buuxiyo  
Doollarkeeda yaalla

doollar = lacagta  
maraykanka

darartay = caano ka buu

Hasha darartay caanaha  
Adaa deeq u bixiyee  
Dib inaad u maashana  
Waa lagaaga dacarayn  
Inta daylo maqan tahay  
Ishu daawanaysaa  
Afku hadalka dayn maayee

deeq = kaalo,

dacarayn = dhaaran

Halka dunida lala tegey  
Ummadyahay bal daawada  
Daandaansigii iyo  
Dulligiyo colaadaha  
Duullaanka xoogga leh  
Halka dunida lala tegey  
Kaalaya bal daawada  
Ummad yahay bal daawada  
IV) Ninka qolo u diranoow



Duullaanka xoogga leh  
Halka dunida lala tegey  
Kaalaya bal daawada  
Ummad-yahay bal daawada

duullaanka = weerarka

## Hees

II) Ninka diirka madowoow  
Daadduunka iyo  
Dulliga iyo gaajadu  
Waa dabecaddaadee ...  
Maydka dibadda yaal  
Dhiiggii ka daataa  
Dhulkii digo-dooriyoo  
Toban dayro dhaaf

daadduunka = qaxootiga

dulliga = darxumada

digo-dooriyey = dhalan-  
rog

dayr = xilliga xagaaga  
iyo jiilaalka u  
dhexeeya

Miyuu roobku da'ayoo  
Dhulkii doog ka soo baxay  
doog- tigaad, deegaan  
Waxad daacad mooddaa  
Ninka dabinka kuu dhigay

mooddaa = u malaysaa

dabinka = shirqoolka

Adduunyada bal daya  
Sida dabka loogu shidayo  
Daan-daansigiinniyo  
Dulmigiyo colaadaha

dulmi = xaq, darrada,  
tacaddiga

Duullaanka xoogga leh  
Halka dunida lala tegey  
Kaalaya bal daawada ...

Ninka dabarka goostoow

## III

dabarka = xadhig lugaha  
lagu xidho

Dayaxiyo daruuraha  
Iska daansha-daanshood

daansha- daanshood =  
taxaash, temeshle

Oo dabaqaddaa sare  
Inta dookhu nacas yahay

dookha = damiirka  
kaskiisa

Ka dillaalo samadaa ...  
Waxaa loo hamiyo digleeyey

dillaalo = qadhaabo

ham iyo digleeyahay =  
loo musuusugayaa  
daalka = naxashka

Nafta daalka saaran  
Dahabkeeda buuxiyo  
Doollarkeeda yaalla

doollar = lacagta  
maraykanka

Hasha darartay caanaha  
Adaa deeq u bixiyee  
Dib inaad u maashana  
Waa lagaaga dacarayn  
Inta daylo maqan tahay  
Ishu daawanaysaa  
Afku hadalka dayn maayee

darartay = caano ka huu

deeq = kaalo,

dacarayn = dhaaran

Halka dunida lala tegey  
Ummadyahay bal daawada  
Daandaansigii iyo  
Dulligiyo colaadaha  
Duullaanka xoogga leh  
Halka dunida lala tegey  
Kaalaya bal daawada  
Ummad yahay bal daawada  
IV) Ninka qolo u diranoow

Inaad daw ku joogtid  
Doqon-yohow ha moodine  
Kuwii gubay docdoodii  
Degtaa reerihii yaal  
Taariikhda dibu baadh  
Bal daymoo hareeraha  
Deeradiyo biciidkii  
Wada daaqi jirey iyo  
Dibigii casaa iyo  
Lo'dii joogtey dooxada  
Dixda ceel dhanaan geeli  
Darka loogu xidhi jirey  
Wankii daylanaayee  
Duddumada ka weynaa

*daw = gar, xaq, sax*  
*docdoodii = dhankoodii*  
*degtaa = meeshaa*

Ugaadhii dalkiiska  
Lagu daawan jirey iyo  
Aaway duunyadoodii?  
Dadweynii maxaa helay?  
Ma dhulkaa la wada degey?  
Dalandoolka caydheed  
Dalawgiyo harraadkiyo  
Gaajada ku dubataa  
Halka dunida lala tegey  
Kaalaya bal daawada  
Ummad-yahay bal daawada  
Ninka samaha diidoow  
Ogoow dawlad baanee

*darka = weelka xoolada*  
*lagu waraabiyoo*  
*daylanaa = qaarka hoos*  
*madoobaa gaashada lala*  
*duduumada = aqalka*  
*aboorku dhoobada ku*  
*sameeyo*

*duunyo = xoolaha hoos*  
*guunyo*

*dalan-dool = daadduur*

Geesi kaa da'weynoo  
Wanaag doonayaanee  
Waayaha dambeetana  
Nin dersaaya baan ahay  
Caano daatayba  
Dabadood la qabay  
Doodda inan ku goynaa  
Ninka soo daliilshee  
Soo dibad dhigaan ahay  
Cod durugsan, durugsan  
Lagu dabar go'aa  
Dalkayaga ninka  
dirirayaanee  
Xumaha yaan lagu degdegin  
Wanaagga ayaan la daadin  
Dul iyo hoos, doc iyo guud  
Waxaan dani kuugu jirin  
Lagaaga digyee ka daa  
V)Wixii shaydaanku  
duufsaday  
Alloow dembigooda dhaaf  
Daruur caafimaad qabtaa  
Alloow dalkayaga ku hoortaa.  
Durdurrada jannada eebboow  
Adigu noogu deeq  
Alloow diintayada adkee  
Ilaahoow daacadnimo.

*waayahan = beryahan*

*daatay = qubtay*

*durugsan = fog,*

*daadin = tuurin,*  
*dhaafin*

*duufsaday = kaxaystay*  
*hufiyey*

*dhaaf = ka saamax*

*daruur = nogol, tus,*  
*roob*

*hoortaa = da'daa*

*deeq = gargaar, caawi*

## H E E S

VI.) Galbataye adduunyadu

kala-guurka lagu dhacay

Qaylada gadhoodhiyo

Gulufkiyo colaadaha

Intaan waagu galac odhan

Nin garaad xunbaa sugi

Kuwa gorodda ruxayoow

*gadhoodh = khamiirtay*

*garaad-xun = maangaab*

*gorodda ruxayoow =  
madaxa ruxaya*

Sheekada galoolley

Googgaale weeyoo

Gadh-madoobe xaajadu

Gaaggixiyo lama helo

Guntintiisa lama furo

Garta laba dhex taallana

Lama gaadhi waayine

*googaale = halxidhaale*

*gaagixiyo = gudhiyo*

*gaadhi waayin = garan  
waayin*

*garab-mar = gees laga  
dhaafay*

Wax loo garab maraayaa

Gawsaha waraabee

Ka xidhiidhsan gudhiyo

Waa xeelad gaaroon

Lagu garannin weeyaan

*xeelad = tab, farsamo*

Soddoon gu' iyo dheeraad baa

Falasdiin la gabraaranaayey

*gu' = sannad, 12 bilood*

*gabraaranaayey =  
ugaadhsanaayey*

Mar haddaanan garab iyo

Gaashaan ku siinayn

Geesaha galiilyada

Gabaygiyo tusaalaha

Guubaabo ugu filan

*guubaabo = baraarujin,  
kicin*

Runtan geedka lagu xidhay

Gacal weydey iga daa

Geerida xusuusta leh

Nafta gocaniyeey joog

Guullahaa u soo noqo

Nafta kii i geliyoow

*geliyoow = abuurayoow*

Nebigii garaadkiyo

Garashada lahaayoow

Gurmad awliyaadoow

Sahnuunta intood gembido

aammiin

*gembido = rogto, jabiso*

Alloow gurigeeda bii

Aammiin

Alloow gabbal baas u dhaco

*dhaco = dumo, galo*

Alloow gaaladu jabtaa

Alloow diinta u gargaar

Alloow guushana na sii

Falasdiin go'dee

Gallad iyo Alloow

Gaadhsii xornimo ...

QAYBTA TODDOBAAD

# HESHIISYADII

I - DAWLADDA DJABOUTI  
IYO FRUD

II - DIB U HESHIISIINTII  
URURRADA SOOMAALIYA

JAMHUURIYADDA DJIBOUTI  
Midnimo-Sinnaan-Nabad  
"AXDIGA NABADDA IYO DIB U-HESHIISIINTA  
QARANKA"

Isniintii 26kii Disamber 1994kii,  
Xukuumadda JAMHUURIYADDA DJIBOUTI iyo  
JABHADDA DIBU SOO CELINTA MIDNIMADA IYO  
DIMUQRAADIYADDA (FRUD)

**GOGOL-DHIG**

DAWLADDA JAMHUURIYADDA DJIBOUTI Iyo  
JABHADDA DIBU-SOO-CELINTA MIDNIMADA IYO  
DIMUQRAADIYADDA (FRUD) oo ugu magacaaban  
dhinacyada heshiiskan dhexdiisa.

Ka dib falanqayntii qotada dheerayd ee ay kaga  
baaraandegayeen dhammaan su'aalaha, sidii ay kusoo  
unkameen iyo sababihii kasoo dhasheen khilaafka beeray  
colaadda hubka laysu qaatay iyo qalalaasaha halista ah,  
ayna isla QIREEN cawaaqib-xumida

Iyagoo ku welwelaya si dalkan looga badbaadiyo  
mashaqooyinka ku habsaday qaar mid ah dalalka Gobolkan  
ku yaalla,

Iyagoo garwaaqsan badbaadinta iyo dhawridda karaamada  
ummadnimada Ma-dhaafaanka ah, waloow ay jiraan  
dabinno, iyadoo lagu xisaabtamayo waayaha gaar ahaaneed  
ee dalkeenna iyo duruufihiisa degaan-dhuleed iyo dhaqaale.

Iyagoo ku kalsoon hoggaaminta waayeenimo ee Madaxweyne XASAN GUULLEED APTIDOOON oo seeska u dhigay ku dhaqanka Furfurraanta dimuqraadiyeed, dhismaha hay'adaha ka jawaabaya baahiyaha casriga ah oo la socda awaalaha caalamiga ah ee xilligan.

Iyagoo ku qanacsan Inay rabitaanka dhinacyada oo keliya tahay awoodda xal loogu heli karo khilaafka boogihisa, iyo xaqiijinta dibu-heshiisiin qaran, Xal waara oo lagaga raysan karo colaaddana aanay keeni karayn cid aan ahayn dhinacyada ay khusayso, iyadoo uu ka maqan yahay dhinac saddexaad oo u kala ergeeyaa,

Iyagoo ku iimaan qaba in heshiis is afgarad dhab ah oo lagu gaadhaa, soo af-jari karo qalalaasahan, uu keeni karo xal caaddil ah oo waara.

Iyagoo tixgelinaya kala geddisnaanta dhaqan iyo dhaqaale-bulsheed iyo weliba faraqa u dhexeeya gobollada iyo sinnaan la'aanta ka jirta bulshada reer Djibouti dhexdeeda,

Iyagoo rabitaankoodu yahay in xalkani ahaado mid u jeeda, isla markaa, in lagu gaadho midnimada xoojinteeda, heshiis qaran iyo midnimada dalkaba.

Waxay ku adkaysanayaan, ugu dambayntii, iyagoo cuskan qiyamta Dimuqraadiyadda muqaddaska ah ee uu dhigayo **DISTUURKA** Jamhuuriyadda Djibouti, Waxay ku heshiyeen, wada hadalladoodaas Nabad,eed oo Djibouti ka dhacay, Arrimaha soo socda:

## QODOBBADII HESHIISKA

### Qodobka 1aad XAGGA MABAADI'DA GUUD

Wuxuu ka kooban yahay (xambaarsan yahay) heshiiskani qaabkii ay gudihisa ku dhammays-tirmaysey dhidibbo-u-aaska **NABAD** Caaddil ah oo waartaa siday u dhex-mar lahayd dhammaan dadka Reer Jabbuuti. Dammaanad qaadka dhaqan-gelintiisa waa mas'uuliyad u dhex ah oo ay u siman yihiin labada dhinac. Xukuumadda Jamhuuriyadda Jabbuuti baa dammaanad-qaadaysa mas'uuliyadda ilaalinta Qodobbadiisa iyo Hirgelintoodaba.

### Qodobka 2aad XAGGA HAY'ADAHA

Jabhadda **FRUD**, dhinaceeda waxay oggolaatay, aqbashayna inay u hoggaan-sanaadaan Distuurka, Qawaaniinta iyo Xeerarka lagaga dhaqmo Jamhuuriyadda Jabbuuti iyo ixtiraamka qodobbadooda (dhawridda). Markay noqoto lagama maarmaan in qodobbada Distuurka qaar ka mid ah in dib loogu noqdo (wax laga beddelo), waxay diraasadeedu ku ansaxaysaa kaddib keliya iyadoo loo maro hab ka Distuuriga ah.

### Qodobka 3aad

#### XAGGA HABKA NABAD SOO CELINTA

A/ In tallaabooyinka lagu xasilinayo loo maro dib-u-soo noolaynta kalsoonida iyo tirtiridda wax kastoo nabadgeliyo darro u adeegaya, oo ujeeddadoodu tahay dhiirri gelinta isusocodka Badeecadaha iyo dadka si ay isagaga gooshaan dalka gudihiisa, waxaa lagu xaqiijinayaa baabiinta dhammaan baaraashyada (kontoroollada) iyo habka baadh itaanka aan caadiga ahayn, oo la joojiyo.

B/ Xukuumadda Jamhuuriyadda Jabbuuti waxay ballanqaaday sii amba-qaadka dedaalkii ay hore ugu tallaabsatay ee ujeeddadiisu ahayd Dibu-dhiska Dhismeyaasha Adeegga iladii (Dhismeyaasha Maamul, Caafimaadka iyo rugaha biyaha iyo wixii la mid ah).

C/ Xukuumadda Jamhuuriyadda Jabbuuti, inay qaabbisho bixinta wixii gargaar taageero ah ee loo fidinayo qoysaskii ku tabaaloobay dagaalladii- mid jidh, hanti-gaar, ahaan eedba ka soo gaadhay. Waxaanay adeegsan doontaa waddo kasta iyo hab kastoo lagaga midho dhalin karo xaqiijinta muhimmaddaas.

D/ Jabhadda FRUD waxay ku nidar-gashay sidii ay dadkeeda taageerayaasheeda, u ah ee xuduudda dalka dibadeeda qaxootiga ku ah sababihii dagaallada awgood, sidii ay ugu soo qancin lahaayeen inay waddankooda dib ugu soo noqdaan.

Sidaa awgeedna Jabhadda FRUD waxay ballan-qaadaysaa in ay Xukuumadda soo gaadhsiiso Magacyada dadka Reer Jabbuuti ah ee arrimuhu khuseeyaan, si ay Dawladda ugu suurto-gasho inay gaadhsiiso kaalmo iyo taageeraba.

### Qodobka 4aad

#### XAGGA LIISASKA DOORASHOYINKA IYO WARAAQAHA AQOONSIGA

Arrimaha la xidhiidha dibu-cusboonaynta (dibu-habaynta) habka Liisaska Doorashooyinka iyo Bixinta Warqadaha Aqoonsiga, waxay labada dhinac isla qaateen:

a. Baahida loo qabo dibu cusboonaynta Liisaska Doorashooyinka, inta ka horraysa doorashooyinka soo socda;

b. In Waraaqaha Aqoonsiga ee Muwaadinnimada la siiyo dhalliyarada gaadhay da'da Qaanuunku ogool-yahay, iyo qof kastoo soo dalbada oo buuxinaya shuruudaha looga baahan yahay.

c. Dedejinta go'aan qaadashada hawlaha lagu dhammaystirayo Waraaqaha Dhalashada ee Gobollada oo dhan.

### Qodobka 5aad

#### DEDAALKA WAX-BARASHADA

Dhinaca Dedaalka tacliinta, xaqiijinteeda, xeerarkii jee-dhaafka ee loogu danaynayey ardadii dib uga dhacday sannad-diraasadeedkii waxbarasho sababaha dagaalkaa Awgood sidooda loogu tixgelin inta ay ka dhammaysanayaan wax-barashadooda.

Qodobka 6aad  
XAGGA ISU-DHEELLITIRKA XIL-QAYBSIGA  
EE HAYKALKA DAWLADEED DHEXDIISA

Iyadoo ujeeddadu tahay in laga jawaabo codsiga labada dhinac midkood walba ka yimid, iyo iyadoo laga dhaqaaqayo mabaadi'da laysla oggolyahay in si isku mid ah loogu sahmiyo Hilin Nabadda lagu soo dabbaalo, waxay Xukuumaddu Ballan-qaaday inay Xubnaha FRUD u hawlgeliso Shaqooyinka dhinacyada Siyaasadda, Ciidammada, Maamulka, Dhaqaalaha iyo Arrimaha Bulshada hab waafaqsan Qodobbada iyo tirooyinka ku xaddidan Heshiis Wadasjirka ay labada dhinac wada gaadheen ee ku qoran Lifaafa Heshiiskan Nabadda ku xidhan. Waxayna Qodobbadaasi la xidhiidha hawl-gelinta Dagaal-yahannada dhinaca ciidammada ku xidhan yihiin shuruudda ah soo noqoshada tiro cayiman oo laysla ogyahay oo Ciidammada Jabhadda ah iyadoo hubkoodii wata.

Qodobka 7aad  
XAGGA CAFISKA GUUD

In Askarta iyo Xubnaha firfircoon ee FRUD, dalka dibaddiisana laajiga ku ah, dhammaantood iyadoon la kala rebin, in loo fidiyo cafis guud oo lagaga saamaxayo wixii ay ku geysteen dhacdooyinkii ka horreeyey 12kii Juun, 1994kii, iyadoo si buuxda loogu gudayo xuquuqda muwaadinnimo ee qaanuunku u sugayo, Dawladduna ay Dammaanad qaadayso Nabad-gelyadooda.

Qodobka 8aad  
XAGGA JABHADDA FRUD OO ISU BEDDESHA XISBI  
SIYAASADEED

a/ Isla marka saxeexa Heshiiskan Nabadeed qalinka lagu duugo, waxay Jabhadda FRUD isu beddeli doontaa Xisbi Siyaasadeed oo Sharci ah, oo ka caaggan dagaal hubaysan, si buuxdana uga qayb-gelaysa arrimaha nolosha siyaasadeed ee qaranka, iyadoo afkaarteeda si madax-bannaan ugu daafacaysa hab nabadeed, sidaasna ay Xukuumaddu ballan-qaaday inay aqbasho  
.b/ FRUD waxay ka qayb-gelaysaa Maamulka Arrimaha dalka iyadoo kula qaybtamaysa Xisbiga Talada Dalka haya, iyadoo u maraysa habka Heshiiskan iyo Barnaamij Siyaasadeed oo ay labada Xisbi wada-jir u dejiyaan.

Qodobka 9aad  
XAGGA MAAMUL FURFURIDDA

Marka si buuxda Nabadda iyo isku-kalsoonaanta qaran loogu soo dabbaalo dalka, waxa la jaan-qaadaya dhaqan galka Maamul furfuridda la xidhiidha wareejinta awoodaha iyo talooyinka arrimaha qaarkood in maamulkooda lagu wareejiyo deegaannada gobollada Jamhuuriyadda Jabbuuti, kuwaasoo dhismahoodu loogu gogol-xaadhi doono Guddi Qaran loo qabanayo oo ka kooban dhinacyada Siyaasadeed ee dalka ka jira oo dhan ujeeddadoodu tahay xidhiidka Maamul baahinta dalka.



QODOBKA 10 NAAD  
XAGGA DIBU-DHISKA HORUMARINEED IYO  
KOBICINTA DHAQAALAH

Iyadoo ujeeddadu tahay hagaajinta shaqada wax-soo saarka dhaqaale ee gobollada dalkoo idil, ayaa loo jeedinayaa bangiga horumarinta Jabbuuti inuu ku-talo-gal gaar u qoondeysan leh ugu dejiyo ujeeddooyinka loo cayimay ee ku wajahan abuurista hay'ado yaryar oo horumarineed. Xukuumaddu waxay garbaha u ridanaysaa inay awooddeeda looga baahan yahay dul -dhigto dhismaha iyo dibu yagleelka (dibu-soo-noolaynta) mashaariicdii horumarinta ee dagaalku hakiyeen ama uu baajiyey khilaafku. Taasoo awgeedna ay xukuumaddu hawl gelayso inay kala xidhiidho dalalka deeqda bixiya... Sidoo kale inay waajib tahay dhismaha (abuuridda) mashaariic cusub oo lagama maarmaan ka dhigeen duruufaha marxaladdan cusubi.

QODOBKA 11 AAD  
HABKA LOO HIRGELINAYO

In hirgelinta qodobbada heshiiskan qaarkood iyo sido kale waqtiyada fulintoodaba diyaariyey afar nuqul - laba luqudda faran siiska ku qoran iyo laba af carabi ku qoran-oo ay wadajir u saxeeeen mid walba labada dhinac, dhinac walibana haysanayo laba nuqul oo ASLI ah. Laguna soo daabici doono jariidadda rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Jabbuuti.

Waxa lagu tafatiray : Jabbuuti 26 kii Diisambar Sannadka 1994 ka.

Waxa u kala saxeeexay

XUKUUMADDA  
Jamhuuriyadda Jabbuuti  
Wasiirka Arrimaha Gudaha  
Idiris HARBI Farah

FRUD  
Xoghayaha Guud.  
Ugurreh Kifle Ahmed

SHIRKA NABADDOONKA SOOMAALIYEED  
OO AY KA SOO QEYBGALEEN JABHADAAHA  
S.S.D.F - S.P.M. U.S.C.- S.D.M

(DJIBOUTI OS-11/06/1991)

Odayaasha nabaddonka Soomaliyeed iyo Jabhadaha S.S.D.F. - S.P.M. - U.S.C. iyo S.D.M ayagoo ka jawaabaaya maajo 1991, Mudane Xaji XASSAN GUULEED APTIDON, madaxweynaha jamhuriyada Jabuuti ayaa shirka dib-u-heshiinta shacbiga soomaaliyeed (SOMALI NATIONAL RECONCILIATION CONFERENCE) ka furmay magaalo madaxda dalka Jabuuti ee Jabuuti.

Shirkan oo bilaabmay 5ta bisha Juun, 1991 waxa rasmi ahaan golaha ummada ee jabuuti uga furay mudane madaxweyne Xaji XASSAN GUULEED APTIDON. Khudbadiisa furitaanka Madaxweynaha Jabuuti wuxuu ka-qaybgalayaasha kula dardaarmay aadna hoosta uga xariiqay inay si aad ah, maanta soomaaliya haysta, ayadoo la ilaabaayo wixiihorey u dhacay lagana taliyo danta, aayaha iyo mustaqbalka soomaaliyeed.

Mudane Xaaji AADAN CABDULLE CUSMAAN asagoo ku hadlaaya magaca odayaasha iyo ergooyinka jabhadaha wuxuu kaga mahadceliyay al-Xaaj XASSAN GUULEED APTIDON, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti iyo xukuumaddiisa qabanqaabada shirka iyo martigelinta ergooyinka, wuxuuna ballan qaaday dadaal iyo daacad si loo gaaro hesiis dhaliya nabad waarta, sugana midnimada soomaaliyeed.

Xafladda furitaanka ka dib waxaa shir-guddonka la wareegay Madaxweynihii laad ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed Mudane AADAN CABDULLE CUSMAAN oo ay wehliyaan 2dii Wasiir laad ee dowladihi 1969kii ka

horeeyey Mudaneyaal cabdirisaaq Xaaji XUSEEN Iyo MAXAMAD XAAJI IBRAAHIM CIGAAL. Waxa kaloo iyana goob-joog ahaa dhammaan odayasha nabaddonka Soomaliyeed oo iskood isu-xilsaaray oo wax ka hoggaminaayay shirka (ARAG LIF. "A")

Shirka dib u heshiinta shacbiga Soomaliyeed asagoo:

- Tixgeliyey baahida loo qabo in si degdeg ah loo joojiyo dagaalka sokeeye iyo dhiiga soomaaliyeed ee sida joogtada ah u daadanaaya,

- U arkay lagama maarmaan in dalka, soomaaliyeed laga badbaadiyo burburka, lana sugo jiritaanka dawladnimada iyo midnimada dalka iyo shacbiga soomaaliyeed oo maanta meel halis ah ku sugan,

- U arkay lagama-maarmaan in jabhadaha S.S.D.F.- S.P.M.- U.S. C. iyo S.D.M cududdooda iyo caqligoodaba u mideeyaan sidii loo soo celin lahaa qaran-nimada soomaaliyeed si wadajir ahna u waajahaan wixii weerar ku ah,

- Qaddariyey mudnaan gaar ahna siiyey dardaarankii Mudane XASSAN GUULEED APTIDON Madaxweynaha Jamhuriyada Jabuuti, iyo sida walaaltinimada leh, oo ay dowladda iyo shacbiga Jabuuti isugu howleen welina ugu yihiin heegan sidii waddanka Soomaaliyeed nabad loogu soo celin lahaa.

WUXUU GUDOONSADAY AJENDDADA SOO SOCOTA

1/ In laga hadloo Maxamad Siyaad Barre iyo ragga taageersan wixii laga yeeli lahaa, isla markana go'aan loo wada dhan yahay laga guddoonsado, 2/ In laga doodo habka

nabad loogu soo celin lahaa waddanka Soomaaliyeed  
3/ In muddo loo qabto shir Soomaaliyeed oo loo dhan yahay,

4/ In laga hadlo arrinta Soomaalida waqooyi, iyo,

5/ In laga hadlo dhismo xukuumad KMG ah oo loo dhan yahay

Ka dib markii si qotadheer oo lagu lafaguraayo qodobbada kor ku xusan ay uga doodeen xubnaha mattilaayey jabhadaha kor ku tilmaaman, ayagoo niyad fiyow, Soomaalinimo ku dheehan tahay, u abbaaraayey nuxurka arrimaha shirka horyaallay waxay si wadajir ah ugu heshiiyeen qodobbada soo socda:

1. Shirku wuxuu isku raacay in Maxamad siyaad Baare, oo mucaaradada iyo shacbiga Soomaaliyeed ay rideen taariikhdu markay ahayd 26 January 1991, uu dambi weyn ka galay dadka iyo dalka Soomaaliyeed, haddana joogidiisu khatar ku tahay nabad gelyada, xasiloonnida iyo midnimada dadka iyo dalka Soomaaliyeed. Sidaa darteed shirku wuxuu guddomi yay in:

a) Baaq u jeediyo Maxamad Siyaad Barre in uu dalka uga baxo si deg-deg ah,

b) Haddii kale dagaal loo wada dhan yahay lagu qaado

c) Maxkamad cadli ahna la soo taago isaga iyo taageerayashiisi hore iyo kuwii dambeba.

2/ Shirku wuxuu isku raacay in lagu baaqo nabadgelyo guud oo dalka oo dhan saameysa lagana hirgeliyo xasilooni iyo nabad waarta. Wuxuu shirku ugu baaqayaa dadweynaha Soomaaliyeed in Jawigii colaadda lagu beddelo jawi nabadeed, walaatinimo wada noolaasho iyo isafgarad. Waxaa sidoo kale jabhadaha iska soo

horjeeda loogu baaqayaa iney xabadda

iyo dagaallada ka dhex socda si deg-deg ah u joojiyaan, si loo baajiyo dhiigga qubanaya oon dani ugu jirin dadweynaha Soomaaliyeed iyadoo la tixgelinaayo oraahdii ahayd "dagaal wiil baa ku dhintee, wiil kuma dhasho"

Arrinta xabadd joojiinta waxay jabhaduhu isla garteen in ay si wada jir ah iyo keli keli ahaanba u fuliyaan.

3. Shirku wuxuu isku raacay in magaca shirku noqoo shirka dib-u-heshiisiinta shacbiga Soomaaliyeed (S.N.R.C.)

- SOMALI NATIONAL RECONCILIATION CONFERENCE.

Shirka labaad ee S.N.R.C. waxaa lagu qaran doona muddo 30 maalmood guddhooda dalka Jabuuti laga billaabo 13 Juun 1991.

Shirka waxaa ka soo qeyb geli doona dhamaan jabhadaha kala ah: S.S.D.F., S.N.M., S.P.M, U.S.C., S.D.M., S.D.A., U.S.F.

Waxaa lagu heshiiyey in tirada rasmiga ah ee ergo kasta ka koobanto ayan ka badan (toddoba)

AJEENDADA SHIRKA 2AAD WAXAA KAMID NOQON DOONA.

a) Meelmarin dastuur ku meel gaar ah,

b) Magacaabid barlamaan ku meel gaar ah,

c) Doorasho madaxweyne ku meel gaar ah,

d) Dhismo xukuumad ku meel gaar ah oo loo dhan yahay

Guddiga qabanqaabada shirka wuxuu ka koobanyahay dowladda Jabuuti, odayaasha shir-guddonka shirkii kowaadiyo xubno ka socda Jabhadaha.

4/ Wuxuu shirku isku raacay in midnimada iyo wadajirka dadka iyo dalka Soomaaliyeed ay muqadas tahay, waxaana

loogu baaqayaa lagana codsanayaa ururka S.N.M iyo walaalahayaga waqooyi iney shirka labaad ee S.N.R.C ka soo qeyb galaan. Waxaa shirku guddoonsadayin wafdi loo diro gobollada waqooyi oo ka kooban odayaasha shir guddoonka iyo hoggaamiyeyaashaa wufuudda affarta jabhadood ee shirkan ka soo qeyb galay.

Xubnaha shirka waxay kaloo ku heshiiyeen in ammaan, qaddarin walaaltinimo leh ay si wadajir ah ugu jeediyaan Mudane al-Xaaji XASAN GUULEED APTIDOON, madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, dowladda iyo shacbiga Jabuuti, waxayna uga mahadcelinaayaan sida walaaltinimada ah ee ay uga damqadeen dhibaataada Soomaaliyeed, sida xowliga leh oo ay u qaban qaabiyeen shirka iyo wanaagga ay u martigeliyeenba.

Waxaa kaloo xubnaha shirka ay bogaadin u jeedinayaan odayaasha Soomaaliyeed ee nabaddonka ah oo iskood isu xilsaray soona abaabulay dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta jabhadahaan.

Ugu dambeyntii, jabhadaha S.S.D.F. - S.P.M. - U.S.C. iyo S.D.M ergooyinkooda waxay si alla-ka-cabsi-leh u ballan qaadaan fulinta go'aannada shirkan ay ku guddoonsadeen.

Shirku wuxuu xirmay 11/06/91 waxaana si rasmi ah usoo gebogabeeyey Mudane al-xaaji XASSAN GUULEED APTIDOON, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti.

## SAXIIX

GUDDOOMYAHA S.S.D.F  
GUDDOMIYAHA ERGADA U.S.C  
MUUSE ISLAAN FAARAX  
XUSEEN MAXAMAD BOOD  
GUDDOOMIYAHA S.P.M  
GUDDOOMIYAHA ERGADA S.D.M  
CUMAR MACALLIN MAXAMAD  
CABDI MUUSE MAYOW

WAXAA HORTOODA LAGU SAXIIXAY:  
MUDANE AADAN CABDULLE CUSMAAN  
MADAXWEYNAHA 1AAD EE J.S  
MUDANE MAXAMED X.IBRAHIM  
MUDANE ABADIRASAQ X.XUSEEN  
RA'IISULWADARA HORE EE J.S  
RA'IISULWASARA HORE EE J.S

MUDANE MUUMIN BAHDDOON FAARAX  
WASIRKA ARIMAHA DIBADA JAM.JABUUTI

jabuuti, 12/06/1991

LIFAAQA "A"

SHIRWEYNAHA NABBADDOONKA SOOMAALIYEED  
OO LOGU QABTAY MAGAALA MADAXDA JABUUTI  
EE JAMHURIYADDA

JABUUTI, INTA U DHAXEYSA OS-11/06/1991, UU  
ABAABULAY AL-XAAJI XASAN GUULEED  
APTIDON, MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA  
JABUUTI, KANA QOO QAYBGALEEN  
SHIRGUDDOONKA

- Mudane al Xaaji XASAN GUULEED APTIDON  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Djabouti:

GUDDOOMIYE SHARAF

XAAJI AADEEN CABDULLE CUSMAAN:

GUDDOOMIYE

MAXAMED IBRAAHIM CIGAAL: LA-GUDDOOMIYE

CABDIRIZAQ XAAJI XUSEEN: LA GUDDOOMIYE

CABDUQAADIR MAXAMED AADEN: XUBIN

CUSMAN AXMED ROOBLE: "

CUMAR XUSEEN CABDI (QOREY) "

MAXAMUUD YUSUF AADAN (MUURO) "

MUUSE XASAN SHEIKH "

CUSMAAN MAXAMAD JEELLE "

AF-HAYEENKA SHIRKA

Mudane Muumin Bahdoon Faarax wasiirka arrimaha  
dibedda iyo iskaashiga ee Jamhuuriyadda Jabuuti,

LIFAAQA "B"

JABHADDA U.S.C. OO AY WAKIIL KA YIHIIN:

1/ XUSEEN XAAJI MAXAMED BOOD

HOGGAAMIYAHA ERGADA

2/ CIISE WEHELIYE MAALIN

XUBIN

3/ CUMAR UGAAS MUUMIN

XUBIN

4/ CABDULQAADIR CABDI MAXAMAD

XUBIN

5/ MAXAMAD SHEIKH GABIOUW

XUBIN

6/ CABULQAADIR SHEIKH CILMI "

7/ CALI XAAJI YUUSUF "

8/ AXMED RAAGE CABDI "

9/ SHEIKH MAXAMED IIMAAN "

10/ ABUUKAR CISMAAN ABIKAR "

11/ CABDISHAKUUR SHEIKH IBRAAHIM "

12/ MAXAMAD SACIID CIYOW (jentelmen) "

JABHADA S.D.M OO AY WAKIIL YIHIIN

1/ CABDI MUUSE MAYOW

HOGGAAMIYAHA ERGADA

2/ MAXAMUUD XAAJI MAXAMED

XUBIN

3/ ABUUKAR CUMAR SHEEGOW

XUBIN

4/ CUMAR MAXAMED IBRAAHIM

- 5/ XASAN SHEIKH IBRAAHIM
- 6/ MAXAMAD CALI XAAMUD "
- 7/ MAXAMAD SHEIKH CUSMAN (jawari) "
- 8/ CUMAR SHEIKH CUSAN MUSSE "
- 9/ CALI CABDI AADAN "

JABHADA S.S.D.F OO AY KA WAKIIL KA YIHIIN

- 1/ MUUSE ISLAAN FAARAX  
HOGGAMIYAHA ERGADA
- 2/ BOQOR CABDULLAAHI BOQOR  
XUBIN
- 3/ MAXAMAD ABSHIR MUUSE "
- 4/ CABDUULLAAHI MAXAMUUD  
(MATUKADE) "
- 5/ CABDUULLAAHI FAARAX HOOLIF "
- 6/ XSAN CALI MIRE "
- 7/ YUSUF MAXAMAD ISMAACIIL (bari bari) XUBIN
- 8/ MAXAMAD YUSUF ABSHIR  
xubin

JABHADA S.P.M. OO AY WAKIIL KA YIHIIN

- 1/ CUMAR MACALIN  
HOGGAAMIYAHA ERGADA
- 2/ SIRAAJI CABDULLAAHI CUSMAN  
XUBIN
- 3/ CUMAR MAXAMAD CABDIRAXMAAN  
XUBIN
- 4/ MAXAMAD CUMAR CUSMAAN  
XUBIN

XUBNO MADAXBANAAN

- 1/ MAXAMUUD JAAMAC (JUGE)  
XUBIN
- 2/ MAXAMAD CALI XAASHI  
XUBIN
- 3/ SHIRE SUUDI MAXAMUUD  
XUBIN
- 4/ MAXAMAD MAXAMUUD FAARAX  
XUBIN

GOOB JOOGAYAAL

- 1/ SHARIIF ABUBAKAR CAYDRUUS (SHARAFOW)
- 2/ CALI MAXAMUUD XASAN

**Daabacaaddii koobaad  
Bishii labaad 1998**

**Aqalka Ummadda (Palais du Peuple)  
iyo  
Madbacadda Qaranka (Imprimerie Nationale)  
DJIBOUTI**